

HALABUUR

*Journal of Somali
Literature and Culture*

*Wargeys-Xilliyeedka
Suugaanta iyo Dhaqanka Soomaalida*

Vol. 2, Nos.1 & 2, 2007

Xirmo 2, Tr. 1 & 2, 2007

**Special Issue on the Occasion of the 30th Anniversary of
Djibouti's Independence: The Role of Literature & Culture.**

- *Ummad aan Afkeeda Daryeelin
Horumar Ma Gaadho - Waraysi,
Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle*

- *Halgankii Gobannimo-doonka
Jabuuti Iyo Kaalintii Halabuurka
Aw Jaamac Cumar Ciise*

- *Of Tamarind and Cosmopolitanism
Nuruddin Farah*

- *Calan-Xiis (Maanso)
Xaashi C. Orrax*

- *Maalintii Digool Yimid
Marxuum Ibraahim Gadhle*

- *Sittaat : Women's Religious
Songs in Djibouti
Lidwien Kapteijns*

- *Theatre as a Window on Society
Maxamed Daahir Afrax*



*An independent International Periodical in English and Somali for the
documentation, dissemination and study of Somali literature, art and culture.*

HALABUUR

Journal of Somali
Literature and Culture

Wargeys-xilliyeedka
Suugaanta & Dhaqanka Soomaalida

Waa wargeys-xilliyeed madax bannaan oo isku hawla ururinta, darsidda, faafinta iyo horumarinta suugaanta, afka iyo dhaqanka Soomaalida, meel ay joogta.

Volume 2, Nos. 1&2, 2007

Xirmo 2, Tr. 1&2, 2007

HALABUUR (ISSN 0968-9184) is an independent, not for profit, literary and cultural journal in Somali and English. It is published bi-annually in Djibouti and London and distributed in different countries in Africa, Europe, North America and the Middle East.

This is a special double issue, which coincides with the 30th anniversary of Djibouti's independence and gives special attention to how literature and culture served as the voice and record of the Djibouti's liberation and nation building.

Tirsi-lammaane gaar ah oo ku soo beegmay xuska sannadguuradii 30^{aad} ee dhalashadii Jamhuuriyadda Jabuuti, sidaa awgeed iftiiminaya kaalintii fanka iyo suugaantu ka qaateen xoraynta iyo qaran-dhiska Jabuuti. Waa HADI-YAD tifaftirayaashu madaxweynaha iyo shicibka Jabuuti ku Qaddarinayaan dadaalka weyn ee daryeelka halabuurka, goraalka iyo dhaqanka ummadda.

Copyright © Halabuur 2007.

All rights reserved.

This publication or parts of it may not be reproduced, stored, or transmitted in any way without prior permission from the Publisher.

ISSN 0968-9184

Published by Halabuur Centre for Culture and Communication.

All correspondence should be

directed to:

Halabuur

P.O. Box 725, Djibouti,
Republic of Djibouti.

Email: journal@halabuurcentre.org

Tel. (253) 320430

Fax: (253) 35 9868

Website:

www.halabuurcentre.org

Editor-in-Chief / *Tifaftire Guud*

Maxamed Daahir Afrax

Associate Editor / *Tifaftire-Kaaliye*

Lidwien Kapteijns

Web Editor & UK Representative / *Agaasimaha Internetka & Wakiilka UK*

Abdisalam Issa-Salwe

Technical Manager / *Agaasimaha Farsamada*

Omar Said Bileh

Editorial Secretary / *Xoghayaha Tifaftirka*

Burhaan Axmed Daahir

Hargeysa Representative / *Wakiilka Hargeysa*

Sacdiya Muuse Axmed

Circulations Director / *Maamulaha Dad-gaarsiinta*

Maxamed Axmed Suldaan

Editorial Team / *Babda Tifaftirka*

Aadan Xasan Aadan

Ibraahin Yuusuf Axmed "Hawd"

Maxamed Cabdillaahi Riiraash

Muxibba Gacayte

Cabdalla Xaaji Cusmaan

Ilhaam Shiikh Muuse "Dheemman"

Editorial Advisory Board / *Golaha Talobixinta*

Xaashi Cibdillaahi Orrax – *Chair*

Mohamed Ziad Doualeh

Ismail Hussein Tani

Omar Abdulaziz

Nuruddin Farah

Idris Yousuf Elmi

Abdulqawi A. Yusuf

Mahamed Ibraahim Yasiin

Maxamed I. Warsame "*Hadraawi*"

Zahra Jama Saleh

Cali Sugulle Dun-Carbeed

Siciid Jaamac Xuseen

Aw Jaamac Cumar Ciise

Yuusuf Xaaji Cabdillaahi

Martin Orwin

Burhaan Warsame

Georgi I. Kapchits

Anwar Maxamed Diiriye

Jaamac M. Xayd

Saalax Xaashi Carab

Notes on Contributors to this Volume *Curiyeyaasha Qoraaldada Tirsigan*

Aadan Xasan Aadan (Beleloo) is a Djiboutian poet, translator, and researcher who just published a collection of his poems in Somali. (See book news).

Aamina Aw-Cali is a Djiboutian poetess famous for her nationalist poetry.

Abdourahman A. Waberi is a famous Djiboutian writer in French who has written many novels, short-stories, poetry, and essays; he is based in France.

Abdulqawi Yusuf is an international scholar of law, author and co-author of number of books and numerous articles, founder and general editor of the African Year-book of International Law, general counsel of UNESCO.

Ali Moussa Iye is a scholar and cultural expert. He serves as a UNESCO officer in Paris.

Aw Jaamac Cumar Ciise is a widely published Somali historian and expert in Somali oral poetry, currently based in Djibouti. (See book news)

Burhaan Axmed Daahir is a Somali journalist and media specialist, who participated in setting up Radio and TV stations in Somalia. He is currently based in Djibouti.

Cabdallah Xaaji Cismaan is a literary program producer and cultural expert at the Radio and Television of Djibouti (RTD).

Cabdi Muxumad Amiin, is a well-known and prolific Somali singer, actor, lyricist, playwright, based in Muqdisho.

Cali Cilmi Afyare was a prolific and famous poet. He was a familiar voice on Radio Muqdisho and worked for a long time for the Ministry of Information and Public Orientation in Somalia. He died in the 1980s.

Ibraahin Axmed Yuusuf "Hawd" is a Somali creative writer and essayist, based in Sweden. For his first novel see Book News.

Ibraahim Suleymaan "Gadhle" was one of Djibouti's greatest playwrights and poets whose work is more fully discussed in the Obituaries section.

Jaamac Muuse Miicaad is a Djiboutian poet and expert in oral tradition and customary law.

Lidwien Kapteijns is Professor of African and Middle Eastern History at Wellesley College (U.S.) and has widely published works on Sudanese and Somali history, with an emphasis on women and gender. She is currently a Fulbright-Hays fellow in Djibouti.

Kadar Ali Diraneh is lecturer and director of the Research Center at the University of Djibouti. He is an expert on Francophone literature.

Mako Shirdoon Sugaal was a poetess who played an important role in the Djibouti people's struggle for independence. Her poetry has been posthumously published (see Book Reviews).

Maryan Cumar Cali is an expert on, and collector of Somali popular songs. She is based in Toronto, Canada.

Maxamed Axmed Suldaan is a Djiboutian researcher at the Ministry of Information and Culture.

Maxamed Cabdillaahi Riiraash is an expert in Somali history and oral literature. He produces programs on Somali literature for the RTD.

Maxamed Daahir Afrax is a Somali writer, journalist, and literary scholar.

Mohamed Ali Talha was a well-known Djiboutian poet, songwriter and playwright, who made a great contribution to Djibouti's national movement.

Muumin Xuseen Cabdi, is a poet and dramatist. He serves as a school principal in Djibouti.

Nuruddin Farah is Somalia's most famous writer, whose novels and essays have been translated in many languages and are known throughout the world.

Saciida Cilmi Rooble is a Djiboutian poetess famous for her fiery nationalist poetry. She is based in the U.K.

Xaashi Cabdillaahi Orrax is an independent Djiboutian scholar, poet and linguistic expert, who played an important role in Djibouti's nationalist movement, both as poet and activist.

Xamse Daahir Maxamuud is a secondary school student and young poet in Djibouti.

Xasan Cilmi Diriye is a leading Djiboutian playwright, poet, and actor.

Contents – Tusmo

EDITORIAL

- HALABUUR Reborn 4

EREYGA TIFAFTIRKA:

- Dib u Dhalashada HALABUUR iyo Doorashada Jabuuti 6

LETTERS / *WARAAQO*

- HALABUUR iyo Horumarka Dhaqanka - *Mudane Cali Cabdi Faarax* 10
- A unique Intellectual and Creative Forum - *Late Prof. B.W. Andrzejewski* 12
- A Literary Forum for Interchange and Dialogue - *Prof. I.M. Lewis* 13

INTERVIEW / *WARAYSI*

- *Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle* 14

POETRY / *MAANSO*

- Maalintii Digool Yimid - *Ibraahim Suleymaan (Gadble)* 20
- Xornimo Aammus Lagu Waa - *Saciida Cilmi Roobleh* 22
- Calan-Xiis - *Xaashi Cabdillaahi Orrax* 23
- Bar-gobeed - *Jaamac Muuse Miicaad* 26
- Wax Yar Gaadhka Iga Hay - *Mako Shirdoon Sugaal* 26
- Waktiiy Is Ayro Leh - *Mohamed Ali Talha* 28
- Ma Ku Joojay - *Xasan Cilmi* 29
- Galiilyo - *Aamina Aw Cali* 30
- Hooy Jabuutaay - *Cabdi Muxumud Amiin* 30
- Jabuutaay - *Cali Cilmi Afyare* 31
- Bulshooy Sow Maadan Garan - *Xamse Daahir Maxamuud* 32

ARTICLES / *GORFAYN*

- Of tamarind and cosmopolitanism - *nuruddin farah* 34
- *Sittaat*: Women's Religious Songs in Djibouti - *Lidwien Kapteijns* 38
- Of Warlords and Wordsmiths - *Abdulqawi A. Yusuf* 49
- Halgankii Gobannimo-doonka Jabuuti iyo Kaalintii Halabuurka - *Aw Jaamac Cumar Ciise* 50
- Isku Hiillinta Jabuutida Xorta ah & Dhaqanka Ummadda - *Maxamed Cabdillaahi Riiraash* 55
- La'aanta Xuquuqda Fekerka - *Maxamed Axmed Suldaan* 59
- La littérature comme lieu de réappropriation identitaire et territoriale - *Kadar Ali Diraneh* 63
- La chanson djiboutienne - *Ali Moussa Iye* 70

LITERARY CRITICISM/ANALYSIS / *FAAQIDAAD SUUGAANEED*

- Theatre as a Window on Society: Opposing Influences of Tradition and Modernity in Somali Plays - *Maxamed Daahir Afrax* 74
- Maanafaay: Muraayad Bulshadeenu Iska Dhex Aragto - *Ibraahin Yuusuf "Hawd"* 83

BOOK REVIEWS - *BUUG - DAALAC*

- Houssein Meraneh Mahamoud. *Dardaaran...* - *Lidwien Kapteijns* 88
- Mako Shirdoon Sugaal, *Halgan Gobannimo - Aadan Xasan Aadan (Beleloo)* 90

FICTION & DRAMA - *CURIS*

- Father, Come Back From Death (Short Story) - *Abdourahman A. Waberi* 93
- Tala-Seeg (Sheeko gaaban) - *Maxamed Daahir Afrax* 95
- Hayb-Doon (Riwaayad gaaban) - *Muumin Xuseen Cabdi* 102

OBITUARIES / *TAARIKH-NOLOLEED MARXUUM*

- Ibraahim-Suleymaan "Gadhle": Abwaan Dhaxal Reebyay - *Burhaan Axmed Daahir* 106
- A Farewell to Abdallah Lee - *Lidwien Kapteijns* 110

BRIEFINGS - *DHACDOOYIN XUSID MUDAN*

- Dhacdooyinkii Xagga Dhaqanka ee Xuskii Soddon - guurada Xorriyadda Jabuut 111
- Kulan Lagu Asaasay Ururka Suxufiyiinta Bariga Afrika 113
- Kulankii Aqoonyahannada UNESCO ee Daryeelka Dhaqanka Soomaaliyeed 113
- War-saxaafadeed 114
- Cali-Sabiix iyo Tojorrah oo Marti Galiyey Xuskii Maalinta Afka Hooyo 114
- Bandhig-dhaqameedkii PEN ee Maalinta Masraxa Dunida... 115
- Islaamka iyo Suugaanta Soomaalida...Hargeysa Readers Club 116
- Shirweynaha 10^{aad} ee Caalamiga ah ee Cilmibaarista Soolmaalida 117
- Kudu Arts Festival (London) 117
- Somali Week Festival in London 117
- Conference on Somali Women's *Buraanbur* (San Diego, U.S.) 118

Book news - Xogta buugaagta 119

ORAL TRADITION - *SUUGAAN-HIDDEED*

- Murti-dhaari baa yidhi 120
- Sahanka iyo Warbixin-murtiyeeddiisa - Cabdalla Xaaji Cusmaan 121
- Suugaan carruureed: Maqaleey Warlaay (*Hees carruureed*) 123

Editorial

HALABUUR Reborn

It is with great pleasure that we, HALABUUR's editorial team, announce the rebirth in Djibouti of the HALABUUR Journal of Somali Literature and Culture – a rebirth coinciding with the celebrations for the 30th anniversary of Djibouti independence. We have taken the opportunity to devote this special double issue to this historical achievement. The issue particularly focuses on the way in which literature and art have given voice to, and provided a record of the rich experience of the period just before Djibouti's independence, the views and feelings of the people, and the enormous challenges and obstacles they had to overcome to reach their goal.

First of its kind, HALABUUR Journal was first launched in London back in 1993 as a bilingual, literary and cultural periodical in English and Somali. Immediately, it met with a warm reception from a wide range of readers, including Somali and non-Somali intellectuals and scholars, educational institutions, and governmental and non-governmental agencies from around the world. Thus, the journal instantly became a prestigious forum for Somali literature and culture. It was seen as unique in its focus, its inclusive approach cutting across clan lines, and the nature and quality of its contributors.

During its period of publication, HALABUUR channelled, both in English and Somali, original works by hundreds of creative writers and competent scholars from around the world, including many young talents for whom the magazine had provided a much needed outlet to launch their writing career. Regrettably, the publication of the Journal was halted in the late 1990s due to the lack of the necessary means, as its production and publication solely depended on the voluntary effort of a very small number of devoted, Somali scholars in exile, with very limited resources.

Named after the Somali word for a work of art or literature, the creator of such work, or the concept of “creativity” itself, Halabuur is an independent, not for profit, non-political publication which belongs to its readers and contributors. HALABUUR's mission and objectives were set out in the editorials of previous issues and they remain unchanged, as the needs addressed remain unchanged. The journal aims, *enter alia*, to serve as a forum for exchange and for the rehabilitation and development of Somali literature and culture and for the utilisation of their great potential as vehicles for peace, reconciliation and sustainable development. The objectives of the reinstated HALABUUR also include to provide a new outlet to members of Djibouti creative community and to help people in Djibouti find quality materials in their mother language; this will be helpful to those in desperate need for an opportunity to read and write in their indigenous language.

Building upon the above experience and motivated by the unchanged commitment to address the unchanged, even increased needs, the Halabuur team has

decided to resume the publication of the journal biannually, with Djibouti as its headquarters and London as a second base. Several factors have been identified as reasons for the preference of Djibouti over other homes of Somali language, literature and culture. They include: 1) since the destruction of Somalia and given the crisis that continues to date (at the time of writing), Djibouti has become the leading centre of Somali culture and art and the richest location for cultural resources, both human and material; 2) the Republic of Djibouti is considered today the most stable and most peaceful country in the Horn of Africa, providing an environment conducive to intellectual productivity; 3) it is located at the heart of the Somali-speaking territory in the Horn of Africa; 4) people in Djibouti are renowned for their love of art and literature and are eager to read materials written in their own language, even though many read Somali with much difficulty, as it is not the official language of education and administration. This in itself is a compelling reason for bringing HALABUUR to Djibouti, as it will hopefully make reading in the mother tongue more familiar and more attractive; 5) representing such a popular attitude in favour of culture and art, the current Djibouti president, Ismail Omar Guelleh and his Government encourage and support cultural and literary initiatives and offer guarantees for free expression; that is why we, the editors, dedicate this special issue to the president and people of Djibouti for promoting literature, culture and the written word; 6) HALABUUR was in obvious need to relocate to the Horn, in order to be closer to its main source of inspiration and support.

In addition, we realized that HALABUUR and associated cultural and literary activities needed a solid institutional base. To respond to such a need we have established the Halabuur Centre for Culture and Communication in the Horn of Africa (*Madasha Halabuur ee Dhaqanka iyo Isu-Tabinta*), based in Djibouti.

As a literary forum for all those concerned with Somali literature, culture and society, HALABUUR does not favour or disfavour any particular group, region or race. It has nothing to do with politics. We would like to make it clear once again that HALABUUR is against any kind of discrimination or favouritism based on nationality, race, region, clan, sex or religious belief. We welcome all interested persons and we deal with our contributors merely on the basis of the quality of their contributions. We welcome contributions from anyone – Somali and non-Somali – who constructively engages any aspect of Somali art, literature and culture as well as the cultures and literatures of neighbouring peoples, such as the Afar and Oromo, that will also be considered from time to time. We especially welcome contributions of groups and cultures hitherto underrepresented in the public sphere, such as writings by youth and women and texts/translations reflecting the diversity that exists within the Somali culture and language. In this respect, we encourage submissions in Maay, Chimini (Brava), Bajuni and so forth. Moreover, although historically the word has been central to the Somali culture, HALABUUR aims at including and promoting the development of the visual arts (film, video, photography and painting) as well as other cultural industries such as crafts making.

We are confident that all creative artists, writers, and intellectuals who support the objectives outlined above will consider this journal as theirs and

will see it as an innovative publication that deserves their full support. As stated earlier, HALABUUR belongs to its readers and contributors and can only be successful if we pool our brainpower, labour, and wealth. We welcome all constructive suggestions and corrective comments.

Finally, we, the editors, owe a debt of gratitude to all those who supported, in one way or another, the production and publication of this volume, including our contributors and creators of the works included, as well as those who have volunteered to help with distribution around the world.

Erayga Tifaftirka

Dib u Dhalashada HAL-ABUUR iyo Doorashada Jabuuti

Ugu horrayn, haddaan nahay bahda HALABUUR iyo akhristayaasheedaba, waxaa farxad weyn noo ah inay ugu dambayntii dhabowday himilo aan ku taamaynay muddo aan yarayn. Himiladii ahayd inuu dib u dhasho wargeys-xilliyeedkan HALABUUR, ayna waliba weheliso inuu dib ugu dhashay geyigii ku xaq lahaa ayna isu baahnaayeen, kaas oo ay xuddun ama xundhur u tahay magaalada Jabuuti. Farxadaas waxaa laba-jibbaaraya dhibib-kaca HALABUUR oo ku soo beegmay munaasabad iyana farxad leh, xilli dadka reer Jabuuti iyo sama-jeclehoodu u dabbaaldegyaan soddon-jirsiga Jabuuti xor ah, soddon sano oo u buuxsantay guusha dadka reer Jabuuti ku guulaysteen inay dalkooda (dul-ka-eegidda yar, dux ahaanse weyn) ka badbaadiyaan af-duubkii gumeysiga iyo afooyinka ka dhacaya agagaarka ku xeeran ee Geeska Afrika.

Waa guul diiwaan-galin mudan. Waa darsi u fiirsi ku habboon. Waa sababta keentay tifaftirayaasha wargeyskani inay go'aansadaan HALABUUR-ka cusub tirsiga ugu horreeyaa inuu munaasabaddan la jaan-qaado, inuu si qota dheer u darso, diiwaan taariikheed galiyo,

dunidana ka war-galiyo dadaalkii hal-yeynimo ee dadka reer Jabuuti ku soo dhacsadeen madaxbannaanidooda qaran.. Dadaalkaas isaga ah dhanka uu ka diiwaan-galinayo wargeyskani HALABUUR waa dhanka isaga khuseeya, waa dhinaca dhaqanka iyo halabuurka fan iyo suugaaneed iyo sida sida halabuurku u yahay muraayad maanta laga daawan karo dareenkii dadka iyo duruufihii ku xeedhnaa. Dalka Ingiriiska iyo dabayaaqadii qarnigii hore (1993^{kii}) ayay ahayd markii u horreysey ee uu ifka u soo baxay Wargeys-xilliyeedkan ku wajahan Suugaanta iyo Dhaqanka Soomaalida, meel ay joogta. Durbadiiba waxaa sacab iyo bogaadin ku soo dhaweeyay dad aad u fara badan oo kala jooqey daafaha dunida. Dadkaasi waxay isugu jireen waxgarad Soomaaliyeed, saaxiibbada Soomaalida iyo inta danaysa arrimaha guud ahaan Geeska Afrika gaar ahaanna Soomaalida. Soo dhaweynta iyo bogaadinta badan, sida aan qabno, waxaa dhalinayey sababo kala jaad ah:

Tan koowaad waa harraadkii dadka Soomaaliyeed, meel ay joogaanba u qabeen, welina u qabaan, guud ahaan wax la akhristo gaar ahaana wax qiima leh, siiba wax ka waraabiya harraadka ay u qabaan afkooda iyo suugaantooda

oo ah waxa mideeya, jiritaankooda wadar ahaaneedna astaanta u ah.

Tan labaad waa wargeyskan oo noociisa iyo tayadiisa sareba soo jiiheen aqoonya-hanno badan oo Soomaali iyo ajnabiba leh iyo qorayaal sare oo iyagoo ku faraxsan ku soo hodaneeyey qoraalladooda iyo halabuurkooda, sida laga arki karo tirsigaan inna horyaal qudhiisaba. Taasi waxay kor u sii qaadday tayadii wargeyska ; taya-kororkaasina waxay sii kordhisey xiisayntii akhristayaasha iyo hay'adaha daneeya ururinta iyo kaydinta aqoonta, sida jaamacado iyo maktabado fara badan oo ku yaal dalalka Yurub iyo Woqooyi Ameerika.

Sababta saddexaad waa xiisaha gaar ahaaneed ee loo hayo aagga uu ka hawl-galo HALABUUR: dhaqanka, fanka iyo suugaanta, taas oo isugu dhafan laba dhinac oo is buuxiya; tan horoo ah ururin iyo faafin lagu sameeyo halabuurka curiska ah (sida maansada, sheekooyinka, riwaayadaha, filimmada iwm), tan kalena waa gorfayntooda amase darsidda lagu lafa-guro jaadadkaas halabuurku ka koobmo iyo guud ahaanba arrimaha bulshada. Dhinac ahaan dadka Soomaaliyeed waxay caan ku yihiin jeclaanta ama xiisaynta fanka iyo suugaanta, dhinac kalena aqoonyahannada dibadda iyo haya'daha ajnabiga ah ee daneeya ama ka hawlgala arrimaha Soomaalida badiyaaba waxay ka war hayaan dhaqanka iyo suugaantu inay yihiin dhinacyada ay Soomaalidu ugu hodansan tahay, ahna muraayadda laga eegan karo dadkani waxa ay yihiin, wixii ay ahaan jireen iyo habka ay u fekeraan. Sidaa awgeed, inta arrintaa ku baraarugsan waxay HAL-ABUUR u arkeen madal nooc cusub ah oo u hawl yaraynaysa helitaanka xogtii iyo aqoon-kororsigii ay uga baahnaayeen Geeska Afrika intiisa af-Soomaaliga ku hadasha, xogtaas oo aaney jirin meel

kale oo laga heli karo, ama looga heli karo sida urursan, cilmiyaysanna ee looga heli karo baalasha wargeyskan.

Muddo dhawr sannadood ah ayuu HALABUUR London ka soo baxayey. Wuxuu ku soo baxayey dadaal naf-hur ah oo ay samaynaayeen mutadawiciin tiradooda iyo tabartooduba yartahay, dhanka kalese ay weyn yihiin himilada ay higasanayaan iyo hawlgalka ay go'aansadeen. Ugu dambayntii daabacaaddii HALABUUR waxaa xagal-daaciyey duruufihii qallafsanaa. Dhanka Soomaalida waqtigu wuu ka sii qallafsanaa kan maanta ee weli qallafsan. Wuxuu ahaa waqti qalalaasaha dalku marayey heerkii ugu xumaa, qurba-joogtuna ku sugnayd jahawareer iyo naf-la-caari ay la rafanayeen sidii ay ula qabsan lahaayeen ama ugu badbaadi lahaayeen duni ku cusub oo ay badankoodu xilliyadaas qaxootinimo ku galeen. Waa la garan karaa duruufaha noocaas ahi sida ay uga hor jeedaan hana-qaadka hawlgal noocan ah. Tan kale waqtigaas ma jirin farsamada casriga ah ee fiditaanka internetka iyo isticmaalka emailka, kuwaas oo maanta si la-yaab leh u fududeeya helitaanka iyo isu-tabinta xogta.

Akhristeyaashii badnaa iyo waxgaradkii la socdey way qaadan kari waayeen HALABUUR inuu joogsaday. Sannadihii badnaa ee uu maqnaa way joogsan waayeen waraaqihii, telefoonnadii iyo (kolkii dambe) emailadii tifaftirayaal ahaan nagu cadaadinayey in aanaan sidaa uga harin ee dib u dhibib-kicinno Halabuur. Mowjaddaas joogsan weydey iyo mabda'ii markii horeba nagu dhaqaajiyey oo aan is beddelin ayaa sababay inaan mar kale u guntanno sara-kicinta HALABUUR, annagoo markaan go'aansannay in dhidibbada loogu taago dhulkiisii mudnaa ee siinaayey dheefta uu ku waari karo. Waa sababta aan ugu soo wareejinay

Jabuuti. Tan kale waxaa la gartay in salka loogu adkeeyo xarun uu ku tiirsado, asaga iyo waxqabyada kale ee xagga dhaqanka, taas oo lagu magacaabay Madasha Halabuur ee Dhaqanka iyo Isu-Tabinta (Halabuur Centre for Culture and Communication in the Horn of Africa) saldhiggeeduna yahay isla magaalada Jabuuti.

Waxaa jira dhawr qodob oo sabab u ah doorashada Jabuuti; waa qodobbo ay Jabuuti dheertahay magaalooyinka kale ee la wadaaga afka, dhaqanka iyo suugaanta Soomaalida.

1. Ka dib burburkii nasiibdarrada ahaa ee Soomaaliya iyo qalalaasaha weli ka taagan, Jabuuti maanta waa xarunta ugu weyn ee laga heli karo dhaxalkii dhaqanka ummaddan iyo dhaqdhaqaaq fan iyo suugaaneed oo weli si buuxda u nool;
2. Waa dalka maanta ugu deggan uguna nabadgelyo badan dhammaan dalalka Geeska Afrika;
3. Waxaa ku nool dadweyne weli miyir qaba (an waalan sida Soomaalida kale), fanka iyo suugaanta jecel, u harraaddan inay helaan wax ku qoran afkooda hooyo, in kasta oo uu badankooda ku adagyahay akhriskiisu, maadaama aanu ahayn afka rasmiga ah ee waxbarashada iyo maamulka Dowladda, taa qudheeduna waa sabab kale oo waajib ka dhigaysa in laga caawiyo sidii ay u caadaysan lahaayeen qorista iyo akhriska afkooda hooyo, una heli lahaayeen wax qiima leh oo ku qoran;
4. Waxay leeyihiin madax, siiba madaxweyne u heellan inuu dadkiisa ku dhiirrigaliyo ku-dhaadashada iyo horumarinta dhaqankooda, afkooda iyo suugaantooda, iyo inuu si hagar la'aan ah u taakuleeyo wixii dadaal ah oo arrintaa ku wajahan. Waa mowqif ay ka-abaal-hayntiisa in badan

tix iyo tiraabba ku cabbireen hal-abuurka Soomaaliyeed meel ay joo-gaanba. Waa sababta aan u go'aansannay inaan tirsigaan gaarka ah u hibayno madaxweynaha iyo shicibka Jabuuti.

Arrintaa ah in dadka reer Jabuuti lagu garab galo akhriska iyo horumarinta afkooda hooyo iyo suugaantiisa waa qodob ka mid ah ujeedooyinka HALABUUR-ka cusub. Qodobbada kale ee ujeedooyinka himilada HALABUUR waa isla kuwii hore loogu asaasay baahidii loo qabeyna weli u taagan tahay sidii hore iyo si ka sii weyn. Ujeeddoyinkaas, oo laga daalacan karo Eraygii Tifaftirka ee tirsigii ugu horreeyey, haddaan qaar is xasuusino waxay u qeexnaayeen sida soo socota. HALABUUR wuxuu u dhashay:

- ◆ Inuu baafiyo, isla helo, is baro, cod u noqdo, dhambaalkooda tebiyo baadida isla', halabuurka sama-taliska ah ee dhallinyarada iyo dhammaan wax-garadka ku fekeraya maan fayow oo dhisma-kalkaal ah; kuwaas oo aafuoyinka dhacay awgood ku kala lumay qaaradaha dunida, ku sugan jahawareer halis ah, is heliddooduna tahay, sidaan qabno, dhagax-dhigga dhabta ah ee dhibib-kaca iyo dhismacelinta ummaddaan dhabarka ka jabtay.
- ◆ In dhaqanka, suugaanta iyo hal-abuurka laga dhigto qalab loo adeegsado ama waddo loo maro badbaadinta iyo dib-u-dhiska ummaddan burburku naafeeyey, taas oo lagu bilaabo dib-u-dhiska maskaxda iyo doojinta maanka;
- ◆ In uu ku dadaalo ururinta, lafa-gurka, fidinta iyo horumarinta suugaanta, afka, iyo dhaxalka dhaqan-umma-deedka Soomaaliyeed ee dayacan.
- ◆ In uu noqdo fagaare ay ku kulmaan kuna doodaan, fikradaha xorta ah ee indheer-garatada, Soomaali iyo ajnabiba leh, ee danaysa suugaanta iyo dhaqanka Soomaalida.

- ◆ In ubadka soo koraya, kuwa qurbaha loola yaacay iyo kuwa dalka jooga, hayeeshee ay baylahda ka heleen dhaqammada qalaad, koodiina ka oomman, loo helo qoraallo ka caawiya in aaney ka irdhoobin ama ka sii go'doomin halkii ay ka soo jeedeen;
- ◆ In laga helo xog dunida dibaddu uga tilmaan-qaadato sawirka runta ah ee dhaqanka Soomaliyeed iyo qaabka uu u fekeru qofka Soomaaliga ah, taas oo qalabka war-baahinta dunidu, siiba kan reer galbeedku, waayahaan caadaysteen in laga bixiyo sawir aad u fool xun oo loogu marmarsooday waxa maanta Soomaaliya ka taagan iyo male-awaalka warfidiyeennada ajnabiga oon xog-ogaal u ahayn xaqiiqda jirta ubucdeeda.

HALABUUR, oo ah kii u horreeyey noociisa, waa fagaare u wada furan dhammaan fikradaha fayow ee waxgaradka sama-taliska ah. Tifaftireyaashu waxay gacmo furan ku soo dhaweynayaan afkaarta iyo qoraallada qof kasta oo si waxtar guud leh wax uga soo qora dhinac kasta oo ka mid ah dhinacyada dhaqanka iyo suugaanta Soomaalida iyo waliba dhaqammada iyo suugaanaha dadyowga kale ee Soomaalida ku dhow ama dariska la ah ee Geeska Afrika, siiba Cafarta iyo Oromada, kuwaas oo marba sidii fursad loogu helo loo daabici

doono. Si gaar ah waxaan u dhiirri-galinaynaa una soo dhaweyneynaa qoraallada gudbinaya waxqabadka inta aan hore u helin fursad ay ugu gudbaan fagaaraha bulsha-weynta (public forum); halkan waxaan si gaar ah u soo dhaweyneynaa qoraallada dhallinyarada iyo dumarka iyo kuwa ka tarjumaya dhaqan-hoosaadyada aan wax badan laga aqoon, sida May-ga, Benaadiriga, Barawaaniga, Baajuuniga iwm.

Halabuurka iyo qalinleyda iyo idil ahaanba wax-garadka ay khuseeyaan ujeeddooyinka kor ku qeexan waxaan ku kalsoonnahay, sidaan horeba uga aragnay, in ay wargeys-xilliyeedkan u arki doonaan goob wax-qabad nooc cusub ah oo gacan-siintooda mudan, xilkeedu u dhex yahay, guusheeduna ku xiran tahay marba sidii xilkaas wada-jir loogu guntado, qofba wixii uu ku biirin karo maskax, maal iyo muruqba. Ma jirto cid kaloo u maqan ama gaar ahaan u leh oo lagu halleeyo. Waxaan gacmo furan ku soo dhaweyneynaa fikradaha iyo qoraallada akhristayaasha. Waxaan diyaar u nahay inaan qaadanno dhaliisha niyad-wanaagga iyo toosinta ku dhisan. Waxaan soo dhaweyneynaa in haddaan gefno nala baraarujiyo, haddaan qaldannona nala saxo. Waa halkii Soomaalidii hore e, "Eebow eex ha nooga tagin aqoon-darrana ha nagu cadaabin."



AFEEF. Fikradaha ay xambaarsan yihiin qoraallada ku soo baxa wargeys-xilliyeedkaan yaan loo qaadan in ay yihiin kuwo wada waafaqsan aragtida golaha tifaftirka. Qore kastaa isaga ka masuul ah fikradihiisa.



All views expressed in this journal are those of the authors and not necessarily those of the Editorial Board.

HALABUUR iyo Horumarka Dhaqanka

Dadka reer Jabuuti iyo Dowladdoodaba waxaa farxad u ah inay muddooyinkan dambe si weyn u sii kordhayaan tallaabooyin iyo hindiseyaal cusub oo ay madal u noqotay magaala-madaxda Jabuuti, kuwaas oo muujinaya horumar weyn oo laga gaadhayo xagga dhaqanka iyo aqoon-faafinta, Jabuutina ay u noqonayso bartii kulanka ee lagu soo wada hidhanayey. Waa hindiseyaal iyo mashaariic ay soo biirinayaan bahda aqoonleyda, qalinleyda iyo halabuurka madaxa bannaan oo isugu jira heer qaran, heer qaaradeed iyo heer caalami intaba.

Haddaan dhawr tusaale xuso, sannadkii dhaweyd waxaa la gardaadiyey jaamacadda Jabuuti oo u dallacday jaamacad qaran oo awood u leh inay noqoto xaruncilmiyeed weyn oo lagu soo hirto. Durbadiiba waxay ku tallaabsatay inay u guntato xilka qaban-qaabinta shirweynaha Tobnaad ee Caalamiga ah ee Cilmi-baadhistada Soomaalida, kaas oo taariikhda markii ugu horreysey lagu qaban doono Jamhuuriyadda Jabuuti, bisha Disember, 2007^{da}. Wuxuu noqon doonaa fursad qaali ah oo ay caasimadda Jabuuti madal ugu noqoto culimada adduunka ee ku hawllan cilmi-baadhistada Soomaalida. Waxay noqon doontaa fagaare cilmiyeed oo dhiirri-geliya cilmi-baadhaayaasha reer Jabuuti, siiba da'da soo koraysa.

Isla sannadkii dhaweyd waxaa Jabuuti laga furay madasha aqoonyahannada Geeska Afrika ee lagu magacaabay Greater Horn Horizon, taas oo shirweyneheedii koowaad ay isla Jabuuti bisha November isugu iman doonaan aqoonyahanno badan oo ka kala socda dhammaan dalalka Gobolka Geeska Afrika. Waxaa in yar uun ka horreeyey Ururka Suxufiyiinta Bariga Afrika, kaas oo ay suxufiyiinta gobolku Jabuuti ku asaaseen bishii Sebtember, kuna go'aansadeen Jabuuti inay u noqoto xarunta saldhigga u ah. Isla sannadkan ururweynaha caalamiga ah ee PEN International wuxuu Shirweyne uu Dakar ku yeeshay ku gardaadiyey Naadi cusub oo ay yeesheen qalinleyda ku hadasha afka Cafarta, kaas oo lagu magacaabo Afar-speaking PEN, xaruntiisuna noqotay Magaalada Jabuuti. Waxaa ka sii horreeyey, asaaskiisana gacan weyn ka geystey Naadiga PEN ee Qalinleyda iyo Halabuurka af-Soomaaliga ku hadla meel ay joogaanba, kaas oo isaguna go'aansaday inuu xaruntiisa London ka soo wareejiyo oo u soo wareejiyo Jabuuti, saddexdii sano ee u dambeyseyna wax aad u weyn ku soo biiriyey harumarinta suugaanta, dhaqanka iyo afka hooyo Jamhuuriyadda Jabuuti.

Wargeys-xilliyeedka HALABUUR ee Dhaqanka iyo Suugaanta, dib u dhalashiidiisa iyo doorashada Jabuuti loo doortay inay noqoto xaruntiisa cusub, halkii ay ka ahaan jirtey London, waa tallaabo kale oo wax weyn ku soo biirinaysa tallaabooyinkii hore ee aan kor ku soo sheegay. Waa guul kale oo u soo hoyatay guud ahaan horumarinta dhaqanka iyo aqoon-faafinta gayigaan Geeska Afrika, gaar


guud ahaan horumarinta dhaqanka iyo aqoon-faafinta gayigaan Geeska Afrika, gaar ahaanna HALABUURka cusub ee ku dhashay Jabuuti shaki kuma jiro inuu waxtar weyn u yeelan doono Jamhuuriyadda Jabuuti iyo dhaqanka ummadda. Wuxuu noqon doonaa madasha ururisa iyo muraayadda laga daawado dhammaan waxqabadada kala duwan ee ay tusaalaha u yihiin kuwa aan kor ku soo sheegay.

Kolkaan daalacday baalasha tirsigan cusub iyo baaxadda ay leeyihiin arrimaha uu xambaarsan yahay, waxaa ii muuqatay wargeyskani inuu noqon doono dugsi idil oo laga barto ama looga tilmaan-qaato dhinacyada kala duwan ee waxqabadka maskaxeed ee Geeska Afrika, siiba inta af-Soomaaliga ku hadasha, dhinacyadaasi ha noqdeen xagga suugaanta, tix iyo tiraabba, xagga fanka, xagga luqadda, xagga sooyaalkii ummaddu dhaxalka u lahayd, xagga culuunta bulshada, xagga cilmi-baadhistada arrimahaas oo dhan intaba midba qayb joogta ah ayuu ku leeyahay. Dhanka kale waa madal isku xidhaysa oo ay soo wada higsanayaan halabuurka iyo qalinleyda degmada iyo guud ahaanba inta darnaaysa darsidda arrimaha Geeska Afrika.

Qiimaha gaar ahaaneed ee wargeyskani u leeyahay Jamhuuriyadda Jabuuti, waxaa muujinaya tirsigaan sida gaar ahaaneed loogu hibeeyey xuska soddonguuradii ka soo wareegatay dhalashadii Jamhuuriyadda Jabuuti iyo kaalintii halabuurka dhaqanka iyo suugaanta. Wuxuu xambaarsan yahay wax aad u qiima badan oo cid walba tusaya waxa ay isu yihiin Jabuuti iyo halabuurka dhaqanku. Dhinac wuxuu na tusayaa kaalintii wacnayd ee ay fanka iyo suugaantu ka soo qaateen xoraynta dalka, dhanka kalena wuxuu qeexayaa dadaalka Jabuutida xorta ah iyo madaxweyneheeda, mudane Ismaaciil Cumar Geelle ay u soo galeen walina ugu jiraan daryeelka iyo horumarinta ummadda afkeeda, dhaqankeeda iyo suugaanteeda.

Sababahaas aan soo sheegay oo idil awgood, bahda Halabuur iyo idil ahaanba Wargeyskan intii u hawlgashay iyo intii gacan ka geysatey waxaan leeyahay hambalyo! Run ahaan waxaad qabateen hawl weyn oo dhaxal-gal ah.

Mudane Cali Cabdi Faarax
Wasiirka Dhaqanka iyo Warfaafinta,
una Xilsaaran Boostaha iyo Isgaadhsiinta, Jamhuuriyadda
Jabuuti..



A unique Intellectual and Creative Forum: A Letter of Support

Between the creation of the Somali Republic in 1960 and its collapse in 1990 very substantial progress was made in the development and documentation of the national culture. An official orthography was introduced for Somali, which then replaced foreign languages as the medium of administration, business and all university education. A Cultural Department was established in the Ministry of Education which was later transformed into the Academy of Somali Arts and Sciences, and full-time researchers were employed to collect the rich oral literature and historical tradition of the country. Books and journals were published and the national daily *Xiddiqta Oktoobar* had a literary page of high quality, while at the National University many student dissertations were written on subjects connected with the literature, both written and oral, and historical traditions of the country.

These developments led to the rise of an intellectual and artistic elite of creative writers, poets, playwrights and scholars who enriched the cultural life of Somalia, where there was now a rapidly growing literate public ready to receive and respond to their works. The outbreak of a civil war and the subsequent breakdown of law and order wreaked terrible damage and put an end not only to the progress but even to the very existence of what has been described. Libraries, archives and printing works were destroyed during the fighting and many members of the creative elite were killed or sought refuge abroad.

It is tragic that those Somalis who contributed so much to the cultural life of the country are now deprived of the means of continuing their work and of communicating with the public. The proposal for the present project for the provision of a firm logistic basis for the journal *Halabuur* and for creating a centre for cultural research and information is a very positive step towards a change in the present situation. The journal, which is already in existence, and which has met with a very favourable reception from both Somalis and Non-Somali, provides an intellectual focus for Somali writers and their readers. It channels the skills and energies found among the diaspora, which otherwise lacks cohesion and a sense of direction in this very difficult period in Somali history. It also helps readers who are not Somali to build an informed opinion concerning the Somali nation and the thinking of its intellectual leaders.

The creation of a centre for cultural research and information would have many advantages. It would contribute to the co-ordination of efforts aiming at tracing and listing the publications, manuscripts, historical records and sound-recordings available in libraries, universities and archives outside Somalia. This would not only be useful to persons engaged in research at present, but would be of immense value to Somalia when peace is restored and the need arises for the reconstruction of libraries and archives.

The centre could also be of considerable value to the members of the Somali diaspora as a base for cultural activities which are necessary for them if they

are to retain their national identity and a sense of purpose. It may prepare those of them who will eventually return to their country, when peace is restored, for useful roles in rebuilding its national life. At present many of them get dejected and frustrated by their lack of opportunity to make contributions in the fields where they have a high level of expertise and talent.

The proposed centre would also play an important role as source of information to scholars, journalist and other persons whose work is related to Somalia, irrespective of their nationality.

I am convinced of the usefulness of the project proposed and I have full confidence in the team which is ready to launch it, particularly as it is led by one of the most prominent figures on the Somali literary scene, Mohamed Dahir Afrax, a well known fiction writer and literary scholar.

I recommend the project without any hesitation to any organization, agency or to any individual able to give support to this deserving and useful venture.

B.W.Andrzejewski

Emeritus Professor of Cushitic Languages and Literatures
in the University of London (School of Oriental and African Studies)
Harpenden (UK), 17th January 1994.




HALABUUR: *A Literary Forum for Interchange and Dialogue*

I write to express warm support for the excellent journal, HALABUUR, which Mr. Maxamed Daahir Afrax and his colleagues are producing. The idea of launching such a cultural and literary journal is a bold and imaginative undertaking which deserves the widest possible support from all those who are interested in and concerned for the preservation, wellbeing, and development of Somali culture in the widest sense. The fact that Somali culture is traditionally essentially oral and potentially ephemeral makes this literate enterprise all the more remarkable and important. This is all the more significant at the present time when Somali communities at home and overseas, are riven by ferocious parochial strife and the aggregate cultural heritage is in jeopardy. Quite apart from its inherent cultural value, HALABUUR can play a significant role contributing towards inter-clan understanding and tolerance amongst Somali intellectuals. The very existence of such a literary forum for interchange and dialogue is surely something to encourage and cherish.

In my opinion, Maxamed Daahir Afrax and his colleagues are to be congratulated for their initiative and determination in creating this extraordinarily impressive venture which, so far as I know, is unique in Somali Studies.

I.M. Lewis

Emeritus Professor of Anthropology, London School of Economics
London, 2 April 1994.



“Ummad aan Afkeeda Ilaashan Qoraalna u Adeegsan Horumar ma Gaadho”

Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle

Waa waraysi HALABUUR la yeeshay Madaxweynaha Jamhuuriyadda Jabuuti, Mud. Ismaaciil Cumar Geelle, kana dhacay magaalada Carta, 10^{kii} May 2007. Waxaa qaaday Tifaftiraha Halabuur, wuxuuna u dhacay sidan:

Halabuur: Mudane Madaxweyne, marka hore, haddaan nahay bahda Halabuur, waxaaan kaaga mahad celinaynaa fursaddan iyo saamiga aad naga siisay waqtigaaga qaaliga ah, waxaan kaloo kaaga mahad celinaynaa dhiiri-galintii aad sida hagarla'aanta ah noogu taageertay dhibib-kicinta wargeyskan. Marka xiga waraysigan aan kuugu nimid waa mid ka duwan waraysiyada looga bartay warbaahinta ee ay la yeelato madaxweynayaasha, taas oo la caadaystay in diiradda la saaro arrimaha siyaasadda uun. Annagu dhanka aan jecelnahay inaan maanta kaala sheekaysanno waa dhinacyada uu isku hawlo wargeyskan Halabuur oo ah wargeys aan siyaasad ku lug lahayn – waa arrimaha dhaqanka, halabuurka iyo kaalinta ay kaga jiraan qaran-dhiska iyo horumarinta dalka.

Waraysi arrimahaas ku saabsan inaan kula yeelanno waxaa nugu dhiirri galisay xog-ogaalnimada aan ognahay dadaalka weyn ee aad had iyo jeer ku taakulayso dhaqanka, halabuurka, qoraalka iyo afka hooyo, taas oo ah arrin aan looga baran in badan oo ka mid ah madaxweynayaasha Afrika. Tan kale ee aan iyadana looga baran waa la-socodka joogtada ah iyo dhadhansiga aad qof ahaan ku qiimayso suugaanta, fanka iyo halabuurka qoran. Bilmatal waxaan ognahay sida weyn ee aad



ugu muraaqooto ama ugu sacab tunto marka lagu maqashiiyo gabay xiisa leh ama muusik qurux badan. Waxaan ka war haynaa buugaag af Soomaali ku qoran oo aad akhriskooda ku dhammaysay maalin nuskeed, sida buuggii Dal Dad Waayey. Taasina waa arrinta ay sida gaar ahaaneed kuugu ehelsadaan ama kuugu jecel yihiin bahda dhaqanka, suugaanta iyo qoraalka.

Haddaba inta aynaan u galin su'aalaha kale waxaan jeclaan lahaa inaan marka hore ku weydiinno, ma noo fasiri karaysaa qiimaynta dhaqanka ee aad uga duwan tahay siyaasyiinta caadiga ah sababaha keenay ama kaalmeeyey – ma waxaa loo aanayn karaa akhriskaaga badan iyo bisaylka aqooneed oo ku gaarsiiyey garasho aad ku garwaaqsato qiimaha dhaqanka iyo halabuurka? Ma waxay noqon kartaa hibo gaar ahaaneed iyo dookh

qofeed oo dhankaas u janjeera, sida dadka qaar ku micneeyaan, dadkaas oo yiraahda ma aha wax uu iska doondoonaayo ee waa wax dhiiggiisa ku dheehan? Ma waxaa lagu micnayn karaa siyaasi bisaylkiisu gaarsiyey inuu fahmo dhaqanku inuu miftaax u yahay horumarka qaranka iyo kan qofkaba? Mise waxaa jira sababo kale oo intaaba ka duwan, sida qaar la xariira taariikh-nololeedka qof ahaaneed, iyo arrimo saamayn kugu yeeshay carruur-nimadaadii hore?

Madaxweynaha: Bismillaahi-raxmaani-raxiim.

Sababahaas aad sheegtay mid walba wax baa kaga jira yaa la odhan karaa. Ugu horrayn, anigu haddaan isa sheego, waa wax jira inaan waxyaabaha jeclaa ilaa carruurnimadaydii. Berigaan yaraa, intaan dugsiyada galin, waxaan jeclaa inaan aad u dhageysto hooyaday iyo mocoyday (ayeydey) markay sheekaysanayaan ama ay nooga sheekaynayaan sheekooyinkii dhaqanka soo-jireenka ah. Waxay iiga sheekayn jireen taariikho xiisa leh, sida taariikhda qoyskayaga dhexdiisa, iyo sheeka-xariirooyin badan oo aan jeclaysan jirey. Kolkaa dadka iga waaweyn ayaan raaci jiray oo aan sheekooyinkooda doonan jiray. Markii dambena waxaa soo biiray ee aan ku dhex barbaaray xilli lagu jirey isticmaar-diid iyo gobannimo-doon. Xilligaa waxaa jirtey suugaan fara badan oo waddani ah, taas oo dadka ku guubaabinasey gobannimo-doon iyo inay jeclaadaan waddankooda. Suugaantaas ayaan xafidi jirey. Waxay ahayd wax aannu ku faanno, dhallinyaradii xilligaas. Qofkii xafidi waaya ee ku dhaadan waaya waxaa loo arkayey qof aan dadnimo lahayn oo bilaa shaqsiyad ah.

Taasi waxay igu beertay inaan jeclaado suugaanta anigoo aad u da' yar, inaan u arko wax wanaagsan oo qiima badan. Waaya-aragnimadaas waxaan ka bartay, kolka aad dadka la shaqaynayso amase aad la hadlayso ee aad doonayso inaad wax ka dhaadhiciso, inay muhiim tahay inaad noqoto qof aad u fahamsan dhaqankooda, inaad u raacdo habka ay dhaqan ahaan wax ku fahmayaan, taas ayaan ogaaday inay tahay udub-dhexaad. Markaan

siyaasadda galayna arrintaasi way ii sii caddaatay. Waxaan arkay inaan dadweynaha kollaba waxba laga dhaadhicin karin haddaan la adeegsan afkooda ay garanayaan iyo dhaqankooda. Waa inaad hawl galiso qofba qofka uu uga wanaagsan yahay adeegsiga afka hooyo iyo dhaqanka, qofba qofka uu ka aftahansan yahay, ka codkarsan yahay, ka hadal tabin ogyahay, ka adeegsan ogyahay suugaantii iyo murtidii laga dhaxlay sooyaalka hiddaha iyo dhaqanka.

Mas'uulnimo kolkay kugu sii biirtana waxaa kuu muuqanaya walwelka waxyaabaha u baahan in la qabto. Waxyaabaha badan ee aan arkayo inay kol walba u baahan yihiin in wax laga qabto ayuu xagga hore kaga jiraa dhaqanka iyo sidii loo daryeeli lahaa ee hore loogu marini lahaa. Maxaa yeelay horumarinta dhaqanku waa miftaaxa horumarinta arrimaha kale ee bulshada. Markaa arrimahaas oo dhan oo la isku daray ayaan amminsanaahay inay is biirsadeen, anigana ay igu sii biirayaan kolkaan ku sii dhawaannaba ee aan dadka sii baranno, dhexgalkoodana wax ka baranno.

Halabuur: *Kolka la sii kala qaad-qaado qaybaha dhaqanku ka kooban yahay, waxaan ognahay suugaanta qoran iyo afka inaad in badan hadalladaada rasmiga ah kaga muujiso walwel gaar ahaaneed. Waxaad dadka ku guubaabisaa kuna garab gashaa in wax la qoro. Waxaan xasuustaa daahfurkii buuggii Dal Dad Waayey markii aad lahayd "cid kas-ta oo wax soo qorta gacan baan siinaynaa, ee wax ha la qoro. Waxaan doonayaa hibadu inay u furanto sida ubaxa". Wuxuu ahaa Erey taariikhi ah. Waxaad ku celcelisaa "Ummad aan afkeeda xagsan oo aan qoraal u adeegsan horumar ma gaadho". Maxaa kugu dhaliyey walwelkaa isaga ah?*

Madaxweynaha: Afku waa udub-dhexaadka dhaqanka. Waa aaladda dadka u tabisa aqoonta. Afrika kolkaan joogno waa la kala tegey. Aqoonta laga barto dugsiyada iyo jaamacadaha waxay ku koobantahay in yar oo u heshay fursad aaney helin dadka intiisa badan. Dadka shaqaynaya ee qodaya dhulka ee wax ka soo saaraya,

haddana aan cilmi ahaan u fahamsanayn macnaha uu leeyahay, sida uu ku kobcayo, sida cudurka looga dhebayo, sida loo dhaqaalaynayo iyo sida faa'iido badan looga dhalin karo, intaba aan garanaynin, waxaa ayaandarro ah ninka aqoontaa ay u baahan yihiin hayaa inuu yahay mid ka mid ah intaa yar ee afka qalaad wax ku baratay oo aan awoodi karin inay aqoontii ay barteen u tabiyaan dadkii u baahnaa ee ka midha dhalin lahaa. Kolkaa cilmigaasi isaga ma soo dhaafayo, isaguna wuxuu noqonayaan curyaan aan gaadhi karayn dadkiisa intoodii badnayd. Sida qudha ee ay dadkaa badan ee muruq-maalka ahi uga faai' daysan kari lahaayeen waxa uu yaqaan kaa afka qalaad wax ku bartay waxay noqon lahayd inay iyana dhammaantood bartaan afkaa qalaad, taasina ma aha wax suurtagal ah. Sidaa ayay ku noqonayaan dad hadhay oo aan horumar samayn karin.

Sida ay bulsha-weyntu aqoon fidsan ku yeelan kartaa waa afkooda oo lala socodsiiyo aqoonta casriga ah, waa in ay helaan aqoon ku qoran afkooda. Waana inay awood u yeeshaan akhriska iyo qoraalka afkooda hooyo. Qoraal la'aan afku hore uma mari karo, aqoonta casriga ahna lama socon karayo. Waa halkaa halka ay iiga muuqato inay weli naga haysato nuqsan weyn. Waa taa tan keentay walwelka aad sheegtay. Haddaanay dadku baran afkooda qoraalkiisa iyo akhriskiisa, kolnaba lama gaadhi karayo horumarka aan hibanayno. In yar uun baa ka faai'daysanaysa tacliinta, intii kale ee badnaydna waxay ku hadhaysaa sagxadda. Waddan dadkiisii kala hadhayna horumar ma gaadho.

Halabuur: *Mudane Madaxweyne, Jamhuuriyadda Jabuuti sannadkan 2007 waxay ku jirtaa dabbaaldega weyn ee soddon-guurada xornimada dalka. Muddo gaaban xornimada dabadeed waxaan ka war haynaa inaad billawdeen hawlgal weyn oo loogu sara kacay ilaalinta iyo xoojinta dhaqanka ummadda. Horraantii siddeetannadii qarnigii tegey waa tii la bilaabay bandhig-dhaqameedyadii is daba-joogga ahaa ee lagu magacaabi jirey*

“Forum Culturelle”. Sarakacaas waxaan xasuusannaa inaad adigu hormuud ka ahayd, xagga fikradda iyo xagga hoggaamintaba, adiga oo aan waqtigaas ahayn madaxweyne, balse hoggaaminayey guddiyadii hawshaas wadey. Haddaba waxaan jeclaan lahaa inaad nooga warranto sarakicii dhaqan ee aad xilli-gaas bilowdeen falsafaddii ka dambeysey, natiijooyinkii laga gaadhey iyo wixii ka dambeeyey sidii wax u dhaceen intaba.

Madaxweynaha: Sida aad sheegtay gobannimada dabadeed, waxaa noo muuqatay, raggayagii halkaa joogay, inay waajib tahay in wax laga qabto dhaqanka ummadda, oo ay noo muuqatay inuu khatar ku sugan yahay. Waxay nala noqotay dhaqanka ummadda xoojintiisu inay tahay miftaaxa lagu gaadhi karayo horumarka guud ee waddanka. Taas ayay ahayd falsafaddii ka dambeysey arrimahaas aan ku dhaqaaqnay. Natiijooyin wanaagsan ayaa laga gaadhey. Dadkii ayaa ku baraarugay qiimaha dhaqankooda. Haseyeeshee duruufo kale ayaa yimidday oo keenay hakad iyo gaabis. Waxaa dhici karta inaan arrinkaa isku si loo wada arag oo aan la wada fahmin qiimihiiisa.

Dabadeed waxaan u weecannay oo aan xoogga dul dhignay xaggii idaacadda. Kolkaas waxaan is nidhi bal halkan waxaad ka fidin kartiin aad ka fidisiin. Wax badan baa hir galay. Barnaamijyadii dhaqanka ee sida is daba-joogga ah idaacadda uga bixi jirey waad la socoteen baan filayaa. Dhaxal fara badan oo qaali ah ayaa laga qabtay dhaqan-sidayaal badan oo da' weyn iyo abwaanno badan. Wax badan ayay ka barteen dhallinyaradu. Qaar badan barnaamijyadaasi waxay da'da soo koraysa jeclaysiiyeen dhaqankooda iyo suugaantooda. Waxay ka arkeen waji qurxoon halkii kolkii hore loo tusi jirey wax bilaa micne ah oo laga faano. Intaa dabadeed, waxaanu ku dadaalnay xagga qoraalka. Waxaan dhiirri gelinnay in la helo buugaag ku qoran afka hooyo. Imminkana inaan hore u sii wadno oo dhinac kasta ka dagaal galno ayay nugu ajburaysaa oo aan ku tala jirnaa.

Halabuur: *Waa runoo waannu la wada soconney dhaqan-faafintii loo maray xagga idaacadda*

iyoo barnaamijyadii taxanaha ahaa ee ay ka midka ahaayeen 'Hidde iyo Dhaqan', 'Sirta Erayga', 'Tixmaal' iyo qaar kale. Dhanka qoraalkana, nasiib wanaag, waa kuwan soo batay buugaagtii ku qornaa af-Soomaaliga ee ay ugu dambeeyeen kuwii badnaa ee aad adigu sida deeqsinimada ah u maal-galisay, qorayaashoodana taakulaysay, sida Qaamuuskii uu qoray Saalax Xaashi Carab, shanta buugee uu isku marka soo saaray Aw Jaamac Cumar Ciise iyo Diiwaanka maansada ee Aadan Belelo. Waa wax la taaban karo oo muujinaya inaad ka dhabaysay garab-galkii aad u ballan qaadday qoraalka iyo qorayaasha. Ha yeesh ee waxay dhibaato ka jirtaa buugaagtii marka la daabaco ciddii dadka gaarsiin lahayd iyo maktabado lagu akhristo oo aan jirin. Tan kaloo aan jirin waa shirkadihii iyo haya'dihii loo baahnaa inay xirfad ka dhigtaan faafinta iyo daabacaadda buugaagta. Haddaan xirfadlayaashaas iyo maktabadahaas la helinna qoraalka iyo buug-faafintu hore uma mari karayaan. Maxaa male ah oo aad ku talin lahayd si loo buuxiyo kaalintaas maqan, maxayse dowladdu ku tala jirtaa inay ka qabato?

Madaxweynaha: Waxaan ku talin lahaa, waan aragnay oo tijaabo ayaan ku arkay in wixii aan samaynay halkii aan doonaynay uuna gaadhin. Wuxuu u gaadhi la'yahayna waa sida aad sheegtay, gaaxdii qoraaga ka soo maaxatey kolkii maalgalin lagu sameeyay, ee buuggii la daabacay, kii la doonayey inuu kolkaa halkaa ka qaado ee dadkii gaadhsiiyo, midhihii ka soo baxayna labada dhinacba uga faa'iideeyo, ayaa halkaa ka maqan.

Markaa talada loo baahan yahay waxaa weeyaan, idinka raggiinnan hawlahaas ku xeeldheer, inaan isla kaashanno, inaan xalka isla doondoono, sida la isula heli karayo dhammaan dhinacyada loo baahan yahay, dowladda, qorayaasha, shirkadaha madaxa bannaan ayaa loo baahan yahay inay is wada kaashadaan oo dhinac kastaa buuxiyo kaalintiisa. Dadka wax qora ee dibadaha ku hallaabaya oo iyagana laga reebo wixii ay hayaan ayaa

loo baahan yahay. Iskaashigaas ayuu ku jiraa xalku. Annagu dhankayaga waan ku dadaalaynaa inaan daabacno wixii ummadda qiime u leh, madbacadahayaga u adeegsannayaa ama meel kale la kaashannayaaba. Yaan lagu niyad jabin hakashada ay wax yaabaha yaryari naga hakanayaan. Daabacaad la'aan ma jirto oo maanta madbacad waan iska haysannaa. Waxyaabaha yar ee naga dhimman in aanan ku niyad jabin ayaa loo baahan yahay.

Halabuur: *Madaxweyne, su'aal dhinac kale ku saabsan. Dadka reer Jabuuti beryahaan waxay ku jiraan farxadda soddon-jirsiga Jabuuti xor ah. Qofku marka uu soddon jirsado waxaa lagu tilmaamaa qof hanaqaadkiisii buuxsamay. Taa haddii la xigto maanta waxaa la oran karaa Jamhuuriyadda Jabuuti waxay gaadhey da'dii hanaqaadka. Haddaba laba su'aalood ayaan jeclahay inaan halkaa kaa weydiyo. Tan hore, heerka uu gaarsiisan yahay hanaqaadka ama horumarka ay soddonkaa sano gaadhey Jamhuuriyadda Jabuuti ma joogaa heerkii aad doonaysey ama aad jeclaan lahayd?*

Su'aasha labaade tan hore daba taal: mud-dadaas soddonka sano ah, waxqabadkii iyo dhaqaalihii loogu tala galay horumarinta dalka, ma dareemaysaa arrimaha dhaqanku inay ka heleen saamigii ay mudnaayeen, marka la barbar dhigo, dhinacyada kale, sida tacliinta, ama difaaca ama caafimaadka; mise waxaad is leedahay waa laga sedbursaday dhaqanka oo waxay ahayd in intaa looga roonaado?

Madaxweynaha: Waxaan leeyahay weli ma cadcadda mana gaadhsiiisna halkii aan anigu doonayay, shakhsi ahaan. Waxaa laga yaabaa in ay jiraan dad yidhaahda waan dhow nahay, laakiin anigu ma dhawaan leeyahay oo wixii aan doonaynay weli ma gaadhin. Gaar ahaan himiladayadii ahayd faqriga inaan waddanka ka saarno, jahliga dadka ka saarno, inaan gaadhno heer aan ka kaaftoomi karno baryo aan cid kale wax weydiisanno. Haseyeeshee waddadeedii waan ku joognaa yaan is leenahay, kolkaad eegto xagga jahli tirka iyo xagga

caafimaadka kordhintiisa tallaabooyin wanaagsan ayaan hore u qaadnay. Dhaqanka isagu waa qabyo weli, mas'uuliyaddiisuna way ka sii weyn tahay kuwa kale, maxaa yeelay waa udub-dhexaadka dadnimadeenna.

Dhanka kalena Jabuuti uun keli ahaan kuma koobna. Bulshooyin ayaa jira aanan ku noolayn Jabuuti oo nala wadaaga dhaqanka, nala danaynaya oo sideenna ugu baahan waxqabadka dhaqanka, awooddeediina iyagu aanan haynin waqtiga xaadirka ah; annaga ayay wax badan naga sugayaan. Marka dadaalkeedii inaan imminka wada xoojinno oo nin waliba wuxuu soo kordhin karayo soo kordhiyo, kii wax sawiri karayaa uu sawiro, kii farriimaha wanaagsan ummadda fan iyo suugaan ugu tabin karayaa ugu tabiyo, kii wax qori karayaa wax qoro, ayaa loo baahan yahay. Suugaanta carruurta iyo waxyaabaha carruurta soo jiidanaya la badiyo. Dharaar dhaweyd, jimcihii, ayaan ka maqlay idaacadda barnaamij ay qoladan tacliintu soo samaysay oo ku saabsan ciyaarta kolka carruurta la yara fasaxo ay ku ciyaaraan. Muhiim ayay tahay taa haddii kartuun laga sameeyo ama fiidiyoo laga dhigo ama filim yar iyo wax la mida laga sameeyo. Marka la soo koobo, ma dhawin baan leeyahay, dadaalka un inaan sii wadno weeye.

Halabuur: *Mudane Madaxweyne, qodob muhiim ah ayaad taabatay oo ah dhaqanka dadka reer Jabuuti inuu yahay dhaqan-goboleed ay Jabuuti la wadaagaan bulshooyinka kale ee Geeska Afrika ee dhaqankooda iyo afkoodu yihiin Soomaali ama Cafari.*

Burburkii Soomaaliya ka dibna waa sax inay bulshooyinka iyaga ah maanta ugu awood roontahay Jabuuti, sidaa awgeed waxqabad dheeraad ah laga quuddarraynayo. Dhanka kale waayadan dambe adduunweynuhu wuxuu aad u daneeyaa dhaqan-wadaagga iyo is-dhexgalka goboleed. Haddaan nahay bahda dhaqankana waxaa noo muuqata Jabuuti inay maanta u bannaan tahay una qalanto inay noqoto caasimad-dhaqameedda Geeska Afrika, siiba inta ku hadasha af-

Soomaaliga iyo Cafariga. Ma nala qabtaa Jabuuti inay hormuud u noqon karto iskaashi dhaqan oo fududeeya in la gaaro himilooyinkaas?

Madaxweynaha: Sidaad sheegayso waxaa weeyaan horta dareenkeedii inaan helno walwelkeeduna nagu jiro mar walba. Iyadoo haddana aan eegayno dadaalkaasi inuunarnaa meeshiisii ka weecannin, wax Alla wixii wanaag ahna annagu aan hormood ka noqonno oo aan abuurro dadaal xagga cilmiga iyo xagga dhaqankaba ku wajahan. Waxaan diyaarsannay qorshayaal lagu ballaadhiyo barnaamijyada xagga idaacadda, taas oo loo dejiyay hab ay idil ahaan dadyowga degmadeenna ee aan wadaagno afka iyo dhaqanka ay idaacadda deenna u dhegeystaan oo uga faai'daystaan. Markaan taa ku guulaysanno waxaan si gaar ahaaneed xoog u saari doonnaa in xagga Soomaalida loo diro dad soo ururiya dhaxalka dhaqanka ee halista ku sugan iyo waxyaabaha jira, si loo badbaadiyo. Waxaan ku tala jirnaa sidii ay mar horeba himiladeennu ahayd, inaan samayno "Karavaan" dhaqan oo dhexmarto Geeska Afrika oo socota illamaa Kenya. Ujeedka dadu waa in la darso wax alla wixii la heli karayo ee ku abtirsada hababkii dhaqan-dhaqaale ee soo jirey, wixii raadkooda la heli karo iyo wixii uu afku xambaarsan yahay, bulsho kastaa iyo degaan waliba sida uu u dhisay yahay in la darso, si la isu barto oo loo kala faai'iideysto. Taa ayaa ka mid ah waxyaabaha aannu maanka ku haynno.

Halabuur: *Su'aashani waa su'aal ka yar duwan kuwii hore. Soddonkii sano ee na dhaafay Jamhuuriyadda Jabuuti sidii wax ahaayeen iyo sidii muuqaalka dalku u ekaa intaba waynu aragnay. Haddaba, dhammaadka soddonka sano ee soo socota waa maxay saadaasha la fili karo iyo sida loo malayn karo inay u ekaan doonto Jabuutida waqtigaas heerkee la fili karaa inuu gaarsiisnaa doon horumarka dalku, taas oo uu hubaal saamayn weyn ku yeelan karo marba qorshaha la dajiyo, laga bilaabo imminkaba, iyo sida loo fuliyo?*

Madaxweynaha: Inuu Ilaahay na jirsiin doono iyo in kale isagaa og. Laakiin waxaan ku rajo weynahay sidan ay tahay maanta si ka wanaagsan dhinac walba inay noqoto yaan Ilaahay ka baryaynaa. Annaguna dadaalkeedii inaan la nimaadno intii karaankayaga ah ayaa lagama maarmaan ah. Inta aan joognana inaan dhigno asaaskeedii iyo qorsheheedii waa waajibkayaga waana ku baraarugsannahay.

Asaaska lagama maarmaanka u ah in la tiigsado horumar mustaqbal waxaa ugu horreeya adkaynta nabadgelyada iyo xasiloonida dalka. Taa ayaannu ku dadaalnay imminkana sii adkayn doonnaa. Waayo nolol iyo horumar lama gaadhayo haddaanay nabadi jirin, haddaan deggenaansho jirin. Halkan ma soo gaadhneen fidnaddii na lagu bilaabay beri, haddaan ku kala yaaci lahayn oo aaney xikmaddu shaqayn. Waxaa Ilaahay nugu badbaadiyey odayaal iyo dad kolkaa Ilaahay ku ilhaamiyay inay dhibaataada ka hortagaan oo arrimaha kala guraan. Imminka oo waaya-aragnimadii iyo aqoontii ay sii biireenna Ilaah idankii dalkayaga waannu ka difaaci doonnaa, kana badbaadin doonnaa wixii dhibaatooyin ah ee mustaqbalka iman karaya, dadka kalena waannu kala faai'daysan doonnaa waaya-aragnimada. Mustaqbalkana, ku dhow iyo ku fogba, kalsooni buuxda ayaan isku qabnaa, oo aannu ku qabnaa kartida shi-cibkayaga, xikmadda dadkayaga, waddaniyaddooda iyo dadaalkooda intaba. Awooddii ay shalayba u yeeshen inay xoraystaan ayay hubaal maanta iyo berrina u leeyihiin inay ilaashadaan, mustaqbal wanaagsanna gaadhsiiyaan.


Halabuur: *Mudane Madaxweyne, haddaan ku gunaanadno su'aal aan ka fogeyn tii hore, waa tan dunidii isku sii xirmaysa ee marba marka ka dambeeya sii noqonaysa sidii xaafad ama tuulo mid ah. Gobolkeennan Geeska Afrika, oo lagu tilmaami karo xaafad yar oo dadyowgeedu isku mustaqbal yihiin, dhib iyo dheefba, waa maxay saadaashaadu sida ay guud ahaan u ekaan doonto iyo qaabka ay isu maamuli doonto soddon*

sano dabadeed? Ma kula tahay inay isku noqon doonto dowlad mid ah? Waxaa la yiraahdaa wax waliba waxay ku bilowdaan riyo ama hummaag maskaxdu samayso. Riyadaada sidee jeclaan lahayd inuu u ekaado Geeska Afrika soddon sano dabadeed?

Madaxweynaha: Sida aniga himiladaydu tahay iyo sida aan ku hawaawiyayo, gobolka intaa le'eg, ee khayraadka badani ku duugan yihiin, ee dadyowgiisu wadagaan dano mid ah, waxaan rajaynayaa inay dadyowgiisa iyo dowladihiisu lahaan doonaan xikmad iyo karti gaadhsiisa inay ka koraan oo ka baxaan colaadaha iyo is-dilka iyo isu-xoog-sheegadka, oo ay ku beddelaan iskaashi iyo wax wada qabsi dhinac walba ah, waxtarka oo la isku darsado, dalba dalka kale u tabiyo waxa uu ku dhaamo. Kolkaa aniga himiladayda iyo hawaawigayga, waxa aan ku riyoonayaa waa in soddon sano dabadeed la arki doono gobolkeenna oo faqrigii iyo qaxootinimadii ka baxay, colaadihii ka gudbay, si wacan isu maamulaya, maamul gaar gaar ahaaneed iyo ku guud oo ay wadaagaanba, dadku is dhex galay oo si xornimo ah isu dhex mushaaxayo, tachiinta casriga ah la jaan-qaaday oo uu sidaana gobolkani ku noqday gobolkii iftiimayey ee lagu soo wada hiranayey, halka maanta loo arkayo gobol mugdi ku jira.

Waa taas aniga riyadaydu, Ilaahayna waxaan ka baryayaa inuu ka dhigo tii rumowda.

Halabuur: *Aamiin! Waad mahadsan tahay, Mudane Madaxweyne.*



Introduction to this collection

It is appropriate that in this special issue, which coincides with the 30th anniversary of Djibouti's independence, the role of poets and poetry in the national movement for independence receives special attention. The following selection includes poems composed in different poetic genres by a range of poets and poetesses from Djibouti and Somalia – male and female, young and old, famous and less known.

Each and every poem in this selection revolves directly or indirectly around the bitter experience of colonial rule and the harsh oppression meted out to anyone who dared to speak out in favor of independence. The most brutal crackdown took place in 1967, ten years before Djibouti actually achieved its independence. When the Djibouti people demonstrated against the colonial rule during a visit of the then French President, General de Gaulle, the French retaliated violently. People were tortured and executed and their bodies lay unburied in the streets. Many were also jailed, and deported. This series of events forms the central theme of many Djibouti poems. The poems '*Maalintii Digool Yimid* – the Day de Gaulle came' by Ibraahim Suleemaan Gadhle and '*Calan-xiis* yearning for a flag' are striking examples.

Maalintii Digool Yimid

(*Gabay-“Jacbur”*)

Ibraahim Suleemaan (Gadhle), 1977

Maanso-maadeeddan wuxuu abwaanku ku diiwaan-galiyay dhacdo taariikhi ah oo dhacday 25^{kii} bish Agoosto 1966^{kii} markii madaxweynihii hore ee dalka Faransiiska, Jeneraal Charles De Gaulle booqashada ku yimid Jabuuti. Booqashadaas shacabku waxa kaga jawaabeen kacdoon, dhawaaq gobannimo lagal dalbanaayo iyo bannaanbaxyo lixaad leh, taas oo ay xigeen rabshado dhiig ku daata oo aakhirii dhaliyay dil, xabsi, masaafuris iyo gumaad aan loo meel-dayin oo shicibkii gadooday lagu cabburiyey. Gabood-falkaas dhacay 25^{kii} iyo 26^{kii} Agoosto 1966^{kii} ayuu Ibraahin Gadhle maansadan ku diiwaan-galiyey. Abwaanku dadkii wuxuu xasuusinayaa halgankii iyo dhibaataadii loo soo maray xornimada maanta la hadhsanayo isla markaana shacabka ayuu ku boorinayaa inay adkeeyaan midhaha xornimada. Tixdan waxaa xiise gaar ah u yeelaya habka maadeynta ah (loo yaqaano gabay-jacbur) ee abwaanku adeegsanayo asagoo ka hadlaya dhacdooyin murugo leh.

Hooyaalayey hooyaalayey hooyaalayey hooye
Waa cadow gumaysigu hadday qolo dulfuulaane
Faransiis intuu joogay ee xogga nagu haystay
Dagaalladii nasoo maray way fara badnaayeene
Midkii ugu darraa bal aan shiinka ka hingaadsho
Maalintii Diggool¹ yimid kolkii dawga lagu yaacay

Cadho nagu dhabowdiyo kolkii taahii lala luuday
Faarax-xaad² hortiiisa ninkii joogsadaan ahaye
Inkastoon harraadoo naftuna barafka doonaysay
Shaaha iyo kookaha ninkii diiday baan ahaye
Gaajo ima durqaynine anaa nacay bariiskiiye
Cirka waxannu eegnaba dabeed yimi madaarkiye
Illeen waa sugaynee haddii gaadhi lagu keenay

Markuu ila gudboon yahay ninkii Nool yidhaan ahaye
Maradii³ qarsoonayd ninkii soo baxshaan ahaye
Xomimada ninkii doortay ee dhiidhiyaan ahaye

Afartaa intaan cuud u shiday mawgu riday fooxa
Dhool dahaba maw geliyay oo mawgu daray xaydhna
Afar kalana waan soo wadaa baaldiyada qaata
Markaan buuxsho wada daadiya kii kalaa loo diyaar yahaye
Ninkii naga maqnaayow adaan kuu warramayaaye
Dharaartii labaad iyo Jimcihi weerarraa dhacaye
Sinimoo Odayoo⁴ iyo halkay beertu tahay maanta
Intaa oo bannaan wada ah bay biro ku xeereene
Dhallinyariyo waayeel annagoo wada qamaamayna
Oo quraarado cammuud lagu shubay iyo dhagax
la yaacayna

Halkii lagu ballamay baannu nimid duhur hortiiisiiye
Iyagoo diyaaroo dhammaan wada cadhoonaaya
Ayuun bay na duubeen sidii waxaro jiilaale
Xerya iyo waxay nagu gureen meel cidhiidhiyahe

Sunta lagu wareeriyo annaga qiiqu nagu tuuray
Filfisha oo basbaas lagu ridqana way ka kululayde
Milixdaa dhanaan iyo haddii liin nalagutuujoo
Alleyliyo Allaylehe kama darraateene

Ilma naga dareertiyo annaga duufba naga yaacye
Masarradaannu qoynaye wallee waan duryi lahayne
Kumankii la laayee maqnaa sooma bay noqone
Kuman kalana wuu naga dakhroo dhiiggu gobo' leeye
Naasaha hablihii laga jaree madaxa loo xiiray
Dhaayaha markaan saaray baan aad u sii naxaye
In kastoon nin geesiya ahaa booday dabadeede
Deyrkaa iskoollada ninkii jiidhay baan ahaye
Dumarkiyo carruuraha ninkii dhaafay baan ahaye
Sidii wadaad budh weyn lala dhacay oo laba kitaab tuuray
Oo masalihiyo weesadii qaadan kari waayay
Tusbaxiina meel kaga go'ay oo gabay inkaartiina
Giitaarkaan tumaayiyo anaa tuuray kabankiiye

Darbuugaddiyo wixii iga dhacday qawdii lala yaabye
Loojineerka⁵ goortaan arkaan aad u cararaaye
Haddii aan lugaha lay rakibin kama fogaadeene
Shayddaanka shayddaanku dhalay noomabuu tudhine
Allahayow shamiis iyo maxaa diric la jeexjeexay
Allahayow dacas wada cusaybiyo maxaa buugag
laga yaacay

Allahayow maxaa lacag qubatay oo meeshi
dahab yaallay
Allahayow sharaab iyo maxaa faanto naga daatay

Allahayow nin weyn iyo maxaa habar la laadlaadshay
Allahayow fannaan iyo maxaa naaga lagu leefay
Allahayow Faransiis muxuu foodkii naga boobay

Haddaa gabayga faan moodaysaan amase beenbeenba
Joornaalkii lagu soo qoray anaa qaar ka iibsadaye
Hayeeshee idinma siinayee idinku doondoonta

Gaalka kama baqaynine way naga adkaadeene
Hubkaygii u waynaa dadyahow waa xuunsha-daba-roore
Ma dubaabad kugu soo carartay baa daasad lagu tuuri
Ma bambaano kugu soo orday baa loox yar lagu waabin
Hangoolkii madfac lala dhacaa waa jajabayaaye
Baawar maleh billaawuhu haddaanad beer ku cunihayne
Miinada muxuu kaaga tari qaraxa waawayne
Wadhaf miyaad ku daafici halkuu shaar ka diriraayo

Maansadaan bareeggii ka furay way baxsanaysaaye
Kubbad habari ay laaddayna way ka badisaaye
Miiraash sideedii ayay taako socotaaye
Intaanay Duudiyo⁶ u kicin cidhifka Doorale⁷
Xakamihii fardaha iyo bal maan xadhig ku soo jiidoo

Qorshe gabay Ilaah baa i baray waana tiriyaaye
Qiiriyo waxaan kaga hadlaa caashaq fara wayne
Ma qalloosho sida laamigee waan qotomiyaaye
Qosol bay u daataan dadkii iga dhegeystaaye
Silacaa waxa loo mutay calanka weeyaane
Farta kii ku goda dadyahow haad ha ku casheeyo
Maantana xorownoo wallee dawlad baan nahaye
Madaxdii la doortiiyo haddii aabbo talinaayo
Barwaaqaa la gaadhoo Ilaah mahaddi weeyaane
Ninka madaxda caasiya dadyahow nuurad ugu maydha

Kiinnii calanka caayana dadyahow daamur ku dhamuqa
Ka kalee ammaanana dadyahow furun u googooya
Xilka nimankaannu saarrow fuliya hawshiinna
Dadaala oo u kaca dad iyo dalkuba waydin sugayeene

Afartaa intaan cuud u shiday mawgu riday fooxa
Dhool dahaba maw geliyay oo mawgu daray xaydhna

Tixraax:

¹ Wuxuu ahaa nin gumaysigii Faransiiska aad u mucaaradi jiray ; halkan gabayaagu wuxuu tilmaamayaa dhakhtar ama isbitaal ku yaal magaalada Jabuuti oo ninkaa loogu magac daray.

² Maryo ay ku qoran yihiin hal-ku dhegyo gumaysi-diid ah ayay dadku jeebabka iyo guntiga hoostiisa ku soo qarsadeen waxayna la soo baxeen maryahaa iyagoo kacdoonsan kolkii madaxweyne De Gaulle oo Jabuuti booqanayay goobtii ay joogeen la soo mariyay.

³ Waa sinimoo ku yaal guudka ama badhtamaha magaalada ; meeshaasi, maalinta gabayaagu ka hadlayo waxay ka mid ahayd goobihii shacabka gadoodsan iyo ciidammadii Faransiisku isku jiidheen.

⁴ French Foreign Legion; waa ciidammo ajnabi ka kooban oo Faransiisku leeyahay.

⁵ Waa degaan ku yaal duleedka Koonfur Bari ee magaalada Jabuuti.

⁶ Waa degaan ku yaal duleedka Waqooyi Galbeed ee Jabuuti, halka ay haatan ku taal marsada Dooraaale.


Erey-qeex:

Xuunsha-daba-roor: waa dhagax xatig lagu xiro oo wax lagu gano oo sameeya tuuryo dheer; dhagaxa iyo xarigga oo is wata ayaa la sii daayaa; waxaa kaloo loo yaqaan waraf ama wadhaf.

Baawar: waa erey Af-Ingiriis ah; Power - oo ka dhigan xoog ama awood.

Shaar: dabbaabad ama taangi; waa gaadiid ciidammadu ku dagaal-lamaan oo xoog badan.

Bareeg: birta gaadhiga joojisa kolka uu soconayo; waa erey af-Ingiriis ka yimid; *brake* oo micnihiisu yahay joojiye.



Xornimo Aammus Lagu Waa
(Gabay)

Saciida Cilmi Rooble, 07/10/1975

Gabaygan Saciida Cilmi waxay marisay sannadihii halgankii xornimo-doonku meesha sare gaadhay, midnimada shacabkuna sii xoogaysanaysay, xisbiyaddii gobanimo-doonkuna aad u hanaqaadeen taageero wanaagsanna gudaha iyo dibaddaba ka heleen. Waa sannadihii ay soo dhawaatay madaxbannaanidu ee saxar-saxadii xornimo neecawdeedii la dareemayay. Gabayaagu waxay dadka si qiiri iyo lab-kicin leh u xasuusinaysaa wixii isticmaarka laga soo maray darxumo iyo gabood-fal aad u badan, Waxay shacabka ugu bishaaraynaysaa in guushii soo dhawaatay, iyadoo ku adkaynaysa in dhibaataadaa la soo maray wax laga barto oo ay cashar noqoto.


Addimmaha wax badan baan la'ayn, lagu adeegtaaye

Uu dhegaha naga awdi jirey, eebo lagu taagye
Wax dhan baan adduuniyo ahayn, adhi sidiisiye
Uu edegyo* naga buuxin jirey, eyfar aan nixine
Wax dhan baa albaabbada bannaan, ood naloo dhigaye
Oo miino lagu aasi jirey, olol ka boodaaye
Wax dhan baan arooryaha fadhiney, agab la'aaneede
Oo lagu iqaabnaa cadceed, uumi kululayde
Wax dhan baan eggeremaad qabnoo, oon na gawracaye
Oon amar u haysanin biyaha, aqalka noo yaalle
Wax dhanbay Ibleyskiyo Kufriyu, noo arrimiyeene
Oo kii ag joogsani lahaa, uubta loo qodaye
Wax dhanbuu Gumaysigu sidii, awrta noo raraye
Oo aax ninkii yidhi rasaas, loogu aar-gudaye
Wax dhan buu ardaa noo hantiya, eygu jiiifsadaye
Uu oorideennii ku qabey, uunsiga lahayde
Wax dhan buu na aakulani jirey, aammin laawuhuye
Uu adhaxda duudkiyo lafaha, aad u raamsadaye
Wax dhan buu ugaadhsaday dhurwaa, aarankii kacaye
Uu igadh ka dhigay qaalmihii, ayniga lahaaye
Wax dhan buu ayaankaan lahayn, oogadaa jiraye
Uu nagu addoonsaday Faraans, araddadeenniye
Wax dhan baan agoon hooggan iyo, alaw ku noolayne

El Baa ii ayaantay kacduu, aabbaheen yimide
Waa kaa iftiinsamay dhulkii, idhan madoobaaye
Waa kaa aqeeliyo la helay, ibo daruureede
Waa kaa abaartii ku xigey, doog ayaamahane
Waa kaa udgoonkii bixiyo, ubixi dayreede
Waa kaa adduunkii gudhnaa, buuxshay ibihiiye
Waa kaa afkii laga xidhnaa, eegga soo mudhaye
Waa inaad dadkii ooyayoow, wada ogaatiine
Waa inaad itaal wadajiriyo, urur ku toostiine
Waa inaa cadaawaha indhaha, lagu ilaashaaye
Waa inaad ogaataan xornimo, aammus lagu waaye.

Erey-qeex:

Edeg: Xerada maqasha lagu xereeyo, halkanse gabayaagu waxay u la jeeddaa xeryihii siligga ka samaysnaa ee gumaysigii Faransiisku dadkii kacdoonka wadey ku guri jirey.



Calan-Xiis

(Geeraar)

Xaashi Cabdillaahi Orrax, 1977

Geeraarkan magaciisu yahay Calan-xiis, Xaashi Cabdillaahi Orrax waxaa uu tiriyey habeenkii la saaray calanka xornimada Jamhuuriyadda Jabuuti, 27^{kii} Juun, 1977^{kii}, isaga oo ku xidhnaa habeenkaa xabsigii *Laanta Buuro*, oo ku yiil koofurta Soomaaliya,

isaga iyo toddoba kale oo ka tirsanaa halgamayaashii Jabhaddii Xoraynta Xeebta Soomaaliyeed. Waa diiwaan murti-koobe ah oo goor walba laga daalan karo wajiyadii kala duwanaa ee taariikhdaas qaaliga ah.

Immisaan xayirnaayoo
Xaajadaydu qasnaydoo
Xiddiggon kor u eegiyo
dhulka oon xarxarriiqiyo
Xoqanayey dhafoorka
Immisaan xog la'aayoo
xaafaddii an galaayiyo
Xaskaygiiba ka baadayoo
Xidh Maroodi xareedshiyoo
Xaadhin aar iyo gool
Xawayaanka la seexday

Immisaan Xamar yuub iyo
Awrkii Xoodi ahaayoo
Xiggii laygu xidhayay
I xoodeen garbihiiyoo
Xamuulkii lay saaray
I naafeeyay xanjaadka

Immisaa la i xaabshoo
Xaar Maroodi i qaatoo
Fiishta laygu xaraystoo
Sidii lay xobkinaayay
Nafta layga xayuubshay

Immisay igu xiintayoo
Xirribohoon isku keeniyo
Hurdo an ka xiraatoo
An xamaarasho mooyee
Sida Xiid ladi waayey
Immisaan xagal daacayoo
Garnayl an xas ku aasay
Anigoo wali xoorin
La ogaaday xogtaydoo
Xaggee baad ka keentay

Dadka yays ku xigteen
Inteebaad la xidhiidhay
I maraamaray Xoosh

Immisaan xiqdi joogiyo
Nafta oo xurno waydiyo
Noloshoo xallad beeshiyo
Xaal an xaalba ahayniyo
Xayamuud ku sugnaa

Ma xishoodo gumaysi
Ma yaqaanno xaq dhowrka
Ummadaan ka xanaaqin
Amase ka xanuunsan
Xawayaanka sidiisiyo
Xooluhuu ku matalaa
Xaraash* buu ka dhigaa
Wax badan baan xaqirnaaye
Calankii na xoreeyayow
Kii xalaasha ahaaye
Xinjir dhiiga ka beermayow
Xoogga kannu ku keennee
Naloo siinin xususta ow
Dadka kii wada xeershee

Xigto qaar la ahaynow
Xayskan maanta darrooraye
Xajiintii naga maydhayow
Dhammaan kaan wada xiis-
naye
Xubbigiisu na qaadayow

Kumam baa Xarbigaagii
Xabbadu la tagtayoo
Aawadaa u xabaalan
Kumam baa la xareeyayoo
Aawadaa u xidhnaayoo

Xabsi daa'in ahaa
Kumam baa la xaweeyoo
La weydaarshay xudduudkoo
Aawadaa la xasuuqay
Kumam baa xummaddaadiyo
Xanuunkaaga u saaqmayoo
Xadfayoo iska dhaqaaqay

Ummaddii xaddi beeshee
Aawadaa la xasuuqay
Caawa oon xusiweynno
In aan xusi wayno
Xeerba mayna ahayne
Raggaygii la xijaabay
Bal an xuubka ka qaado
Afrikoon xor ahayn
Kii Diggool ku xanaaqee
Yidhi xeebta ka guur
Geesigii is xilqaamee
Xaqa noogu dhawaaqay
Ilaahay ha xurmeeyo
Jannadii ha xaluushee,
Xarbi' maannu illaawin

Xisbigii Boobuleer²
Xarakadii la abuuray
Wiilashii xilka qaaday
xiisadday na gasheen
Shicibkii wada xaytee
Qof xerooda la waayay
Gidaaradaannu xardhaynay
Dariiqyadaannu xidhaynay
Xarqadahaannu lulaynay
Xuruuftii ku qornayd
Xornimaannu rabnaa
Xandulloow³ naga guur

Ee Diggool ka xumaaday Pillot ⁴ uu ka xanaaqay Saget ⁵ xowlaha goyse xukunkii iyo taladii iyo xiddigihii laga xoobshey Cali ⁶ xaaxiga raacshay	Xunbushkuu wadanaayiyo Cali xaaddu dhaqaaqday Qof xubeersha u waayay Xaalka waad aragtaan Ma wanaagsana xeebtu Jabuuti way dad xumaatay EL BAA II xintamaysiyo Xasan baa iga qaatay Dikhil maaha xagayga Barkhad ¹¹ baa iga xoogay Casajoog ¹² la xaraysayoo Siyaad ¹³ bay la xidheenoo Jabhadda xeebta xoraynta Caarray ¹⁴ wa xarunteeda Xayu ¹⁵ way iga xabootay Diini ¹⁶ baa ka xadreeyoo Sheekhaa ¹⁷ ka xaddiisa Tajuraa xisbigaygiyo Xigtaydu jirtaaye Inakeena xaggaasi »	Jannadii ha xuluulshee Xasan ²² maanu illaawin Afartaa xarakeeyay Xardhayoo iska dhaafay Odaygaa xilka qaadiyo Xasan baan la dardaarmiye Xigmaddaan ku hadlaayiyo Bal xaddiiska dhagaysta
Xoogguu na dul keenay Xabbadii na asqaysay Xayndaabkuu nagu meershay Bandowdii la xidhiidhshay Aftidii la'iga xoogay Xeraduuggii na gaadhay Badh xuduudda ku daadsha Badhna jeelka ku xooro Badhna xaabada saara Xalwadda iigu sameeya	Xaggii uu xaflad wayniyo Xarikaad ka sugaayay EM BII EL ¹⁸ xormimuu u dagaallan Iyo xeelad jihaad Xusulduubka ku raagtay Shicibkii ay xammaysay Xornimo fadhnaa Isticmaarku xis* weeye Ummaddii la xasuuqay Ay xabaal nololsheenay Xabbadda ay la dhaceen iyo Duduuggay xin dileen Ilaahay ha xurmeeyo Jannadii ha xuluulshee Xummad maannu illaawin Xayow Xaaji Cusmaan ¹⁹ Xaaji Qayre Qayaad Xabiibkii ina Boode ²⁰ Cabdillahi Xariir Gaashaamaaliyo ²¹ Xaawa Moogahay xabadkiisiyo Xawga ay ka jareen Inta aanan xasuusane Xumbulidaasi ku aasan Ilaahay ha xurmeeyoo	Xeer ilaaliye guudow Haddii laysku xingaalo oo Xiniin-taabad ay gaadho Ama xeerka la dhaafo oo Xadgudub meesha yimaaddo Ama xiin la abuura oo Qabiil loo kala xayto oo Inba meel ka xadrayso Calankay nu ku xiiqnay Xiise yeelanimaayo oo Ka xabaasha ka taagan baa Ka xawaad badanaaya Xeer ilaaliye Guudow Haddaan xoog la abuurin La adkaynin xidhiidhka Nabadda loo xilan waayo Ama loo wada xaydano oo Danta guud lagu xiiqin Dhididka an la iska xafuujin Xagliskay nu niqiiniyo Xeelad la isku muquunsho Xagta xigta miis u yimaaddo Loo sinnaanin xuquuqda Badhna xooxda la siiyo Badhna u xigta maalo Badhna aanu xiraadan Iga walloy xasilayninoo Ninna xeedho fandhaal Uu kusoo xagahayn
Xamastii yaryarayd Gabhiihii xamranaa Odayaashi xarobay Budriyeerka ⁷ ku xareeyoo Xayni yaanay ka caymane Dhammaantoodba u xiira		Xeer ilaaliye guudow Haddaan loo gogol xaadhino Dhaqaale xoogga la saarinoo Wax soosaarka la xoojino Hantida la xaraynoo Wiilkii xaabsan yaqaan iyo Laga dhowrin xatooyo
Raggii xuurta la siiyayee Xiidmahooga wadheen iyo Ilaahay ha xurmeeyoo Jannadii ha xuluushee Xabiibkii Ina Cadhoolay ⁸ Xiniinyaha ka jareenay Xubinba meel ku wadheen iyo Xaajigii ma illaawin		
Xukaantii Afrikaanku Markay xeebta tageen Xisbigii EL BAA II ⁹ Ee an xidhiidhka lahayne Xamar aannu ku heeshiniyo Xasan ¹⁰ ay la kulmeen Xalqiguu isku keeniyo Dadku meesha ku xoonshay Xaddigii tiradii iyo Xisaabteedna la yaabe La taabsiiyay xaqiiqda		

La xisaabtami waayo
Xiqdigaan ku jirayniyo
Shalay aan la xasuusan
Maanta xaaladda taagan iyo
Barri aan la xisbaynin
Xeeli baali ciyaarro
Kii xanteena yiqiin iyo
Kii xogteenna ogaa iyo
Xayle²³ maanu fogaanin oo
Xaskay noogu jiraanoo
Dib bay noo xakamayn

Xeer ilaaliye guudow
Qofka oo la xaq dhowro oo
Sharafka an laga xuubin
Aqoontoo la xurmeeyo
Xarfadda uu la yimaaddo
Laga xaasidi waayo
Maskaxdoo la xoreeyo oo
Sida xaal ugu muuqdo
Xirgigiisu uu moodo
Si xalaala u sheegta
Ruuxna uu ku xumayninoo
Xabsi aan lagu gaynin
Xantu way ku dishaaye

Runta laysku xariiriyo
La xiwaartamo weeyi
Xeer ilaaliye guudow
Awooddoo la xadeeyoo
Xadmigeega la sheego
Xuduudeeda la qeexo
Laga dhowro xafiltan
Xilka kii qabanaaya
Tartan aad ku xushaan
Xaagaan way ku dishaaye
Xeerkoo la isku aroorsho
Dhamaanteen xidha weeyi

Xeer ilaaliye guudow
Xigtadaan kala dhowrsan
Way xabaalo badshaan
Mid xajiin la wareega
Fidnad xaynka ku qaata
Galinba xaafado jooga
Mid xumaanta tashiisha
Xiqdi Eebbe ka buuxshay
Mid shaydaan xurbinaayo oo
Balo xarar dhaamin
Mid aad xaaji wadaadiyo
Sheekh xaddiisi ad mooddo

Meel an xiin ba ka joogin
Xiisad wayn ka shidaaya
Xawda oo la is gooyiyo
Xamashkoo la is ruubo
Ku xaraara baxaayiyo
Xaasid yaan la dhagaysan

Wax badan baan xaqirnayne
Calankii na xoreeyow
Kii xalaasha ahaaye
Xinjir dhiigga ka beermayow
Xoogga kaannu ku keenee
Naloo siniin xusuusta ow
Kii xubbigiisiyo
xiisihisu na deeqayow
Dadka kii wada xeershee
Xigto qaar la ahaynow
Xididkaagu aroor
Xagashaadu ma liicdo
Waligaa ha xaraysan
Xirsaan ku xidhayaaye
Waa balaayo xijaaban
Xamdi Eebahay weeye
Waa balaayo xijaaban.

Tixraac:

¹ Halyeygii Maxamuud Xarbi.

² Movement Populaire; Xisbigii gobonimo-doonka ahaa ee uu hogaaminayay Maxamuud Xarbi.

³ Faransiiska ayuu ula jeedaa.

⁴ Jenaraal Pillot, wasiirii isticmaarka Faransiiska.

⁵ Louis Sager, waa badhasaabkii xitligaa ee Faransiiska Jabuuti u joogay.

⁶ Cali Caatif Burhaan wuxuu ahaa hoggaamiyihii Xukumad-hoosaaddii isticmaarka ee Jabuuti.

⁷ Poudrière, xedho silig lagu ooday oo Faransiisku ku ciqaabi jirey dadka kaedoonka wada.

⁸ Cabdiraxmaan Cadhoole waxa uu u ololayn jiray xorriyadda, ciidammadii gumaysiga ayaa dilay 1966-kii.

⁹ LPAI, waa Xisbigii gobonimo-doonka ahaa ee xornimada dhaliyayay.

¹⁰ Xasan Guuleed Abtidoon; madaxweynihii ugu horreeyey ee Jamhuuriyadda Jabuuti.

¹¹ Barkhad Guure Xamadu wuxuu ka mid ahaa madaxdii xisbiga gobonimodoonka; wuxuu

noqday ra'iisul wasaarihii saddexaad ee Jamhuuriyadda Jabuuti xorriyadda ka dib.

¹² Casajoog, meel ku taal degmada Cali Sabiix.

¹³ Maxamed Siyaad Barre, madaxweynihii Soomaaliya (1969 – 1991).

¹⁴ Waa buur u dhow magaalada Cali-Sabiix.

¹⁵ Magac kale oo loo yaqaan magaalada Obokh.

¹⁶ Axmed Diini Axmed, xoghayihii guud ee Xisbigii LPAI, wuxuu noqday ra'iisul wasaarihii ugu horreeyay Jamhuuriyadda Jabuuti markii xornimada la qaatay.

¹⁷ Axmed Maxamed Ciise (Sheekho) wuxuu ka mid ahaa madaxdii xisbiga LPAI.

¹⁸ Movement Populaire, xisbi dhallinyaro gobannimo-doon ah oo lagu tiriyay in ay siyaasad ahaan u janjeereen dhanka bidixda.

¹⁹ Sheekh Cusmaan Wacays, waxa la dilay 1966.

²⁰ Sheekh Cabdillaahi Boode, wuxuu ka tirsanaa xisbigii Mouvement Populaire, Faransiiska ayaa Dikhil ku xidhay 1966-kii, 8 sano ayuu xabsiga ku jiray dabadeedna Soomaaliya ayaa loo masaafuriyay. Muqdisho ayuu ku dhintay 1975.

²¹ Gaashaamaale wuxuu ka tirsanaa ciidamadii Jabhaddii Xoraynta Xeebta Soomaaliyeed (FLCS), ciidamadii ilaalada xabsiga ee xukumaddii isticmaarka ayaa xabsiga ku dilay dabayaaqadii 1976^{ku}.

²² Xasan, Xasan Boliis, halgamaa ku geeriyooday Laoya-Cadda shil bas la qarxiyey oo ay af-duutay jabhaddii FLCP.


²³ Xayle waa Mengistu Haile Maryam.

Erey-geex:

Xaraash : waa dibiga u hayimooba ama u laylyama beer qodidda / beerfalidda

Fadhnaa : waa eray af-Cafari ah oo micneheedu yahay 'doonaynaa'.

Xis : waa eray af-cafari ah oo muujiya la yaab; wuxuu u dhigmaa erayada 'naw!', 'heey!', 'wah!'



Bar-gobeed*(Geeraar)*

Jaamac Muuse Miicaad, 1977

Geeraarkan la baxay Bar-gobeed, oo uu curiyey abwaa Jaamac Muuse Meecaad, wuxuu taariikh iyo tusaale ka bixinayaa sidii gumaysiga Faransiisku xeebta Jabuuti ka soo galay, sidii uu ugu ballan-furay heshiiskii odayaashi waddanku la galeen, halgankii ummaddu u gashay madax bannaanideeda iyo, ugu dambayntii guushii la hantay.


Annagoo Baddaa Cas
Barwaaqadeeda kulaalloo
Bura meel la yidhaahdiyo
Baadhaweyn dabadeediyo
Beeshu Buur Ugul taal
Randa geelu bariisto
Belooy baydha ku haynoo
Biro qaylinayaa
Baddaa noo dhexgaleenoo
Bilistaa baqa roortoo
Dhallaanka baxsan gaadhayoo
Odayaal Barda dheeroo
Garta baadhi yaqaanniyo
Guurti baan bixinnay
Obokh baa lagu baanay
Baruurweyne wankii iyo
Orgigii bacalkaagiyo
Dibi baydda ka naaxiyo
Kalluun baan ku bariinnayoo
Berriba waad naga guuri baa
Buugga loogu saxiixay

Baadidii kugu raagta
Bartaadiiba la moodye
Ballankii bidixeyoo
Badhiduu u fadhiistayoo
Annana beerka ka guuxnayoo

Billaawihii ma-tudhoo iyo
Warankii bog-dillaacshiyo
Sar Biciid² laga gooyiyo
Budhkii baan rogannay

Qayladaa bilistaantayoo
Warkaa aad u ballaadhayoo
Baacugii Ingiriiskiyo
BBC'dana gaadhay

Xaqaa baal la socda oo
Bar-gobeed ma hallowdo oo
Barjimahe weyne adduunka
Xaqa loogu bogaadshiyo
Boodhkan baan irkannaayoo
Calanka balfanaayaan
Burdada ku mudnay
Barquu roob nagu hoorayoo
Biyahaa lagu maydhayoo
Bismillaahi Raxmaane
Kolkaa baan bogsannay.

*Erey-qeex:*¹ Magaalada Carta ayaa buurtaa dusheeda ku taal.² Waa gaashaan laga sameeyo sarta biciidka, gaashaankaasi aad ayuu u adag yahay oo waranku kama dusi karo.

Maansadani waxay soo baxday xilliyadii uu Jabuuti sida ba'an uga socday ololihii cabbudhinta iyo cadaadiska ee uu ku dhaqaaqay taliskii gumeysigu kolkii shacabku ka gadooday ku shubashadii iyo ka beensheeggii aftidii la qabtay 19^{kii} Maarso 1967^{kii}. Kolkii dadweynuhu kacay waxay ciidamadii isticmaarku bilaabeen

inay dadka xaafadaha ugu dhacaan oo soo ururiyaan dabadeedna xeryo goob milic ah laga ooday ku xereeyaan halkaana gaadh laga qabto, qaar la masaafuriyo, inna xabsiyada la dhigo si loo baqtiyo kacdoonka shacabka. Markaa ayay Mako Shirdoon

Wax Yar Gaadhka Iga Hay
(Geeraar)

Mako Shirdoon Sugaal - 1967

oo ka mid ahayd dadkii xeryahaa gaadhka laga hayo lagu ooday, geeraarkan guubaadada ah ku dhiirri gelinaysaa shacabka, si aanay ugu liicin caddaadiskaa gumaysiga, ugu midoobaan halganka isagana ilaaliyaan in loo liico cadaadiska gumeysiga. Gumaysigana waxay ugu dardaar-warinaysaa inuu mar uun calankiisu dhici doono dulmigana dhabarka laga jabin doono.

H addii uu badh gadoodo
Gumeystaha iska diido
Gudin dheer la carraabo
Nacabka soo gilgilaayo
Xornima gaadh is yidhaahdo
kolba gees ugu dhuuntuu
nacabka soo gilgilaayo
badhna soo garbinaayo
furaash dheer goglaanaayo
qosol uun gawda hayuu
Anigaan ku gabayninee
Ku garab taagan abidee
Hannaga guurin yidhaahdo
Oo geesigii halgamaaya
Godka uu kaaga dhuuntana
Anigaa garanaayee
Gaadhi ii shid yidhaahdo
Shaadir soo gashanaayoo
Gacanta uu ugu fiiqoo
Taasi haan gun la' weeye
Ma caanaa ku gadhoodhi

Giddigiinba dadweynow
Gobolkeenna Jabuutihay
Waxaan Gaala ahaynaw
Haddaan gees isu raacno
Madaxdeennan gadoodeyna
Garabkooda istaagno
Gayigeenna xoraynno
Gar maxaad ka qabtaan?

Afguduudan lahayde¹
Adna gaadhka iga hay
Oo guudkaa iga joog
Gayigani anaa iska leh


Awowgey baa ku guri galay
Geelayagaa ku jirijirey
Shalaad galab-carraabiyo
Guure iigu timiddaye
Gililicdii dhulkaygiyo
Nimcadiyo gadhoodhkii
Iyo gees-biciidkii
Markaad micida geliseyee
Sidii gofane cawlkkii
Lagaa goyni waayaye
Mar uun buu gudgude di'i
Mayeygu soo gadaal noqon
Xiddiggaagu gamashiya
Oon dib u soo gadaal noqon
Fidhinkeygu guigsami
Calan guudka saariye
Guusha waan haleeliye
Wax yar gaadhka iga hay

Gabankani aan dhalayaw²
Naftani way gadoodayoo
Godol kama helayside
Adna naaska gawlee
Oo geydha iga daa
La arkee adoo gob ah
Inuu Guulle kula sugo
Calan guudka saartidoo
Geeraar ku tiriside
Adna naaska gawlee
Oo geydha iga daa.

Tixraac:

¹ Markaa gabayaagu waxay sare u eegeysay gaalkii guriga dul taagnaa oo ha hadlina ku lahaa dadka.

² Waa gaban yar oo dhawr bilood jiray oo Mako ay dhashay markaana dhabteeda ka ooyayey oo ay hoos u jalleecaysey markay tixdaan tirinaysay.



Waktiiy Is Ayro Leh (Hees)

Maxamed Cali Talxa – 1967

Aftidii Jabuuti laga qabtay 19^{kii} Maarso 1967^{kii} ee xukumaddii isticmaarku boobtay natiijadadii ka dhalatay ayaa niyadjab weyn ku ridday aadna uga cadhaysiisay shacabkii Jabuuti iyo dhammaanba ummadihii kale ee doonayay in Jabuuti xaqeeda xornimo ay hesho.

Abwaankii reer Jabuuti Maxamed Cali Talxa ayaa markaas ummadda ku guubaabinaya in aan la niyad jabin, halgankana aan laga daalin oo maalin un ay heli doonto xaqa ka maqan. Waxaa uu sheegayaa in guuldarradu ku jirto isku duubni la'aanta iyo tafaraaruqa. Sida keliya ee dhibaataada isticmaarka looga bixi karaana ay tahay iskaashi ummadeed. Wixii tegeyna aan dib loogu noqone hore loo socdo si halganka loogu guulaysto iyo in la fekerro oo dhallinyaradu dhulkooda u kacaan,. Heestan soo socota oo ah Af-cafari waxay ka mid ahayd heesihii faraha badnaa ee gobonimo-doonka ahaa oo abwaanku ku guubaabin jiray dadkiisa. Heestii oo Af-Cafari ah iyo tarjamad Af-Soomaali ah oo ka dambaysa waa sidan.

Waktiiy is ayro leh
Saakiy is aado leeh
Takkem cisaabisaay
Daban walut gaca

Garcit tan ummatey
Sinn aado waklisa
Daban walut gaca
Itteenim ixxica

Sinnim gabat luk
Nee n'ayro gee kalan
Nan who manaaxigaay
Ittin ganot nani

Rabtem katay mali
Caacay matar mali
Akeera shar mali
Addunya waar mali

Xaynal faxaanama
Xayih bicse weeniki
Kak raaqe waanama
Bicta ayro aalle le

Wadaayey engela
Esgellaay engela.

Waqtiba dhallinyartii leh
Nin waliba maalintii leh
Wax jiraa hubsasho leh
Waqtiguna la saanqaad leh


Dadka maanka laga awdayoow
Gacmaha is qabsada oo
Waayaha la saanqaadoo
Wax ka dhaha adduunyada

Rag muggoodii haystaa
Maalinkeenni na duudsiyay
Annana taa ma aragnee
Waynaga is dabar jari

Wixii tagay tiigsimaad maleh
Dabaylna lama gaadhi karo
Dunida laguma waaro
Aakhirana shar ma leh

Waxii dadaal loo doonay
Haddaan dhaqso loo hantiyin
Haddaan daal looga hadhin
Maalin un baa la heli

Walaalahoow isutagoo
Istaageeroo midoobaay



Gabaygan waxa uu Xasan Cilmi kaga hadlayaa dhi-baatadii isticmaarku shacabka u geysan jiray, sidii looga dhiidhiyay, halgankii dheeraa ee shacabku xor-riyadda usoo galay iyo guushii kama dambaystii la hantay. Gabaygani wuxuu soo baxay habeenkii Jam-huuriyadda Jabuuti laga taagay calanka gobannimada, 27^{kii} Juun 1977^{kii}. Abwaanka weyn, Xasan Cilmi, sida abwaannadii kale, wuxuu ku tiiqtiiqsanayaa nafhurrkii dadka reer Jabuuti ugu guntadeen inay soo dhi-ciyaan xornimadooda.

Ma Ku Joojay (Gabay)

Xasan Cilmi, 1977

Waxaad jamatay adigoon u jabin ama u jaanjaamin
Adigoon jaraaq iyo u marin jiirta lagu daalo
Jibbo waalan adigoon la kicin jaarri iyo faallo
Adigoon jahaad kulul u galin jeeri lagu goosmay
Jaahaaga adigoon u dhigin jibinta guuxaysa
Mootaha jigtiiyo adoon jabaqda moogaanin
Julqankaaga adigoon sidii jeerta laga yaabin

Inkastuu cadaawuhu jinqiyo hilinka kuu jeexan
Ula jeeddadaadiyo adoon hadafka jaan qaadin
Jidadkoo lagaa xidhay adoon jaxar ku waydaarin
Jalleecada adoon waayo badan jaaha wareegtoobin
Adigoon jaleeliyo u cunin jalawga dheemaalka
Jiilaal caddaadiga adoon kaalinta u joogsan
Jirroolaha adoon ceel bir qoda jiiibta ugu heesin
Jeekaha adoon uga qolfayn jar iyo buur dhaabo

Jamaalka iyo quruxdii adoon jagacu kaa leefin
Adigoon jidhkaagiyo hilibaha caaro uga jeemin
Sida jir dhallaanooy bisadi luqun jibaadhayso
Markaad jeeni qaaddaba adoon joofta lagu laacin
Meel lagu jirroodiyo adoon jeelka lagu geynnin
Jarrabaadda adigoon wadnuhu dhuugga jalamlaynnin
Jamac iyo hishiis iyo haddii aan wada jir loo raadin
Jufa li'i haddaan loogu kicin jaanka dirirtiisa
Ummad kala janjeedhiyo xornimo jees yar lagu
waaye

Anigoon hurdada jeerba ladin raaxana u jeedin
Jirkoo da`aya jawgoo malmalan juubihii dhaxanta
Habeen jiiay jeexiina hadhay waxan jarmaadaaba
Ood-goyda jiiptiyo waxaan hawdka jeriyaaba
Jidhidiyo cadaaddiyo waxaan halaca jiidhaaba

Jaqaftiisa bahalkii waxaan jidhidhicoodaaba
Caawaba Ilaah baa jira e jiiddu waa nabade
Jirridduu gumaystuhu turqaday jaranjartuu waabay
Waxaan jidibka ula gaanbiyo oon jabaxda dhawraaba
Ma jirjiray intaan jaray miyaan jaanta ugu tuuray
Ma ku joojay calankii bartii kiisa laga jidey

Anigoo harraad jaabulmay oo jilicsan oo liita
Naftoo jahatay juuq uma galee waxan jarbeebshaaba
Jillaw igu maroortiyo waxaan jaraha diidaaba
Jibaadkayga feedhaha waxaan jalalow reemaaba
Jaandaaran² qoodh ihi wuxuu shicibka jeedlaaba
Wuxuu jibka nagu meeriyuu cago juleeyaaba
Jaanleef markaan ula baxnay ee jaqaska loo gooyay
Ka jiciiray hawl yari ninkii dhuugga jiiqsadaye
Jilka urursay jiidduu ka yimid jaahilkii qabaye
Ma ku joojay calankii bartii kiisa laga jidey


Isticmaarka jaamuday siduu jilibka noo saaray
Jillab Hadhiye³ iyo jooggan waa nagu jaxaasnaaye
Jarqankiisa inuu noo xidhuu jeebka nagu haysto
Waa kii jujuub nagu marsaday jin iyo xeesheede
Waa kii jikaar nagu maamulay boqolka jiilaale
Inkastuu janaabaha degay uu jabadka noo seexday
U jirjirinnay jiidhkoo dabciyo jixinjix loo diidye
Danta waxaan u jeedaalinnaba jabinnay xooggiiye
Ma ku joojay calankii bartii kiisa laga jidey.

Erey-qeex:

¹ **Mootaha:** hoobiye, moortar: waa qori ama madfac ka mid ah hubka culus

² **Gendarmarie:** waa askar ama ciidan ka mid ah qaybaha ciidammada. Waddamo badan oo ah kuwii faransiisku gumaystay ayaa leh ciidammadan.

³ **Jillab Hadhiye:** waa sannad hore oo ka mid ah sannadihii Soomaalidu sida gaarka ah magacyada ula baxday. Xog sugan lagama hayo taariikhda uu ku beegnaa.



Galiilyo

(Gabay)

Aamina Aw-Cali, 1977


Gabaygan Aamina Aw-Cali waxay kaga faalloonaysaa tacadiyadii xanuunka badnaa ee isticmaarkii dalka muddada dheer haystay shacabka soo marsiiyay. Waxay ummadda xasuusinaysaa halgankii laysaga riday heeryadii gumaysiga iyadoo ku gubaabinaysa in ay adkeeyaan oo indhaha ku

G a'da gabayga anigoo yar baa, lay gardaad xidhay
Waa taan ka gaabsaday markay, guushu dhalan wayday
Ma gorfeeyo maansooyinkii, igu gadaannaaye
Waa taan ganbiyay maalintuu, dhiiggu galac leeyay
Gayigaannu leenahay markuu, nacab galaayusay
Geelii awawgay markii, Baarii loo geeyay
Galaw caanaheedii nin kale, gaawahaw qaatay
Gadh-madoobe aabbahay markii, gawrac lagu jiiday
Ee gacalo hooyaday ilmaha, galab la waydaarshay
Gabankii koraayayba markii, geedka lagu toogtay
Ee gabadha Soomaaliyeed, naaska laga gooyay
Ee nabadda geed dheer la sudhay, meel an cidi gaadhin
Galiilyadiyo ciilkuba dadyahaw, igu gar sow maaha?
Hayeeshee gadaal iyo warkaan, idin guddoonsiine
Anigoo gubtaanyoonayoo, gocasho ooyaaya

Anigoo gaddaan maagganaa, gaadhi kari waayay
Ayuun buu gu'roob noo curtoo, geelu noo dhalaye
Waa galabba cayneey dunidu, sacab la gaw leeyay
Ilaahay gargaaryoow Guuleed², guriga noo ooday
Kama gaabiyee Diini³ baa, gudunta soofeeya
Dar kaloo gadaal jooga baa, awrka gibileeya
Shicibkoo gama'a diiday baa, geela eegaaya
Guullaha na uumaan u naqay, mahad an guuraynin.

Tixraax:

- ¹ Waxay ula jeeddaa magaalo madaxda Faransiiska ee Paris.
² Xasan Guuleed Abtidoon; guddoomiyihii Xisbigii Gobonnimodonka LPAI; wuxuu noqday madaxweynihii u horreeyay ee Jamhuuriyadda Jabuuti, 27 Juun 1977-kii.
³ Axmed Diini Axmed, xoghayihii Guud ee Xisbigii LPAI; wuxuu noqday Ra'iisul Wasaarihii ugu horreeyay Jamhuuriyadda Jabuuti markii xornimada la qaatay.



Hooy Jabuutaay

(Hess)

Cabdi Muxumad Amiin, 1967

Muddadii uu socdey halganka xornimo-doonka Jabuuti, dalka soomaaliya, suugaanleyda iyo guud ahaanba halabuurku waxay dhankooda ka wadeen olole fan iyo suugaaneed oo ay ugu hiillinayeen walaalhooda reer Jabuuti, taasna suugaanleydu waxay uga tarjumayeen dareenkii guud ahaanba shacbiga Soomaaliyeed ee u qiiraysnaa gumeysi-diidka Jabuuti. Tixdan soo socota abwaanka weyn, Cabdi Muxumud Amiin, dareenkaas ayuu ku muujnayaa. Ka dib booqashadii aan hore u soo xusnay ee madaxweynihii Faransiiska, Gen. De Gaule, ku imanayey Jabuuti, bishii August, 1966, waxaa joogsan waayey muddaaharaadyadii iyo kacdoonkii dadweynuha, ka dibna dawladdii Faransiisku waxay ku dhawaaqday in dadka reer Jabuuti afti laga qaadi doono marka la gaadho 19^{ka} Maaris 1967^{ka}. Waa markaa kolka abwaan Cabdi Muxumad Amiin heestan ku gubaabinayo shacabka Jabuuti, asagoo uga

X ornimo waa loo jihaadaa
Jaad iyo jiif laguma helayee
Haddaan jilibka loo dhigin
Isticmaar kaama joojee
Iska jir cadowga kula jecel


Inaad jabto oodan joogsan
Hooy Jabuutaay.
Gumeysi inuu jarmaadiyo
Inuu gurigiinna joogo
Afkii "Janaraal Diggool" baa

Dardaaran idiinku jeedshee
Iska jir cadowga kula jecel
Inaad jabto oodan joogsan
Hooy Jabuutaay.
Haddaad jilbiskiyo abeesada
Jar iyo laaleys ka tuurtaan
Jillowdana aad u goysaan
Jintiinnaad maali doontaan
Iska jir cadowga kula jecel

Inaad jabto oodan joogsan
Hooy Jabuutaay.
Jannada inaad doorataan
Iyo inaad Jahannamo galeysaan
Julaay iyo Juun dhexdoodaa
Jawaab la idinka sugayaa
Iska jir cadowga kula jecel
Inaad jabto oodan joogsan
Hooy Jabuutaay.

Erey-qeex:

¹ Jillow: maydhax, halkanse abwaanku waxa uu ula jeedaa xadhig ama xiriir, waxa uuna leeyahay xadhigga ama xiriirkaba u jara gumaystaha.



Jabuutaay (Gabay)

Cali Cilmi Afyare, 1977

Allaha u naxariistee abwaan Cali Cilmi Afyare waxa uu gabaygan tiriyey maalintii ay Jabuuti xornimada qaadatay. Gabayaagu wuxuu faallaynayaa sidii ay dadka Soomaaliyeed meel ay joogaanba ugu farxeen iyo sidii loogu dabbaal degay guushii dhalatay ee gobannimada Jamhuuriyadda Jabuuti. Waxa uu shacabka Jabuuti ku guubaabinayaa inaan hurdo iyo hoyaad danbe loo noqon, ee loo wada guntado sidii looga miro dhalin lahaa xornimada la qaatay iyo in loo jeesto sidii loo xorayn lahaa dhulalka Soomaalidu deggan tahay ee gacanta gumaysiga ku sii harsan.

Jabuutaay sidaan doonayaa, sowdki loo galaye
Sarmaseegto uma yeelinine, waydinkii sugaye
Sacabbada xornimadii la rabay, waad ku sidataane
Soo hoyse guul iyo libbaan, idinka suulayne
Sixirkiyo waraabihii ka guur, sabaddadiinniye
Loo siibay xididkii kuwii, idin dul saarnaaye
Saymaha darroorahaya iyo, madaxa sayraaman
Saxansaxada iyo laydhu waa, saban barwaaqaaye.

Sadkii idinka raagiyo nimcadu, saadanbay imanne
Saboolnimada iyo gaajadii, socotay weeyaane
Samaantaa idiin korortay iyo, saajacnimadiinna
Soomaali oo idil qalbigu, saaka wow dagaye
Sacab iyo ciyaar bay tunteen, saarki dhoomaha,^e
Saraar-daaqa iyo goolkiyo, sogobbaday loogtay
Sirqadiyo ardadu waa dhergeen, saadi farixiye.

Sanku neeflihii soo bixiyo, calamadii suuqa
Sawaariikhdi laydiin ridiyo, salowgi yeeraayay
Siigada cagtiyo qayladii, suuxyay cadowgiye.

Sabi kuu dhashiyo wiil yar waa, laga sadqeeyaaye
Saaciyo waqtigu waa midkaad, sahan sanayseene
Saddexdii gumaysigu u dhigay, soohdintiyo beenta
Summada iyo goobtii ku tiil, siliggi loo ooday
Seetadii mid baa goysay iyo, suunki loo xiraye.

Nin saaburay mar baa Eebbahay, saray u qaadaaye
Subuca iyo Yaasiinka iyo, suuradaha diinta
Seef iyo warmay kaga direen, saylarkii yurube
Sinta xeebta iyo buurihii, quruxda loo saantay
Siraad iyo if baa iiga baxay, Ubukh salkeediye.

Sallaankiyo dhismaha toosay waan, sugayay Nuurow,^{e2}
Sangaha niman yaqaan iyo, darmaan aad u salabaysan
Siyaasadda rag lagu aaminoo, saafiyaa wadaye
Sabuulka iyo mirahaas u baxay, wow sitiqiyeene
La sinnaade qayrkood hadday, sabanno liiteene
Sidig bow dhashiyo dowladnimo, suudi loo maraye
Samhariiradii iyo ka baxe, salowgi naareede
Saamigii walaalkaa heliyo, sadada uu haysto
Si loo dayaba sharaftiisu waa, sararahaagiye
Seeddiyo laftay kabantay iyo, saabka feeraha,^e

Sarsarkii dalooliyo mudkii, saaryay laamaha,
 Hadba saanta meel inaad dhigtoo, socoto weeyaane.
 Ma salgaarin saaxiibbayaal, seerahaan rabaye
 Safarka iyo geeddigu dhulkale, how sadcaal tago,
 Sunniyo waajib ciiddaada waa, inaad siiddayne
 War Soomaali waa maqan tahaye, seexashada diida.


Samaan iyo heshiis iyo haddaan, sulux la yeelayn
 Xaqa lama saluugee haddii, samada loo tuuro
 Sasab iyo luggooyiyo haddaan, siri dhammaanaynin
 Hanti wadaag silloon oo dadkale, saaray gogoshiisa
 Sogordaha gumaystaha sirgaxan, sun iyo waabayda
 Ma`oggoli sakiin dalable iyo, saawe-saawaha.e
 Sandulle iyo xoog laga tag iyo, salabka ii qaade

Sinnaan baa dhacdiyo qoolka oo, la iska siibaaye
 Soo dhaafyay aadmigu halkaad, wali sugaysaane
 Soofkaaga bahalkii cuniyo, subagga dhiiggaaga
 Salsaloollay geed dheer intuu, saaro jeenyaha,
 Haddiise aan la sarin maashu waa, inay siyaaddaaye
 Annakuna sariig iyo dulqaad samirray dhowr goore
 Sudda hoose iyo waa runtii, waxan sugaynaaye...

Tixraac:

¹ Cali Cilmi Afyare waxa uu ahaa gabayaa caan ah oo Soomaaliya aad looga yaqaan waxa uuna ka mid ahaa codadkii ugu waaweynaa ee Radio Muqdisho. Wuxuu muddo dheer ka tirsanaa Wasaaraddii Warfaafinta iyo Hanuuninta Dadweynaha ee Soomaaliya. waxa uu geeriyooday bartamihii siddeetannadii qarnigii tagay.

² Waa nin uu gabayaa ku halqabsaday, balse aan la helin magaciisa oo dhan.



Bulshooy Sow Maadan Garan

(Saar)

Xamse Daahir Maxamuud, 2007

The *sittaat* represent an authentically Somali poetic genre in which women express and experience their spirituality and their emotional involvement in Islam. However, like many other forms of women's orature, the *sittaat* have remained marginal to Somali cultural production as a whole. This marginality is partly due to the age and gender of those who commonly perform and frequent *sittaat* sessions, that is to say, older women, who have access neither to the religious authority of Islamic tradition nor to the cultural prestige of a Western education. Both culturally and economically, the women who perform *sittaat* lack power and authority. The *sittaat* are marginal also because, in the colonial period, Somali popular expressions of Islam came to be defined as backward in relation to the power structures of the colonial state. Although in northern Somalia the colonial encounter produced a definition of "authentic tradition" that gave more emphasis to a newly hierarchized, formalized and newly defined kinship identity than to Islam, the colonizers nevertheless attempted to formalize and "upgrade" Somali Islam, thus to some extent marginalizing those local practices that lacked the foreign, formal stamp of approval. This onus of backwardness persisted after independence, when the new middle class, with its Western education and aspirations, set the tone.

Some Somali intellectuals (such as Maxamed Cabdillaahi Riraash and Cumar Macallin, who introduced me to the *sittaat*) have acknowledged and asserted the aesthetic, literary, and social value of the *sittaat*. Supported by institutions such as the RTD and Djibouti's Ministry of Culture, they have begun to record and preserve them as part of the Somali cultural heritage, and have given the *sittaat* performers such as Luula Saalih a small moral boost through their interest. Yet most other middle-class men (merchants, shopkeepers, teachers, and professionals rather than writers, literary analysts, and intellectuals) at best regard the *sittaat* as backward, ignorant, and superfluous expressions of Islamic piety. A substantial number of these

men have become attracted to a lifestyle of intensified personal piety as advocated (largely by audiovisual means) by religious teachers from the Arab Middle East and Iran. While so far not actually hostile to the *sittaat* groups, these men have their eyes and aspirations fixed on the cultural examples of the so-called Islamic heartlands and have firmly turned their backs on Somali Islamic culture.

Many young middleclass women have also embraced a more pious Islamic lifestyle in place of the secular, neocolonial, consumer-oriented culture imported from France. These women have begun to take lessons in Qur'an exegesis and recitation and organize their own study and prayer circles. Whether these women will retrieve the *sittaat* from the persisting cultural marginality and the possible extinction to which they seem presently doomed is yet unclear. The depth of the spiritual, emotional, and aesthetic appeal of the *sittaat* and the shallowness (both in substance and in chronological depth) of the class gap separating most Somali women from their mothers and grandmothers may yet contribute to the preservation of this unique genre of women's Islamic orature in Somali.

Even though, in 2007 as in 1989, the impact of explicitly politicized Islamist groups has intensified the marginalization of Somali Sufi ritual and orature in Somali society (in the Horn and beyond) as a whole, in Djibouti, conscious efforts have been (and are being) made to preserve and develop Islamic devotional texts in the mother tongue. During Ramadan 2007, religious songs, especially in praise of the Prophet and *sittaat*, were a major and popular part of radio and television programming, especially before and after the call to prayer that marks *affur* or *afur*, the moment to break the fast for that day. Then the beautiful new compositions performed by various groups, including that of Aadan Cumar, Sheikh Dandaawi, and Gummad resound throughout the city of Djibouti – from the stores that open onto the street, the street-side diners, the open windows and doors of people's kitchens and homes, as well as from among small groups of people

breaking the fast on the sidewalks. The artists who have created and perform these religious songs have provided them with new musical and lyrical arrangements while preserving many elements of text, rhythm, and melody of the older versions. In Djibouti, at least in 2007, this hybrid genre conquered the airways and formed a central part of the people's Ramadan experience:

*Affuraay, affuraay, affuraay, ummadda Muslinkaay affuraay.*¹

Reference:

- ¹ This article is based on research in Djibouti in July-August 1987 and September-December 1989 and was initially written in 1995. The *sittaat* session described here took place on October 2, 1989. In Djibouti, Cumar Macallin, Maxamed Cabdillaahi Riiraash, and the Honorable Ismaaciil Taani, were my guides and generously shared their intellectual (and audio-visual) resources. Thanks also to the, now deceased, Luula Saalih and her *sittaat* group for allowing me to participate in the sessions, and to Yasmiin Muuse and the late Mariam Haibc and their families for their unfailing friendship and support. *Halabuur* gratefully acknowledges earlier versions of this article: "Sittaat: Somali Women's Songs for the "Mothers of the Believers," Boston University African Studies Center, *Working Papers in African Studies*, Number 25 (1995), and (without the original texts in Somali) in *The Marabout and the Muse: New Approaches to Islam in African Literature*, ed. Kenneth Harrow (Portsmouth: Heinemann, 1996), pp.124-141. The word *sittaat* comes from the Arabic *sitt* or "lady," plural *sittaat*. It is here used to refer both to the songs Somali women sing for the distinguished women of early Islam and to those "first ladies" themselves.
- ² The term *awliyo* (sing., *wali*) - in Arabic *awliya'* - refers to Muslim individuals who during their lifetimes were extraordinarily pious and are believed to have found such favor in the eyes of God that they could (and can) bring about miraculous things.
- ³ The texts transcribed and translated here are from the *sittaat* sessions led by Luula Saalih and recorded by Radio and Television Djibouti in 1988 (RTD).
- ⁴ *Bissinka*. This is the Arabic phrase *bismillahi al-Rahman al-Rahim*, "In the name of God, the Compassionate, the Merciful."
- ⁵ RTD 1
- ⁶ The *sittaat* session led by Luula Saalih, Djibouti, 2 October 1989. This source will be referred to as Interview 1.
- ⁷ Interview 1.
- ⁸ Interview 1.
- ⁹ RTD 1.
- ¹⁰ In the *sittaat* songs the Prophet is given many different names of praise.
- ¹¹ RTD 1.
- ¹² RTD 1.

¹³ This phrase is continuously used in *sittaat* songs. It may relate to the Arabic *maddad*, plural *amdad*, meaning "assistance, support," or to the term *al-maddad*, which, according to Trimmingham, in Somali Sufi brotherhoods refers to the third and highest state of mystical attainment (Trimingham, J. Spencer. 1965. *Islam in Ethiopia* (London: Frank Cass), 238).

¹⁴ *Firdaws* or *firdaus* is the highest level of paradise.

¹⁵ In the south, the names *kur* (literally the name of the wooden bowl used in the ceremonies) and *Abbaay Nabiyeey* are also used (Personal information from Dr. Mohamed Haji Mukhtar). See also Decklé-Francesca. 1996. "Nabi-ammaan: poesia religiosa femminile in un contesto rurale della Somalia." *Africa* (Roma) 1, 1996.

¹⁶ For *mawlid an-nabi*, see *Encyclopaedia of Islam*, 1960-1993. Ed. R. Lewis. V.L. Ménage, Ch. Pellat and J. Schacht. New edition. Vols. I-VII (Leiden: Brill), "mawlid" or "mawlid." In Djibouti, as elsewhere in East Africa, the most common version is that of al-Barzanji. See also Trimmingham, J. Spencer. 1964. *Islam in East Africa* (Oxford: Clarendon Press), 94-95.

¹⁷ *Sittaat* session led by Luula Saalih, Djibouti, 27 October 1989, here referred to as Interview 2.

¹⁸ Interview 2.

¹⁹ *Maano* has the same meaning as *sitt* ("lady").

²⁰ The song texts referred to here as RTD1 were transcribed from such clean recordings, which M. A. Riiraash kindly made available to me.

²¹ *Sittaat* session led by Casha Maxamad (from Hargeisa) in Djibouti, 13 November 1989. This source will be referred to as Interview 3.

²² See, for example, the works already referred to and Andrzejewski, B.W. 1974. "The Veneration of Sufi Saints and Its Impact on the Oral Literature of the Somali People and Their Literature in Arabic." *African Language Studies* 15: 15-53; Lewis, I.M. 1955-1956. "Sufism in Somaliland: A Study in Tribal Islam," *Bulletin of the School of African and Oriental Studies* 17 (3): 581-602; 18 (1): 145-160; and Samatar, Said S. 1992. *In the Shadow of Conquest: Islam in Colonial Northeast Africa*, Trenton: Red Sea Press.

²³ In his description of Sufi brotherhoods, Trimmingham notes: "Women, who are generally old, are often affiliated to an order and participate in its exercises. They are called by the Somali term *abbaya* (sing. *abbaya*) which means "eldest sister" (Trimingham 1965: 238). The term *abbaya* is reminiscent of the term *Abbaay Sitti*, one of the names for *sittaat* ceremonies in the south. For women's participation in devotional practice, compare Trimmingham 1964: 87. Fieldwork, Djibouti, 1989. Also Trimmingham 1964: 86, 95-96.

²⁴ Fieldwork, Djibouti, 1989. Compare Trimmingham 1964: 86, 95-96.

²⁵ For more detail, see Kapteijns, Lidwien, 1994. "Women and the Crisis of Communal Identity: The Cultural Construction of Gender in Somali History." In *The Somali Challenge: From Catastrophe to Renewal*, ed. Ahmed I. Samatar (Boulder: Lynne Rienner), 211-232.

²⁶ Interview 2.


²⁷ Interview 2.

²⁸ Interview 3.

²⁹ Conjectural reading.

³⁰ RTD 1.

³¹ Fieldwork Djibouti, Ramadan (September) 2007. The text "Break the fast, break the fast, break the fast, Muslim people, break the fast," was the refrain of one of the most popular Ramadan songs.



Battling warlords with lyrics

Of Warlords and Wordsmiths

Abdulqawi A. Yusuf

Warlords had infested many parts of Somalia following the government collapse of 1991, causing destruction, mass murder and devastation in their homeland. The Somali people have tried to resist, oppose, fight and condemn in different ways and with different instruments the murderous enterprise of these scoundrels. Literature, poetry and song-writing were amongst the non-violent instruments of resistance used by Somalis against these home-grown oppressors throughout the last sixteen years. But, it was both refreshing and surprising to discover that some of the people who fled Somalia due to the endless atrocities perpetrated by the warlords had now started to use the literary instruments of their newly-acquired foreign culture to join in the battle cry against the warlords. This was particularly true of a young Somali Rapper named K'naan, who grew up in Canada, but who uses some of the lyrics of his hip-hop songs to call upon the warlords to put down their weapons. Using my own peaceful battle instrument which is the essay, I thought I would bring to the attention of the readers of the international press - some of whom might not particularly care about hip-hop or listen to the music of young rappers- the message contained in the lyrics of K'naan which I found both powerful and moving. I therefore wrote the following oped piece which was published in the International Herald Tribune on June 1, 2006. Although violence and mayhem are still being perpetrated in some parts of Somalia by those opposed to the restoration of effective state institutions, it could at least be considered a cause for satisfaction that many of the warlords have now laid down their arms and claim to be laboring for peace and reconciliation.

Amen!

Media coverage of Somalia is usually focused on factional fighting and devastation wrought by warlords and their militias. Not much is said about Somalis' calls on the warlords to end their depredations. A young Somali rapper, K'naan, has stepped into the void to convey to the world his people's yearning for peace. I decided to go see K'naan at a recent performance in Paris with a few Somali and Ethiopian friends despite my preference for other musical genres such as jazz and African folk. As we walked into the concert hall in the middle of the show, K'naan was on stage, intoning "Hobaalayo heedhee," a famous Somali choral refrain that might be roughly translated as "Sing along with me." He was practically draped in the Somali flag, wearing a pale blue tunic bearing the five-cornered white star on his left breast. The place was jammed with young people swaying to the hip-hop music and the powerful lyrics delivered in English interspersed with Somali words and refrains. There was excitement in the air, as the singer furiously pounded on a drum slung over his shoulder, chanting about love and peace. The audience seemed to have caught fire as he began singing his most famous tune, "Soo Bax" (pronounced soo bah), which means "come out." In a direct challenge to Somalia's warlords, in a sort of a peaceful battle cry, he calls on them in Somali: "come out of my country / you've spilled enough blood / you have killed too many people / you have caused a ton of trouble / come out of my country..." He continues in English: "I wanna talk to you directly / Somalia needs no gunmen / Mogadishu used to be a place / where the world would come to see / what to do / where to go / I got to be a refugee / Somalia needs no gunmen..." The 28-year-old K'naan, who now lives in Toronto, is a survivor of the interminable Somali wars. He fled the country with his family in 1991 soon after the outbreak of the civil war. He celebrates his people and their culture in his songs, rich musical mixes marrying hip-hop with Somali rhythms, percussion and

acoustic guitars. Contrary to some hip-hop artists, he does not use his music to brag about guns and violence, but to call for peace in Somalia and to appeal to the warlords and armed thugs to put down their weapons. His moving lyrics are laden with messages aimed at educating the outside world about the plight of his nation.

But his strongest words are reserved for the warlords. In one of the songs on his debut album, "The Dusty Foot Philosopher," he expresses his outrage against their brutalities: "See they rack bodies not grain / chop limbs not trees / spend lives not wealth / seek vengeance not truth / moist pain not plants / sharpen feuds not minds / defend kinship not honor." Back in Somalia, the warlords do not seem to be very concerned, at least for now, about K'naan's growing appeal; they are too busy fighting among themselves for turf in Mogadishu. Among them are the newly-minted "warlords of water" who take control of water wells in the drought-stricken southern regions of the country, condemning hundreds of thousands of people to death from thirst and starvation.

Will such scoundrels ever leave the country or heed the plea for peace of a hip-hop artist singing to European and North American youth audiences? The slim, soft-spoken rapper, whom we met at the end of the show, appeared confident and self-assured about the noise he is generating with his fierce lyrics. "When I recorded "Soo Bax" in the studio, I imagined myself being in front of gunmen and communicating directly with them," he explained. Although the warlords may not be listening to K'naan's message of peace now, the singer may yet connect with the wider public in Somalia, including the gun-toting child soldiers who serve in the militias. Moreover, as growing audiences in Africa, Europe and North America take notice of his lyrics, the endless atrocities being perpetrated by the warlords will become better known to the world. "Soo Bax" is now featured on the soundtrack of the best-selling soccer video game – FIFA 2006. It might not be too long before the powerful rallying cry for peace of this hip-hop artist makes a deep dent into the armour of the warlords.



Halgankii Gobannimo-doonka Jabuuti iyo Kaalintii Halabuurka

Qore: Aw-Jaamac Cumar Ciise; Kaaliye: Burhaan Axmed Daahir

Dagaalkii Labaad ee Dunida ka dhacay wax badan ayuu siyaasaddii caalamka ka beddelay. Waddamadii reer Yurub gumaysiga ku haysteen waxay dareemeen saxansaxo xornimo. Horraantii 1950^{nadii} geyigii loo yiqiin Xeebta Soomaaliyeed ee Faransiisku gumaysto (Jabuutida maanta) waxaa ka bilowday dhaqdhaqaaq gobannimadoon ah. Waxaa majaraha u hayay koox dhallinyaro reer Jabuuti ah oo uu hoggaamiye u ahaa halyeygii Maxamuud Xarbi. Waxaa la asaasay xisbi siyaasi ah oo lagu magacaabi jirey Dhaqdhaqaaqa Dadka, afka Faransiikana la odhan jirey Mouvement Populaire (Boobileer ayuu ku caan baxay). Xisbigaas oo ujeeddadiisu ahayd wacyigalin iyo baraarujinta shacbiga si ay uga gilgishaan dhibaataadii iyo kadeedkii gumaysiga Faransiisku ku hayay.

Xisbigu dhaqaaqiisii taageero aad u ballaadhan ayuu durba ka helay dadwaynaha reer Jabuuti ee uu dareenkooda ka tarjumayay. Kacdoon ayaa cirka isku shareeray. Halgankii xilligaas bilawday wuxuu socdey 20 sano oo dhiman sannado yar,

ilaa ay dadka reer Jabuuti hanteen gobannimadooda 27^{kii} Juun 1977^{kii}.

Halgankaas dheer oo ay u geeriyooddeen geesiyaal badan oo uu hormuud u yahay halgamaagii weynaa ee Maxamuud Xarbi Faarax, qaar badanna u dhaawacmeen, xabsi u galeen, jidh-dil

iyo cadaab adduun u soo mareen. Muraayadda ugu iftiinka badan ee maanta laga daawan karo taariikhdaas qaaliga ah waa suugaanta iyo hala-buurkii ay dhacdooyinkaas si joogta ah ugu diiwaan galinayeen halabuurkii waddaniyiinta ahaa ee maalin kasta ka tarjumayay wixii dhacayey iyo dareenkii shicibka.

Dhawr iyo tobanka maanso ee ku daabacan baalasha hore ee wargeyskan waa tusaale laga soo qaatay badweyntaas sugaanta waddaniga ah. Waa diiwaan run-sheeg ah oo si cad noo hor dhigaya marxaladihii kala duwanaa ee taariikhdaa muhiimka ah. Sidaa awgeed iyaga ayaa ugu haboon inaan ka daalacanno taariikhda xilliyadii kala duwanaa ee halganka xornimodoonka Jabuuti.

Haddii aynno ka bilawno xilligii kowaad iyo kontonaadkii qarnigii tegay bal u fiirso sida la yaabka leh ee ay noogu sawirayso maansada la magac baxday *Calan-Xiis* ee uu curiyey Xaashi Cabdulaahi Orrax, marka uu leeyahay:

*Xisbigii Boobuleer, Xarakadii la abuuray
Wiilashii xilka qaaday, Xiisadday na gasheen
Shicibkii wada xaytee, Qof xerooda la waayay
Gidaarradaannu xardhaynay, Dariiqyadaannu xidhaynay
Xarqadahaannu lulaynnay, Xuruuftii ku qornayd
Xornimaannu rabnaa, Xandulow naga guur**

Isla sawirkaas waxa bixinaysa maansadan uu tiryey abwaan Jaamac Muuse Miicaad ee uu si gaar ah ugu tilmaamayo taageeradii dadku u hayey xisbigii gobonnimodoonka ahaa ee berigaa rabitaanka shacabka hoggaaminayey iyo sidii looga soo horjeeday Isticmaarka:

*Boobileer ninka diida,
Daacad baanu ahaynoo
Dulligii Faransiiskiyo,
Digool buu la hayaa
Inse doonni la saari, ka tegaayo dalkeenna
Ninna diir kama saarree,
Dadaal baan ku jirraaye
Daayimow na gargaar*

Halgankii gobonnimodoonka oo halkiisii ka sii socda ayaa sannadkii 1958^{kii} Jeneraal De Gaulle madaxweyne ka noqday dalka Faransiiska. Wuxuu soo saaray xeer loogu magac daray De Gaulle,

xeerkaasi oo lagu eegaayay guud ahaan shucuubta Faransiisku gumaysto afkaartooda siyaasadeed. Xeerkaasi wuxuu saamaynayay dhammaan dadyowgii ku hoos jirey isticmaarkii Faransiiska. Wuxuu dhigayey shacbigu in ay labo arrimood kala doortaan: in ay doortaan ka sii mid ahaanshaha is-bahaysiga gumaysiga ama in ay madaxbannaani iyo xornimo buuxda doortaan. Haddaba De Gaulle isagoo sahaminaya afkaarta dadka la gumeysto ayuu maray dalalkii Afrika ee ku hoos jirey isticmaarka Faransiiska. In kasta oo ay jireen dad gumaysiga u adeegaayay, haddana shacabka reer Jabuuti waagaas gumeysiga waa diideen oo xornimay dalbadeen.

Marxaladdii taa xigtay oo ku beegan horraantii lixdannada ilaa bilowgii toddobaatannada, waxay ahayd xilliyadii ururradii gobonnimodoonku ay aadka u koreen isla markaana dhaqdhaqaaqoodu gilgilay xukuumaddii isticmaarka ee dalka ka talinaysey. Haddaba markii nidaamkii gumaysigu arkay ololihii iyo xammaasaddii gobonnimodoonka ee dadka reer Jabuuti oo meel sare maraysa maamulkii isticmaarku wuxuu bilaabay habab uu ku cabburinaayo shacabka, kagana hortagaayo dhaqdhaqaaqyada gobonnimodoonka ah. Ciidamadii ammaanka ee gumaysigu waxay dadka kula kaceen falal dil, xabsi, masaafurin iyo cadaadisba leh. Si ballaaran ayay dhacdooyinkaana maanso-yahannadu uga taariikheeyeen. Mar kale Xaashi Cabdillaahi Orrax oo arrimahaa dhacay sawir ka bixinaya xasuus ahaanna u tilmaamaya waa kii maansadiisa Calan-Xiis ku lahaa:

*Ummaddii Xaddi beeshee,
Aawadaa la xasuuqay
Caawa oon xusi weyno,
Xeerba mayna ahayne
Raggaygii la xijaabay,
Bal aan xuubka ka qaado
Afrikoon xor ahayn,
Kii Digool ku xanaaqee
Yidhi Xeebta ka guur,
Ilaahay ha xurmeeyo
Jannadii ha xaluushee,
Xarbi maannu Illaawin*

25^{kii} bishii Agoosto 1966^{kii} ayaa Jeneraal De Gaulle booqasho ku yimi Jabuuti. Maamulkii

Jabuuti wuxu soo dhaweynta madaxweynaha u agaasimey si heer sare ah. Waxaa xogtii lagu bixiyay dalku waa deggan yahay, dadkuna waa ku soo dhaweynayaan! (isma oga agoon iyo ninkii aabbaheed dilaye—*Ismaaciil Mire*). Shacbiga reer Jabuuti dhammaan waa u aamusay. Waxaa lagu heshiiyay qorshe qarsoon iyo xeelad loo midaysnaa, koox gumaysiga la jirtey oo aan sirta qarsoon ka war hayn mooyee. De Gaulle wuxuu la kulmay wax aanu fileyn. Dadku waxay jeebabka ku soo qarsadeen maryo ay ku qoran yihiin “De Gaulle ha dhaco. Madaxbannaani baannu doonaynaa”! Dhagax-tuur, qaylo, muddaaharaad iyo bannaan-bax kii ugu lixaad weynaa baa maalintaa dhacay. De Gaulle taa wuxuu u qaatay shirqool ay u maleegeen kuwii maamulka madaxda ka ahaa. Muddo daqiiqado ah ayaa qaabilaaddii isu beddeshey dhiig iyo meyd daadsan. Dil, xabsi, masaafuris iyo dhibaato aan loo meel-dayin ayaa shacbigii lagula kacay. Wixii maalintaa dhacay wax qoraalkan kooban lagu wada xusi karo ma ahayn, balse waxa maanso gabay-jacbur ah oo maadi ku ladhan tahay kudiiwaangeliyay Allaha u naxariistee abwaankii Ibraahim Sheekh Suleymaan (Gadhle), oo sidan innoo soo hordhigay dhacdooyinkaa taariikheed.

*Ninkii naga maqnaayow adaan kuu warramayaaye
Dharaartii labaad iyo Jimcihii weerarraa dhacaye
Dhallinyariyo waayeel annagoo wada qamaamayna
Oo quraarado cammuud lagu shubay iyo dhagax la yaacayna
Halkii lagu ballamay baannu nimid duhur hortiisiye
Iyagoo diyaaroo dhammaan wada cadhoonaaya
Ayuun bay na duubeen sidii waxaro jiilaale
Xerya iyo waxay nagu gureen meel cidhiidhiyahe**

Dawladdii Faransiisku kolkii ay darentay sida gobonnimodoonka shacbigu u sii ballaadhanayo waxay ku dhawaaqday in bisha Maarso 1967^{ka} afti laga qabto Jabuuti oo dadka la weydiyo waxa ay doonayaan. Aftidii 19^{kii} Maaris loo ballansanaa markay soo dhowaatay xukuumaddii isticmaarka waxaa u caddaatay aftidu in aanay u dhici doonin sida ay doonayso, dadkuna codkooda ku dhiiban doonaan “**NO**” (maya) lana dalban doono xornimo iyo madaxbannaani siyaasadeed. Maamulkii isticmaarku kolkaa wuxuu-isu diyaariyay inuu aftida

ku shubto ama boobo oo natiijada soo baxda lagu been sheego, sidaana lagaga hortago rabitaanka shacabka. Kolkii la soo gabagabeeyay aftidii dhacday 19^{kii} Maarso 1967^{kii}, xukumaddii isticmaarka marku waxa ay ku dhawaaqday in shacabku “Oui” (Haa) ku codeeyay, taas oo macnaheedu yahay in la doortay in Jabuuti ka sii mid ahaato midowgii Faransiiska.

Natiijadaas been-abuurka ahayd ee ka soo yeertay Faransiiska waxaa aad uga cadhooday dadweynihii reer Jabuuti iyo dhammaanba ummadihii iyo dawladihii kale ee doonayay in si xaq ah wax u dhacaan, kuwaas oo ay hormuud u ahayd Soomaaliya, Jabuutina xaqeeda iyo xornimada shacabkeedu doonayaan ay hesho. Afdubkaa aftida ee gumaysigu ku kacay waxaa ka dhashay kacdoon dadweyne, waxaana xigey bannaan-baxyo iyo rabshado. Taana waxaa gacan bir ah uga jawaabay maamulkii isticmaarka ee Jabuuti ka jirey. Boqollaal qof ayaa mar kale xabsi lagu guray, boqollaal kale xeryo silig lagu ooday inta loo waabay ayaa laga buuxshey oo milicdana la tubay, boqollaal kalena baabuur inta laga buuxshey ayaa xuduudda laga tallaabiyaay oo la masaafuriyay.

Saciida Cilmi Rooble oo ka mid ahayd shacbigii siligga lagu ooday berigaa ayaa buraanbur ay ku hal-qabsatay “Disneef” (erey Faransiis ah oo la macne ah 19, oo ay ula jeeddo 19^{kii} Maarso, 1967^{kii}) kaga taariikhaynaysa berigaa wixii dhacay iyo sidii loo boobay natiijadii ka soo baxday aftidaas.

*Haddaan dib eego taariikhdiis Disneef
Dagaal waxan soo marriyo dab iyo halasa kulul
Dadow ma illaawin beentaan la sogor dahayn
Dadyow ma illaawin “Wii!” baa la doortay-dii*

Allaha u naxariistee Cismaan Aadan Xuseen, oo ku magac dheeraa Cimaan-Askari, oo ka mid ahaa halabuuradii Soomaaliyeed ee maansadooda sida xammaasadda leh isugu garab taagey halgankii Jabuuti, waa kii isna mariyay geeraarkan guubaa-bada iyo niyad-dhiska ah markii ay ka dagi weyday natiijadii aftida ee gumeysigu ku dhawaaqay, taas oo filan-waa ku noqotay.

*Isticmaar ha xanuujoo,
Xinjirtooda ha daadsho*

*Xaasidiini ha joogto,
Xisbi hayska Badnaado
Ciidan xoog leh ha keeno,
Xarakaadka ha diido
Dadka oon xumo geysan
Xabaal haysaga tuuro
Xeebta Soomaali baa loo
Way xoroobi Jabuuti
Xigmad daranaa gumaysigu,
Muu Gasaa'ir Xasuusto*

Marxaladdii saddexaad waa sannadihii toddobaatannada iyo xilligii ay soo dhawaatay hanashada xoriyadda Jabuuti. Inkasta oo dhibaataadii gumaysigu shacabka ku hayay ay weli sii socotay haddana marxaladdani waxay ahayd mid ka duwan kuwii hore, waayo waxa sii adkaaday midnimadii shacabka, waxa intii hore isaga soo dhawaaday xisbiyadii siyaasadeed. Dawladda saaxiibbo ahaa iyo caalamka dibadduba waxay xukumaddii Faransiiska ku cadaadiyeen in shacabka Jabuuti xaqooda xornimo loo oggolaado. Fadhiyadii golaha loo dhan yahay ee Qaramada Midoobay ayaa lagu soo daray doodaha la xidhiidha xornimada Jabuuti. Arrimahaasina waxay aad u sii dhiirrigeliyeen xisbiyadii halganka ku jiray oo waqtigaa aad isugu soo dhawaaday iyo dadweynihii reer Jabuutiba.

Ugu dambayntii shacabka Jabuuti waxay ku guulaysteen in loo oggolaado gobannimo buuxda oo ay gumaysiga ka hoosbaxaan. Saciid Cilmi Rooble ayaa dhacdooyinkaas wax kaga kustay buraanburka ay u bixisay “Miiska Goobaaban” (fadhiga wareegsan ama goobaaban ee ku yaal Xarunta Qaramada Midoobay inta badanna ay ka dhacaan kulammada Golaha Ammaanka iyo kan loo dhanyahay).

*Madaxdeennii guntatay ee geyiga u kacay
Gees walba u dhoofa iyo golaha loo dhan yahay
Gullahaan calankii gacanta siinayaa
Sow ma gawricin gumaysi iyo ninkii la jirey
Gaabsan mahayaane gumaadaha miyey jareen
Miiskii goobaabnaa baa gorodda la isku daray*

Markii guushii muddada dheer loo halgamayay iyo madaxbannaanida la hantay 27^{kii} Juun

1977^{kii}, Jabuuti yar iyo weyn mid dalka jooga iyo mid dibad ku maqnaaba waxaa loo dabbaaldegey guusha weyn ee taariikhiga ah. Halabuurka iyo suugaanleyda ayaana farxaddaa iyo dabbaaldeggaa kaalinta ugu weyn ka ciyaaray dareenka shacbiga ee maalintaasna ku cabbiray maansooyin iyo suugaan noocyo badan. Aan tusaale u soo qaadanno tuducyo ka mid ah dhawr maanso oo kuwa tirsigan lagu soo qaatay ka mid ah:

*Anigoo gubtaayoonayoo, gocasho ooyaaya
Anigoo gaddaan maagganaa, gaadhi kari waayay
Ayuun buu gu'roob noo curtoo, geelu noo dhalaye
Waa galabba cayneey dunidu, sacab la gaw leeyay*
(Aamina Aw-Cali)*

*Wuxuu jiiibka nagu meeriyuu, cago jugleeyaaba
Jaanleef markaan ula baxnay ee, jaqaska loo gooyay
Ka jiciiray hawl yari ninkii, dhiigga jiiqsadaye
Jilka urursay jiidduu ka yimid, jaahilkii qabaye
Ma ku joojay calankii bartii, kiisa laga jiidey*
(Xasan Cilmi)*

*Calankaa calfanaayaan
Burdadaa ku mudnay
Barquu roob nagu hoorayoo
Biyahaa lagu maydhayoo
Bismillaahi Raxmaane
Kolkaa baan bogsannay*

(Jaamac Muuse Miicaad)*

La-dareen-wadaaggii Soomaaliya

1960^{kii} kolkii Soomaaliya xornimadeeda qaadatay dastuurkii qaran ee berigaa la dejiyay waxaa lagu daray qodob qeexaya in Soomaalida gumaysiga ku hoos jirta laga taageero xagga siyaasadda iyo fagaarayaasha caalamiga ahba si loogu oggolaado in ay aayahooda ka tashadaan.

1969^{kii} markii xukunka dalka Soomaaliya ciidammada qalabka sidaa la wareegeen, axdigii ay degsadeen qaybtiisa siyaasadda dibadda; qodobka saddexaad wuxuu qorayey: in lagu dedaalo sidii dadka iyo dhulalka Soomaalidu deggan tahay loo xorayn lahaa gaar ahaan Jabuuti oo halgan firfircoon ku jirtey. Dawlad iyo shacabba waxa la guddoonsaday in reer Jabuuti la garab joogsado.

Maalintey Jamhuuriyadda Jabuuti gobonni-madeeda hanatay dalkii Soomaaliya dad iyo dowladba waxay u ahayd maalin weyn oo taariikhda gashay. Waxay arkeen dedaalkii ay u galeen xornimodoonka walaalahood oo midho dhalay iyo guushii ay muddada badan sugayeen oo timid. 27^{ka} bisha Juun oo ah maalintii Jabuuti xorowday, waxa ay dawladdii Soomaaliyeed u aqoonsatay maalin qaran. Dareenkaa iyo farxadda dhanka Soomaliya maalintaa ka jirtayna halabuurtii suugaanta ku cabbiray waxa kamid ahaa Allaha u naxariistee gabayaagii Cali Cilmi Afyare oo sidan u dhigay:

*Saddexdii gumaysigu u dhigay, soohdintiyo beenta
Summadda iyo goobtii ku tiil, siliggii loo ooday
Seetadii mid baa goysay iyo, suukii loo xiraye
Nin saaburay mar baa Eebbahay, saray u qaadaaye
Subuca iyo Yaasiinka iyo, suuradaha diinta
Seef iyo warmay kaga direen, seylarkii Yurube
Sinta xeebta iyo buurihii, quruxda loo saantay
Siraad iyo iftiin baa ka baxay, Obokh salkeediiye.**

Gob baa Abaal Gudda

Markii Jamhuuriyadda Jabuuti gobonni-madeeda qaadatay 1977^{kii}, waxay heegan u ahayd in ay Soomaaliya u abaal guddo. Lama wada xusi karo arrimaha wax-ku-oolka ah ee Jabuuti dadka Soomaaliyeed u tartay, hase ahaate aan xusno dhacdooyinka lama illaawaanka ah:

- 1) 1986^{kii}, madaxweynihii Jamhuuriyadda Jabuuti, Xaaji Xasan Guuleed (Naxariistii janno Allaha siiyee) wuxuu dhexdhexaadin ka galay colaaddii baaxadda weynayd ee ka dhex aloosnayd Soomaaliya iyo Itoobiya, isagoo labadii Madaxweyne; Maxamed Siyaad Barre iyo Mingistu Xayle Maryam Jabuuti isugu keenay (Shirkii IGAD). Si ay uga wada hadlaan dhibaataada iyo colaadda labada dal ka dhex taagan. Taasna guul, heshiis, is-afgarad iyo nabad baa laga gaaray.
- 2) 1991^{kii}, markii dowladdii dhexe ee Soomaaliya burburtay, Jahuuriyadda Jabuuti waxay ahayd dowladdii ugu horreysay oo u gurmata. Jabuuti waxay qaadday tallaabooyin waxtar leh. 15-21^{kii} Julaay 1991^{kii} Xaaji Xasan Guuleed wuxuu magaalada Jabuuti si rasmi ah uga furay shirwey-

nihii dib-u-heshiisiinta shacbiga Soomaaliyeed oo ay ka soo qaybgaleen odayaal nabaddoonka Soomaaliyeed ka mid ah iyo lix jabhadood. Hadalladii uu Xaaji Xasan Guuleed furitaankii shirkaasi ka sheegay waxa ka mid ahaa, "Dhiig baa noo kiin galay oo dhaxal baan wadaagnaa. Wixii idin dhibaayaa waa na dhibaayaan".

3) 1999^{kii} Ismaaciil Cumar Geelle madaxweynaha Jamhuuriyadda Jabuuti loo doortay tallaabadii ugu horreysay oo uu qaaday waxay ahayd siduu arrimaha murugsan ee Soomaaliya wax uga qaban lahaa. Wuxuu qaban qaabiyay shir dib-u-heshiisiineed oo loogu magac daray buurta Carta. Wuxuu isugu keenay ergooyin Soomaaliyeed oo ka badan afar kun. wuxuu ahaa shirka keliya ee Soomaali badhax li'i ka qaybgasho oo aan shisheeye lug ku lahayn.

Dadaalkaa Jabuuti samaysay, hiilka iyo gogosha nabadeed ee ay Soomaalida u fidisay halgankii gobonimada si la mid ah ayaa halabuurka iyo suugaan-yahanka ummaddu kaalintooda uga qaateen suugaan aan la koobi karinna waa ka sameeyeen. Aan tusaale u soo qaato beydad kooban oo ka mid ah labada heesood ee soo socda. Tan hore waa hees abwaan Cali Diiriye (Cali-gaab) ugu talo galay shirkii dib-u-heshiisiinta Soomaalida ee Jabuuti ka dhacay 1991^{kii}:

*Soomaaliyeey maqal²
Waa talo sokeeyee
Soomaaliyeey maqal
Geesigu siduu yidhi
Soomaaliyeey maqal
Sannadahan intii dhimatayee
Saantooda lagu aasay siigada
Soomaali ugu filan*

Heesta labaadna waxa ku luuqeeya fannaa-niinta kooxda Deegaan waxayna ka mid ahayd heesihii caan baxay ee lagu soo bandhigay madashii (teendhadii) uu ka socday Shirkii dib-u-heshiisiinta Soomaliyeed ee Carta.

*Caano daatay dabadood la qabay
Soomaaliyeey dib-u-dhiskaagiyo
Midnimaan kula doonayaa*

Haddaan soo gunaanadno, taariikhdaa aan ka soo sheekaynnay waxaan ka dhex arkaynnaa afar arrimood:

1. Xornimada Jamhuuriyadda Jabuuti ee maanta soddon jirsatay in aanay sahal ku iman balse halgan adag oo geesinnimo ah ay dadka reer Jabuuti u soo galeen.
2. Kaalintii lama illaawaanka ahayd ee halbuurku ka soo qaatay halganka.
3. La dareen-wadaaggii Soomaaliya ama Soomaali oo dhammi gacantii ay ka geysatay halgankii madaxbannaanida Jabuuti.
4. Jabuuti oo sidii oo kale yeeshay una abaalgudday walaalihii halgankooda gacanta ku siiyey.

Haddaba faalladeenna aan ku soo gunaanadno tix uu lahaa gabayaagii waddaniga ahaa ee reer Masar, Abul Qaasim Ashaabi.


*Hadduu shacab doono nolol wacan
Nasiibku wuu caawiyaa
Habeennadu waa socdaan,
Dabarkuna waa furtaa (Tarjamad)*

Tixraac:

* *Gabeyga oo dhan waxa lagu daabacay qaybta maansooyinka*

¹Wii; waa kalmad Af- faransiis ah (oui) oo macnaheedu yahay (haa).

²Heestani waxay astaan u hayd barnaamijka Soomaaliyeey Maqal ee ka bixi jirey qaybta satalaytka ee taleefishanka Jabuuti barnaamijkaasi oo la bilaabay kolkii la furay shirkii dib-u-heshiisiinta Soomaalida ee Carta lagu qabtay sannadkii 2000.



Isku Hiillinta Jabuutida Xorta ah iyo Dhaqanka Ummadda

Maxamed Cabdillaahi Riiraash

Jabuuti, maanta waa xarunta dhabta ah ee dhaqanka iyo afafka Soomaaliga iyo Cafariga. Taasina, dhinaca Soomaalida waxay ka dhalatay markii Soomaaliya burburtay ee meelihii lafdhabarta u ahaa aqoonta, sida Jaamacaddii, Akadeemiyaddii Dhaqanka, Gurigii walxaha taariikhiga ah lagu ururinayay (Matxafkii Qaranka), labadii Raadiow ee Hargeysa iyo Muqdisho iyo weliba Golihii Murtida iyo Madadaaladuba ay isla burbureen. Haddaba qoraalkani wuxuu isku dayi doonaa inuu wax ka iftiimiyo kaalinta ay Jabuuti ka qaadatay badbaadinta dhaxalkaa ururintiisa, dhawristiisa iyo daryeelkiisa.

Sannadkii 1977-kii bisii Juun 27keedii ayay Jabuuti dal xor ah noqotay ka dib halgan dheer oo naf iyo maalba loo huray. Abwaannada iyo fannaaniinta reer Jabuuti iyo kuwa Soomaaliyeedba qayb libaax bay ka qaateen halgankaa. Badhkood waa lagu xidh-xidhay, badhna waa lagu masaa-furiyay. Iyaga ayaa ahaa dareenka nool ee ummadda ee marna dadka kiciya marna fadhiisiya.¹Haddiise dagaalka gobannimada loogu jiray lagu guu-

laystay waxan odhan karnaa mid kaa ka weyn ayaa bilaabmay; waana dagaalka gobonnimada laf ahaanteed lagu joogtaynayo oo ah horumarka. Haddii suugaanta iyo fanka loo adeegsaday la-dagaal-lankii gumaysiga haddana waa in loo adeegsadaa halgankaa cusub ee lagu badhitaageerayo dhismaha dalka siyaasad iyo dhaqaale ahaanba².

Su'aashu haddaba waa halkee laga bilaabaa, sideese loo bilaabaa? Jawaabtu waxay timid sannadihii 1982-kii iyo 1983-kii markaas oo munaasabadihii sannad guurada gobannimada ee 5^{aad} iyo 6^{aad} la qabtay kulammo dhaqameedyo (La Forum Culturel) ay abaabuleen Guddiga Dhaqanka ee Xisbiga RPP. Guddigaas isaga ah Mudane Ismaacill Cumar Geelle, Madaxweynaha Jabuuti ee hadda ayaa guddoomiye u ahaa, rag kale oo dhallinyaro ahaana way kala qayb galeen. Dhab ahaan tallaabadaasi mid taariikhi ah oo milaygii ku habboonaa la qaaday bay noqotay. Indhii dadka reer Jabuuti ayay furtay waxayna arkeen baaxadda iyo hodonnimada hiddaha iyo dhaqanka Jabuuti ee soo jireenka ah. Ka soo qaybgalka ayaa aad u ballaadhnaa. Dadku magaalo madaxda oo Jabuuti ah iyo degmooyinka kaleba si xoog leh ayay uga yimaaddeen. Guud ahaan dadka ka soo qaybgalay ee ka qaybqaatay ciyaaraha hiddaha iyo dhaqanku 528 qof bay ahaayeen; heesaagu 158, gabayaaguna 173. Intaa waxaa dheeraa 9 kooxood oo dugsiyada dalka oo dhan

ka socday oo iyaguna ciyaaraha hiddaha iyo dhaqanka ka qaybqaa-danayay. Inkasta oo tirada dadka aan soo sheegnay badankoodu ka yimaaddeen magaalo madaxda haddana afartii gobol oo ka baxsanaa dadka ka yimi 229 qof bay ahaayeen³. Labadaa kulan-dhaqan, sidii aan soo sheegnay, dadka reer Jabuuti indhahoodii ayay wax jiray aanse la ogeyn daboolka uga qaadeen, gaar ahaan ciyaaraha hiddaha iyo dhaqanka (folklore). Xagga Soomaalida ciyaaraha Sayliciga oo aad u faro badan, habdhac, jaan iyo jibba kala duwan ayaa la soo bandhigay. Badhkood rag iyo dumarba way ka dhexeeyaan. Ciyaarta Horraha la yidhaahdo se, raggay gaar u tahay qaarna dumarkaa gaar iskaga leh. Kuwii reer guuraaga iyagana si ballaadhan ayaa meesha looga muujiyay. Ciyaaraha Sayliciga ayaa si wanaagsan u qeexaya taariikhdiis dheerayd ee ay ilbaxnimadii Saylac soo martay, isbaddeladii ku soo dhacay ummadaha ku kulmay meesha iyo afalkooda. Waxa kale oo si wanaagsan u werinayaan ganacsigii ay la lahaayeen adduunyada inta kale; Bari iyo Galbeedba. Cafartu dhankooga ciyaaro aad u qurux badan ayay soo bandhigeen gaar ahaan kuwa reer Tadjorra iyo reer Obokh. Ciyaaraha badhkood rag iyo dumarba waa u dhex, badh raggay u gaar yihiin badhna dumarka. Kuwa ragga u gaar ah waxa ka mid ah ciyaarta loo yaqaanno "Horra". Waa tii aan ka soo hadalnay in ciyaar iyana Horra la yidhaahdo ay reer Saylac leeyihiin oo ragga u gaar ah. Taasi waxay ku tusaysaa reer Saylac iyo reer Tadjorra in wax badan oo dhaqammada la xidhiidha ay kala qaateen. Taasina waa arrimaha muhimka ah ee ay labadaa kulan-dhaqameed daaha ka rogeen. Dadka reer Jabuuti yaa is dhex galay; qoloba qolada kale ayay quruxdoodii u soo bandhigeen. Ciyaaraha ay wadaagaan ayaa halkaa ka soo baxay, in wax la wada leeyahayna waa caddaatay.

Mar haddii la ogaaday baaxadda wax yaabihii la soo bandhigay, quruxda iyo qaayaha dheeraadka ah ee ay leeyihiin, lagama maarmaan bay noqotay in la joogteeyo. Doorarka qayb ahaan waxa qaatay Golaha Raadiyaha iyo Telefishanka Jabuuti (RTD). Inkasta oo jireen barnaamijyo xagga Raadiyowga ah oo ku saabsanaa joogtaynta

iyo dib u noolaynta dhaqanka iyo suugaanta haddana markii maqal iyo muuqaal loo adeegsaday ayay midho dhal noqdeen. Barnaamijka caanka noqday ee "Dhaqan iyo Suugaan" waxa lagu soo qaaday laguna kala qeexay ciyaaraha kala duwanaa ee labadaa kulan-dhaqameed lagu soo bandhigay. Waxa kale oo si wanaagsan looga hadlay xidhiidhka ay ciyaarahaasi la leeyihiin taariikhda gobolka iyo dunida inteeda kale iyo weliba sida ciyaaraha reer-guuraagu markii ay Saylac soo galaanba isku dhalan rogayeen. Barnaamijka Dhaqan iyo Suugaan intaa oo keliya kuma koobnayne waxa kale oo lagu qaadaa dhigay Suugaanta iyo Geela, Gammaanka Ugaadha, Shimbiraha, Dugaagga, Bahalaha hoost iyo Dhirta. Taa ujeeddada laga lahaa ayaa ahayd in la eego sida dadka afkooda, suugaantooda iyo noloshoodaba ay u saameeyaan deegaanka iyo waxyaabaha nolol-maalmeedkooga lafdhabarka u ah. Midda kale waqtiga barnaamijka la qabtay dad badan oo rag iyo dumarba leh oo aan maanta innala joogin ayaa noolaa oo aqoontii ay hayeen halkaa lagaga reebay. Barnaamijka Dhaqan iyo Suugaan ayaa taariikhda ku galay inuu ahaa kii ugu horreeyay ee maqal iyo muuqaal loo adeegsaday suugaanta Soomaalida. Barnaamijka isaga ahi wuxuu si weyn wax uga baddalay fikirkii ay dadka reer Jabuuti ka haysteen dhaqankooda iyo suugaantooda. Taasina waxay dhabbada u sii xaadhay in dadku oggolaan karaan lana socon karaan barnaamijyo suugaaneed oo kaa kasi qoto dheer.

Sannadkii 1991^{kii} abwaanka weyn, Maxamed Ibraahim Warsame (Hadraawi) ayaa booqasho ku yimid Jabuuti. Barnaamijyo soo saarayaasha RTD-da fursad baa halkaa uga muuqatay ah in la abaabulo barnaamijka kale ee caanka noqday "Sirta Ereyga", halkaa oo ay suugaanley caan ahi kala qayb-qaateen Hadraawi. Waxay saameyn weyn ku yeesheen dhallinyaradii reer Jabuuti oo markii dambe iyaga qudhoodu rag iyo dumar abwaanno ahi ka soo baxeen. Taasi mar kale waxay fakir labaad ku dhalisay barnaamijyo soo saarayaasha RTD-da oo abaabulay barnaamijka "Tix-Maal" oo ilaa hadda socda bilaabmayna sannadkii 1999-kii. Dhallinyarada ayaa loogu talo galay barnaamijka

waxa se si wax-ku-ool ah uga qaybqaatay ab-waanno da'roontii hore ee maansada Soomaaliga ah. Barnaamijyadaa saddexda heer ahaa oo maqal iyo muuqaalba ku kaydsan waxay ku dhawran yihiin qolka keydka RTD-da. Kuwaas oo keliya ma ahee waxa iyaguna la kaydsan riwaayado, googoosyo iyo suugaan kaleba oo laga qabtay dad reer Jabuuti iyo reer Soomaaliyaba ah, waana dhaxal u dhawran dadka Af-Soomaaliga adeegsada oo dhan.

Ka sokow kulan dhaqameedyadaa aan soo sheegnay iyo barnaamijyadaa iyaga toos ugu lug lahaa waxa halkan Jabuuti lagu qabtay kulammo aad muhim ugu ah afafka dhawristooda, kobcintooda iyo daryeelkooga oo uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Jabuuti, Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle uu si toos ah isaga xilsaaray. Sannadkii 2002-dii ayaa Jabuuti lagu qabtay shir loogu talo galay in erey bixinta warfaafinta Af-Soomaaliga lagu mideeyo, kaasi ooy ka soo qayb galeen idaacadaha af-Soomaaliga ku hadla ee Geeska Afrika iyo Idaacadda BBC-da qaybta Af-Soomaaliga ereyadii la isla qaatayna qoraal baa ka soo baxay kuwaasi oo maanta si ballaadhan weriyayaashu u adeegsadaan.

Xagaagii 2003 waxaa isna Jabuuti ka qabsoomay barnaamij nolol weyn galiyey geeddisocodka nolol-dhaqameedda Soomaalida. Wuxuu ahaa barnaamij lagu magacaabay "Toddobaadkii Halabuurka Soomaaliyeed". Wuxuu ahaa kulaweyne socdey laga bilaabo 22 Juun ilaa 2dii Luulyo 2003. Waxaa qabanqaabiyey Naadiga PEN ee Qalinleyda iyo Halabuurka Soomaaliyeed oo kaashanayey Machadka Afafka ee Jabuuti. Wuxuu ahaa mahrajaan weyn oo soconayey muddo 11 cisho ah kana koobnaa qaybo kala duwan oo ay ka mid ahaayeen bandhig fan iyo suugaaneed, bandhig buugag, dood-cilmiyeed dhawr cisho socotey iyo Shirweynihii 2^{aad} ee Naadiga PEN ee Qalinleyda iyo Halabuurka Soomaaliyeed kaas oo isla sannadkaaba xaruntiisii magaalada London si rasmi ah looga soo raray loona soo wareejiyay Jabuuti. Waqtigaas laga bilaabo, Naadiga PEN oo uu dhiirrigalin iyo taakulayn u fidiyey Madaxweynaha Jamhuuriyadda Jabuuti, Mudane Ismaaciil Cumar Geelle, wuxuu Jamhuuriyadda

Jabuuti ka fuliyey hawlgallo dhaxalgal ah oo wax weyn ku kordhiyey nolol-dhaqaneedda dalka, kuwaas oo ay ka mid ahaayeen barnaamijyo ku wajahan daryeelka afka hooyo iyo suugaantiisa. Laga soo bilaabo sannadkii 2005, waddanka Jabuuti waxaa ka socdey barnaamij-suugaaneedyo Naadiga PEN halkudheg uga dhigay "Hirgalinta Halabuur ku qoran afka hooyo. Waxaa ka mid ah aqoonwadaagyo joogtaysan oo bishiiba mar lagu qabto meel fagaare ah telefshinka qarankana laga faafiyo.

Bishii Febraayo 2006 waxaa la qaaday tallaabo waxtar weyn u yeelatay ku baraarugga qiimaha afka hooyo iyo baahida loo qabo daryeelkiisa. Waxaa lagu tallaabsaday hawlgal qaran oo uu soojeedinteeda lahaa Naadiga PEN. 21 ilaa 27^{kii} Febraayo 2006 Waxaa la abaabulay toddobaad qaran oo lagu magacaabay Toddobaadka Afka Hooyo. Wuxuu ahaa mahrajaan weyn oo lagu furay xaflad heer qaran ah oo uu aabbe ka ahaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Jabuuti, Mudane Ismaaciil Cumar Geelle oo toddobaadka ku furay khudbad uu dadka ku guubaabinayey baahida loo qabo in la daryeelo horena loo mariyo afafka hooyo, af Soomaaliga iyo af Cafariga. Toddobaadka waxaa ka soo qayb galay boqollaal qof oo ka kala yimid, Jabuuti ka sokow, dalaka kale ee Geeska Afrika, sida Soomaaliya, Itoobiya iyo Eretreya iyo sidoo kale dad qurbaha ka yimid; dadkaasi waxay isugu jireen qorayaal, halabuur, aqoonyahanno, fannaaniin iyo warfidiyeen. Toddobaadka oo idil waxaa la isweydaarsanayey dood-cilmiyeedyo, kulan-suugaaneedyo ama suugaan-wadaag, bandhigyo buugaag iyo farshaxan iwm.

Tallaabadaas dhaxalka laga faai'dey waxaa ka mid ahaa in Jamhuuriyadda Jabuuti si rasmi ah looga sharciyeeyey in sannad walba xus qaran loo sameeyo Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo, taas oo looga gol leeyahay in dadka lagu baraarujiyo inay u soo jeestaan afkooda horumarintiisa, qoraalkiisa iyo dayactirkiisa. Tallaabadaasi si weyn ayay u saamaysay dadka reer Jabuuti, waxayna keentay in 21^{kii} Febraayo ee sannadkan 2007 meelo kala duwan iyo siyaalo kala duwan looga dabbaal-dego Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo. Meelaha

sannadkan dabbaaldegyada waaweyn lagu qabtayna waxaa ka mid ahaa gobollada Cali Sabiix iyo Tadjorra.

Kulan-weynihii daryeelka afka hooyo ee lagu tallaabsaday 2006^{dii} dhaxal-reebkiisii loo wada riyaaqay waxaa ka mid ahaa bandhiggii weynaa ee buugaagta ku qoran afka hooyo oo laga soo kala ururiyey dhammaan dalalka geeska Afrika iyo waddammada dibadda ee ay ku nool yihiin dadka soomaaliyeed. Boqollaal buug oo aad u qiima badan ayaa la soo bandhigay, laga faalloday si weynna loo iibsaday. Buugaagtaas badankoodu waxay ku qorraayeen af Soomaali iyo Cafari. Waxa halkaa si gaar ah uga muuqday buugaagta taariikhda, afafka iyo suugaanta ka hadlaya. Buugaagta in badan oo ka mid ah daabacaad-doodii iyo isku dubba-rid-koodii maaliyaddii ku baxday waxa gacan deeqsinnimo ka geystay Madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle oo dhab ahaan horseed ka ah ololaha lagu soo noolaynayo laguna dhawrayo dhaqanka iyo afka, oo ah tii uu ku bilaabay labadii kulan-dhaqameed (1982 iyo 1983).

Shaki kuma jiro haddii kaalintaa Jabuuti ee taariikhiga ahi ayna jirin, Soomaaliyana sidaan wada ognahay u burburtay ummadda afka Soomaaliga ku hadasha jiritaankoodu halis aan laga soo waaqsan ayaa ku iman lahayd. Tallaabooyinka faraha badan ee midiba mid ka dambaysay ayaa kaalinta Jabuuti ka dhigtay mid nafhurid ah iyo abaal-celin, oo waataan soo sheegnay in dhaqanka, suugaanta iyo fankuba gobonnimada Jabuuti maanta ku naalloonayso ay ahaayeen hubkii lagu soo dhiciyay, haddana dhismaha ummadnimo waa u lagama maarmaan. Waana sida keliya ee dadka loogu beeri karo isku kalsooni iyo in ay isku tashadaan. Waa dhab oo waqtigaynu maraynno adduunku wuu isku wada baahan yahay haddiise aad taada tasayso adna waad la tasoobi.


Talo bixinta la xidhiidha arrimahaas aan soo korxaadinnay:

1. Waa in kulan dhaqameedkii sannadlab ahaa lagu joogteeyo Jabuuti, degmadoo dhammin ay ka soo qaybgalaan si afgarad iyo isdhexgal u suuro galaan. Taana lagu kaabo kulan cilmiyeedyo ah sidii kuwii aan soo sheegnay ee sannadihii dhowaa la qabtay.
2. Hantida weyn ee manta lagu hayo Golaha Radiyowga iyo Talefishanka (RTD) waa dhaxal weyn oo loo hayo dadyowga ku hadla afafka Soomaaliga iyo Cafariga. Haddaba waxyaabihii ka soo baxay labadii kulan dhaqan ee aan horay uga soo hadalnay, barnaamijyadii, riwaayadaha googoosyada, heesaha iyo waxyaabo badan oo arrimahaa la xidhiidha ayaa hadda ku kaydsan habka UMATIC, BETACAM iyo DVC-PRO kuwaana waa in loo beddelaa habka casriga ah ee dijitaalka ah ee maanta la adeegsado.
3. Machadka Afafka ee la sameeyay sannadka 2002-dii waa in isna awooddiisa waxqabashada qayb ahaan lagu jeediyaa ururinta suugaanta afeedda dadkii hayey ay sii dammaanayaan.

Kaalintaa Jabuuti ee xagga dhaqanka iyo af-soo-noolaynta ahi waa mid markii ku habboonayd timid welina socota, Jabuutina ka dhigtay meel ay ku soo hirtaan dadka daneeyo dhaqanka, afafka iyo suugaanta Soomaaliga iyo Cafariga. Waa kaalin mudan in la sii xoojiyo.

Tixraac:

Ciyaarta sayliciga ee Sirinbaawiya waxa laga ciyaaraa dalal badan oo Badwaynta Hindiga ku yaal, ciyaaraha reer guuraaga ee Saddexley iyo Xoogwayn marka ay Sayliciga noqdaan waxay isku dhalan roogaan ciyaarta la yidhaahdo Khadiija Xalwo.



Dadkeenna iyo Daryeel La'aanta Xuquuqda Fekerka

Maxamed Axmed Suldaan

Markii la aqoonsaday xuquuqda aadamigu leeyahey ayaa waxay keentey in fekerka ka soo baxa ama uu curiyiyo halabuurkuna la siiyo muhi-mad iyo xaqdhawr si uu uga qayb qaadan karo dhismaha waaxyaha faraha badan ee adduunku ku meel marayo. Waxaa aqoonsigaasi uu yeela-nayaa xeerar lagu ilaaliyo fekerka cusub ama wax-soo-saarka halabuurka, kana mid noqonaya sharciyada shaqada iyo wax-soo-saarka dadka. Arrintaan cusub ayaa keentey in xeerka dhaw-ridda xuquuqda fekerku qaab gooni ah oo horumarka shakhsiga, kan qaranka ama adduunkaba wax ku biirin kara loo dhigo. Fanka oo sida laga yaabo, in badani u haysato in aanu waxtar lahayn ayaa qarnigan dambe is beddel ku keenay adduunweynaha, oo xeerar gaar ah oo fannaaniinta shaqo siinaya, dhawraya oo aqoonsanayana xaqooda feker iyo wax-soo-saar-koodaba ayaa ku soo biirey golaha shaqada.

Kapteijns, Lidwien, "Somali Popular Culture and Conceptions of Moral Womanhood, 1960-2000," *Gender and Islam in Africa*, ed. Margot Bradan. Leiden: Brill, forthcoming.

Kerr, David, *African Popular Theatre: From Pre-colonial times to the Present-day*. London: James Currey, 1995.

Maxamed Daahir Afrax, "The Mirror of Culture: Somali Dissolution seen through Oral Expression", in Ahmed I. Samatar (ed.), *The Somali Challenge*. Lynne Rienner, Boulder: 1994, pp. 233-251.

Maxamed Daahir Afrax, *Fan-masaxeedka soomaalida* Djibouti: Centre National de la Promotion Culturelle et Artistique, 1987.

Maxamed Daahir Afrax, "The *Abwaan* as Beacon: the Centrality of the Message in Somali Literature with Especial Reference to the Play *Shabeelnaagood*", *Horn of Africa*, 22 (2004), pp. 1-63.

Maxamuud Tukaale, *Hablayohow Hadmaad Guursan Doontaan*, Video cassette, 1975.

Ogunbiyi, Yemi, "Nigerian Theatre and Drama", in Ogunbiyi, Yemi, (ed.), *Drama and Theatre in Nigeria*, 1982.

Ong, Walter, J., *Orality and Literacy: The Technologizing of the Word*. London: Routledge, 1982.

Rashiid Maxamed Shabeele, *Ma Dhabbaa Jacayl waa lo dhintaa*. Mogadishu: Wakaaladaa Madbacadda Qaranka, 1975.

Said S. Samatar, *Oral Poetry and Somali Nationalism: The Case of Sayid Mahammad Abdille Hassan*. Cambridge: Cambridge University Press, 1982.

Styan, J. L., *Drama, Stage and Audience*. London: Cambridge University Press, 1975.

Xasan Cilmi Diiriye, *Saddex baa isu Faanay*, Video Cassette, 1983.

"Maana-Faay":
Muraayad Bulshadeenu
iska Dhex Aragto

Ibraahin Yuusuf Axmed "Hawd"

Wargeyskii lagu magacaabi jiray Xiddigta Oktoobar, ee ugu caansanaa wargeysyadii ka soo bixi jirey Somaaliya toddobaatannadii iyo siddeetannadii qornigii tagey, aad ayuu u tayo xumaa. Maadaama uu ku hadli jirey magaca maamulkii kelitaliska askarta, markii uu dadku maamulkaas nacay Xiddigta Oktoobarna waa lala nacay. Taas oo jirta haddana maalmaha qaar waa lagu xoomi jiray oo la kala boobi jiray. Goobaha lagu gado ayey dhallinyaradu aroorta hore saf u geli jireen, qaarkood dugsiga ayeay ka soo dhuuman jireen si ay u helaan wargeyska, qaarkoodna inta ay kumiyo isku dardarsadaan ayay kooda ugu dheereeya u diran jireen hadhowna koox koox isku mar u akhriyi jireen. Kuwaas ayaan ka mid ahaa.

Maalintaasi ma ahayn maalinta wargeyska lagu daabaco khudbadda kelitaliyaha iyo sawirradiisa, waxayse ahayd maalinta la hubo in ay ku qoran tahay qayb kale oo ka mid ah sheeko faneed taxane ahi. Wargeyskaas nuxurka iyo barakada darani wuxuu ugu roonaa maalmihii lagu daabici jiray sheekooyin ay ka mid yihiin "Maana-Faay", "Ayaan Daran" iyo "Xididdo, qisadii qoys maraykan ah". Waa kala guurkii sannadihii 70-nadii iyo 80-nadii.

Sheekooyinkaas, oo ay qaarkood markii dambe buugaag noqdeen, bulshada oo dhan, gaar ahaan dhallinyarada, waxay u ahaayeen dareen wadareed iyo dood maalmeed xiiso badan. Waxay midaynayaan dareennada keli keli ahaaneed ee la qabo. Waxay daboolayeen baahi xaddaaradeed oo jirtay. Waxay abuurayeen dhaqan-suugaaneed hal-abuurka umadda ku cusub. Waxay toosh ku ifiiminayeen anshaxyo nololsha ku soo kordhay oo uu dhaqanka magaaladu siday. Waxay madaddaalinaayeen kumanyaal iyo kumannaan dhalliyaro ah oo

kumanyaal iyo kumannaan dhalliyaro ah oo haddii kale dhaqammo shisheeye ka doonan lahaa madaalada ay u baahan yihiin. Ugu dambayn waxay kobcinayeen wacyiga nololeed iyo siyaasadeed. Cid walba oo akhrida waxay kaga yeedhsiiyayeen:

ALLA WAA RUN!

Sheekooyinkaasi waxay xoqeen oo maasha ka soo daadiyeen boogo halis ah oo bulshada ku yaallay. Waxay fashiliyeen ceebo jira oo la qarsanayey amaba aan lagu baraarugsanayn. Waxay ahaayeen hal-abuur cusub oo galay bado aan la geli jirin. Waxay ahaayeen tallaabo dheer oo uu dhaqankeennu hore u qaaday. Kuwaas ayey qisada caanka ah ee **"Maana-Faay"** ka mid ahayd.

Mid ka mid ah sheekooyinka Agatha Christie ayuu nin doonayaa in uu sheeko allifo, wuxuuse ka cabanayaa in ay ku adkaatay sidii uu u bilaabi lahaa. Dabadeed waxaa niyadda lagaga hiifayaa canaan macnaheedu u dhow yahay: "Waa kan bilawga la rafanaya ee wuxuu moog yahay sida sheeko loo gunaanadaa in ay ka sii adag tahay sida loo bilaabo."

Haa, waxaa dhici karta sheeko wanaagsan laakiin gunaanadku akhristaha ku rido niyadjab iyo xanaaq. Sidaas oo kale sadarrada ugu horreeyaa iyaguna sheekada waxay ku yeeshaan saamayn aad u weyn. Bilawgu akhristaha wuu soo jittaa ama wuu didiyaa, wuu xiise geliyaa ama xiise jebiyaa, wuu dardar geliyaa ama daaliyaa. Haddaba, qisadan Maana-faay, **Maxamed Daahir Afrax** isaga oo taas og, isla markaas awooddeeda hal-abuur leh, ayuu si buuxda ugu guulaystay judhaba in uu dareenkeenna iyo xiisaheenna hantiyo.

Gabadha sagaal iyo toban jirka ah ee goortan sariirta bilqan, ee jidhkeeda kala daatay ururin kari la, ee dharkii dugsiga iska bixin kari la, ee buugaagta dhulka ku daadatay soo qaadi kari la, ee nafteeda iyo dunidaba hiifaysa, maxaa si ka ah? ayaa ah weydiinta ay markiiba maskaxdeenna faduuliga ahi warcelinta u raadinayso. Muuqaalkaas xiisaha badani waa bilawga buugga ee maaha bilawga sheekada, qoraaga ayaase meel dhexe inooga soo xaday si uu inooga sasabto.

Waa si ka mid ah siyaabaha badan ee sheeko-faneed loo bilaabo.

"Maana-Faay" waa magaca sheekada, waana isla magaca qalanjada qisada. Waa mid ka mid ah sheekooyin-faneedka soomaaliyeed kuwii qoraal ahaan ugu horreeyey, haddana waa kuwa ugu qurux iyo qiimi badan. Waa qiso si walba u dhammaystiran, haddii ay noqoto hab-qoraalka, farshaxannimada, af soomaaliga iyo fudaydka intaba. Hibada hal-abuurnimo ee qoraaga ka sokow shaki la'aan guushan waxaa door weyn ku yeelatay aqoonta uu qoraagu markaas ka hor u lahaa fanka sheeka-qoridda.

Waxaa iyaduna aad u xiiso badan mushkiladda meesha taal, fadqalallada oogan waxa wada, shakhsiyaadka ku jira iyo sida ay waaqica uga run sheegayaan. Guud ahaan waa legdanka iyo loollanka dabiiciga ah ee xumaha iyo samaha. Waa jacayl curdan ah oo hufan, iyo tumasho silloon oo lagu meelmarinayo xadgudub. Waa xilka umadda loo hayo oo laga dhiganayo awood ujeeddo xun lagu gaadho. Waa laba kartiyood iyo laba anshax oo midba si u arko ilbaxnimada iyo qiimiga nolosha. Waa damac aan habboonayn oo wanaagga ka ambanaya iyo dan wanaagsan oo waddo qumman ku taagan. Ugu dambayn waa nabsigii oo sidii lagu yaqaannay ciqaab daran riixaya iyo nuuradii oo abaalgud qurux badan sidida.

Reer Xaaji Muumin waa qoys Banaadiri ah oo ku kooban dhaqan hoosaad ay qoysas ay qoysas xigto ahi la wadaagaan. Qoyskaas ayey ka dhalatay Maana-Faay, waa gabadh da yar oo kollayba sidii ay caadadu ahayd ina adeerkeed loo dhisi doono. Waa dhaqankii lahaa "Wax aad taqaan gurso wax aad taqaan ha lagu dhalee". Qorshahaas waxaa dhabqiyey jacayl lamafilaan ah oo wax walba xagga kale ka rogay. Maana-Faay ma ku dhiirran kartaa in ay jacaylkeeda dartii u burburiso caadadii soojireenka ahayd?

Injinneer Axmed Jaamac waa barbaar ay tacliinta iyo ilbaxnimadu ka xoreeyeen dhaqammada gaboobay ee aan xumaha mooyee wanaaggu ku jirin. Wuxuu ku qanacsan yahay in aan la joogin xilligii ninku ku guursan jiray

"reer hebel la xidid". Jacaylkiisa xalaasha ahi haddii uu god abeeso galo wuu kaga daba gelayaa. Laakiin qiimo iyo nafhurid intee la eg ayuu diyaar u yahay taas in uu ku bixiyo? Tabtii Maana-Faay isagana aabbihiis ayaa la hortaagan "Wax aad taqaan guurso wax aad taqaan ha lagu dhalee".


Axmed aabbihi, Jaamac-Dhegey noloshiisii hore waxay doontaba ha ahaatee maanta wuxuu hayaa xil qaran. Degaan miyi ha ku soo koree maanta wuxuu ku dhaqan yahay magaalo-madaxda. Haddaba isbeddelka dhaqan iyo nololeed ee uu galay, kana duwan geel-jirennimadii uu ku soo barbaaray, sidee ayuu uga dabbaalan doonaa? Ma shilimmada uu qaranka ka booliyey ayuu wax walba ku gadanayaa, xitaa gabadha yar ee uu soddogga u yahay? Anshaxu haddii uu sidaas u dumo fadeexad ma loo dhintaa?

Bayddan Shabeel hadba ninka ladan ee tumashad u laacayso inay dookhiisa raalli geliso haddii risiqeedu galay, xirfadda keliya ee ay taqaanna tahay sida gabadh miskiinad ah ee aan waayo'aragnimo lahayn loo dabo, weligeedna nolol aan taas ahayn dhadhamin, iyada sidaas laga dhigay iyo bulshada sidaas ka dhigtay koodee cadow ah, koodeese dembi weyn?

Shakhsiyaadka sidaas u kala fog ama isugu dhow, xilka isku leh ama xilka kala leh, ayey qisada "**Maana-Faay**" isu keenaysaa. Dabadeed waxay isu gubayaan sida ay dabka iyo gaastu isu gubaan.

Muujiinta dabecadda dhabta ah ee shakhsiyaadka qisada, dhaqan iyo hadalba, waa halka ay "**Maana-Faay**" ku muujisay heerka ugu farshaxan sarreeya sheeka-qorista Soomaalida. Waxaad mooddaa dad nool nool oo ina hor taagan. Run ahaantii "**Maana-Faay**" qodobkaas waxay ku helaysaa billadda ugu sarraysa dhammaan sheekooyinka soomaalida inta aan ilaa imika arkay. Qof walba codkiisa iyo erayadiisu waxay si run ah u soo gudbinayaan haybtiisa dadnimo, dabaqadeed, degaan ama da'eed. Marnaba cidda innala hadlaysaa ma aha sheekeeyaha qisada inoo warinaya ee waa shakhsiyaadka hadlaya qudhooda.

Maana-faay



Waxaase iyaduna jirta mar ay arrintu ku dhacayso heer hoose. Waa jeerka ay dhacayso fadqalallada ugu weyn ee sheekada ku shareeraysa fiidda ugu sarraysa. Waa marka uu Axmed ka soo duldhacayo gacalisadiisii uu dhawrsanaanta iyo xishoodka ku hubay oo gole lagu qayilayo fadhida laan jaad ahna gacanta ku haysata. Dhacdadan oo ah barta ay dabka iyo baaruuddu iska daarayaan qoraagu wuxuu u falkiyay si wahsi ku jiro oo tayada sare ee sheekada hoos u jiidaysa. Arrimo badan oo yar yar ayaa isku mar iyo lamafilaan isku wada beegbeegmaya si ay u dhaliyaan qaraxa loo dan leeyahay. Taasi ma wanaagsana. Sheekadu waa in ay isu waddaa si dabiici ah oo akhristaha bisil qancinaysa.

Kedisada, ama lamafilaantu, sheeko-faneedda waxay siisaa xiise, dhadhan iyo diirrimaad. Laakiin ma aha in ay badato, mana aha in ay garashada bisil iyo dabciga noloshu diidaan. Tusaalahan soo socda ayaan u qaataa kedisada aan sheekada qurxin ee qarribta: nin baa wuxuu ka soo dhacayaa dabaqa labaatanaad hoteelkii uu degganaa. Sida uu u soo kankoonsan yahay

wuxuu ku malaasmi doonaa waddada laamiga ah ee ay baabuurto qulqulayso. Waxaanse ahay qoraa miskiin ah, ninkaas oo aan lacag ku leeyahayna waxaan rabaa in aan badbaadiyo. Haddaba maxaan yeelaa? Waxaan yeelayaa sidan: isla markii uu ninku laamiga ku dhici lahaa waxaa meeshii soo maraya baabuur weyn oo cudbi ku raran yahay, saaxiibkayna cudbigii ayuu dhex muquurayaa oo waxba noqon maayo! Maashaa Allaah!

Marka ay fadeexadda **"Maana-Faay"** dhacayso sababta ay sidaas wax u noqdeen waxaynu u heli karraa cudurdaar aad u yar, waxaana aynu siin karraa qaddar aan buumayn oo garawshiinyo ah. Taasina waa haddii aynu taxanaha sheekada oo dhan xusuusta dib ugu soo celinno. Haa, waxaa jirta cillad aan hubo in ay qoraaga hoosaasisay taas oo ah qalanjada sheekada oo ah qof jilicsan, waayo'aragnimo liidata, oo aan gacal iyo nacab kala garan karin. Sida neef xoolo ah ayaa dhankii la doono loo kaxaysanayaa sidii la doonana laga yeelayaa. Maana-Faay Xaaji Muumin ma doqon baa? Weydiintaas haddii lagaga jawaabo "maya" waa in la raadiyaa qiil kale. Haa, waxaynu ognahay gabadhu in ay ka soo jeeddo dhaqan-hoosaad aad u urursan oo ka bulshada kale ka go'doonsan. Waxay ka soo degtay saraha Xamarweyne, halkaas oo gabdhaha aqalka lagu huuriyo, marka ay guurgal noqdaanna nin xigaalkood ah loo xereeyo. Maana-Faay in kasta oo ay iyadu heshay fursad waxbarasho haddana dhaqankaas urursan ayey ku jirtaa. Sahra Yuusuf baa ina bartay ee maba aynaan baranneen.

Shakhsiyadda Maana-Faay jileceeda run ahaantii waa aynu ka xanaaqaynaa. Bal hadda day, iyada oo xalay la geliyey fadeexaddii ugu weynayd nolosheeda, iyada iyo gacaliyaheediina la kala dilay, ayey haddana fataaladdii sidaas u gashay aroortii iska daba gashay oo meel daran u raacday! Maxaa daba dhigay? Maxaa u diiday in ay maskaxda kaga shaqaysiiso oo golaha ceebeed ka kacdo? Ka kacdaye maxaa ku soo celiyey? Haddiise ay dan ugu soo noqotay (boorso ay ku illawday) miyaa la sixray may ka tagto? Maxaa habar fataalad ah iyo niman kha-

siisyo ah ag dhigay? Run ahaantii uma eka qof caadi ah ee waxaa la moodaa axad falan, haddiiba aanay doqon ahayn. Shakhsiyadka sheekada ku jira oo dhan iyada ayaa ugu karti iyo garasho liidata.

Gunaanadkuna waa si habboon oo nafta u wanaagsan, walow ay tahay si la isla yaqaan oo badanaa fanka soomaalidu ku gunaanadmo. Run ahaantii dhammaadka **"Maana-Faay"** waxaa lagu xusuusanayaa ruwaayadaha soomaaliyeed marka laga reebo dhawr ay ka mid ahayd **"Qabrigii Jacaylka"**. Sideedaba **"Maana-Faay"** waxaa ka dhadhamaya fan ruwaayadeed. Hal-gankii dheeraa ee xumaha iyo samaha ka dhex aloosnaa ka dib fashil iyo fadeexad kama dambays ah oo dulmiga gaamuray ku dhaca, iyo wanaagga madaxa lagaga taagnaa oo libin ku geeraara ayey nafta akhristuhu higsataa. Gaar ahaan sidaas ayey mar walba jecel yihiin dadka da'da yar iyo bulshooyinka uu heerkooda aqooneed iyo wacyi hooseeyo. Natijada hal-ganku guul iyo guuldarro ka ay tahay wax door ah kuma laha tayada shaqo faneedda, waayo aayaha noloshu labada wejiba wuu ku idlaadaa. Waxaa uun loo baahan yahay dhammaadkaasi in aanu ka go'naan ee qayb ka yahay ujeeddada iyo nuxurka hawl-faneedda uu ku dhammaanayo, si habboonna uga run sheegayo abuurta ama dabciga shaqada uu ka midka yahay.

"Maana-Faay" shiddo isgelin mayso ee waxay ku dhammaanaysaa sidii loo baahnaa. Dadkii ay khusaysay oo dhami waa kuwan horteenaa tuban. Xitaa yartii adeegtada ahayd waa tan. Waa yoomal qiyaamihii, waana la xisaab-tamayaa. Qof waliba waxa uu qabo iyo waxa laga qabo ha sheegto. Xitaa islaanta fataaladda ah ee dunida qarribtay waa in ay gardhigataa. Oo maxay u gardhigan wayday iyadaba sow ilaa gumaysigii Talyaaniga lama soo dulmayn? Dadnimadeedii iyo dumarnimadeedii iyada oo yar la baylahsaday dawladdnimadu maxay u tartay?

Dabadeed sidii dacwad maxkamadeed ayuu garsoore dhawaaqayaa. Hebel iyo hebla ceddooda inaga daaya oo aynu sidan samayno: Dhaqankeenna oo dhan baa sumoobay ee waa in aynu carrageddinaa. Wax walba waa in aynu dib u qaabaynaa oo dib u hagaajinnaa.

Rubuc qarni in ka badan ayaa laga joogaa maalintii ay **"Maana-Faay"** sidaas ku talisay, welina baahidaasi waa ay taagan tahay. Isirka soomaaligu wuxuu u baahan yahay carragaddi, in ciidda xagga kale loo rogo si ay waxa xun oo dhami u aasmaan wax cusubina u soo baxaan.

"Maana-Faay" sidaas ayey u hadlaysaa, maxayse ka hadlaysaa? In ay tahay sheeko-faneed aynu iska dhex aragno, bulshadeennana ka dhex aragno, akhriskeedana ku raaxaysanno ma ku qancaynaa? Maya iyo haa labadaba. Waxaase jirta sidoodaba fanka iyo suugaantu in ay leeyihiin awood inagu khasabta, ama ugu yaraan inoo oggolaata, in aynu kala baxno nuxur aan ahayn inta muuqata uun. Labada eray ee "sarbeeb" iyo "duurxul" waxay ku mataansan yihiin, oo ay mar la abuurmaan, magacyada "fan" iyo "suugaan". Intaas waxaa dheer xilligii ay **"Maana-Faay"** soo baxday maamulkii talada haystay waxaa ku bilawday "buufis" uu bulshada oo dhan ka qaaday siiba hal-abuurka. Buufiskaas ayuu dadweynuhuna colaadinta maamulka u adeegsaday, wax walbana waxaa laga soo tuujiyey mucaaridnimo. Haddii aayad Quraan ah la akhriyo waxaa la odhan jiray "waxaa loola jeedaa Kacaanka".

Sidaas darteed **"Maana-Faay"** qofkii doonaa wuxuu ka dhigi karayey riddo siyaasadeed oo

sarbeeban. Markaas dhammaan shakhsiyaadka sheekada ku jira mid walba waxaa la siin karaa kaalin ka mid ah kaalimihii isdiiddanaa ama is-oggolaa. Jacayl ugub oo nadiif ah oo aan dembi lahayn, iyo awood sheydaan oo jacaylkaas burburinaysa iyada oo ku foogan tumasho foolxun, danyartana ku dullaynaysa awooddii dawladnimo ee lagu daryeeli lahaa, waa dhambaallo si dhab ah qisada uga dhex muuqda.

Haddaba waxaa yaab iyo amakaag leh qoraaga rubuc qarni ka hor curiyey sheekada caykan ah, iyo tii ku xogtey ee la magacbaxday Galtimacruuf, intii ka dambaysayna aqoon iyo waayo'aragnimo badan koror-saday waxa hal-abuurkii sheekoqorista ka garbaduubay! **Afrax** isla beryahaas ayuu Soomaaliya ka firxaday. Maana-Faay iyadana waxaa cid ugu wardambaysay 1997 iyada oo Stockholm iyo London midba mar u qaxaysa (waa labadii meelood ee ay ku soo kala baxeen labadii daabacadood ee ugu dambeeyey).

Maqaalkanna waxaan ku xidhayaa, qoraaga **"Maana Faay"**, **Maxamed Daahir Afrax**, waxaan u hayaa abaal ah sheekadiisani in ay ka mid ahayd kuwii ugu horreeyey ee i jeclaysiiyey akhriska iyo qoraalka sheeko soomaalida. Waxaan u hibeeyay sheekadayda cusub ee magaceedu yahay "Aanadii Negeeye".



 DAALLO Airlines

Daallo Airlines serves more destinations in
the Horn of Africa than any other carrier.

Fly to Djibouti (from London and Paris) twice weekly
with immediate connections to Mogadisho and Hargeisa.

Houssein Meraneh Mahamoud.
*Dardaaran. Testament d'un
nomade revenu des mers:*

Récit. Traduit et transcrit par

Ali Moussa Iye*

[Paris: Menaibuc, 2003].

By Lidwien Kapteijns.

In this beautifully produced book, Houssein Meraneh, in his eighties when this book came out, gives an account of his life. This is, however, a special kind of autobiographical account, for it is an exemplary narrative, one in which the author recounts those aspects of his life and times he deems worth remembering and emulating today. The book consists of three parts. Part One, "The Experience of Injustices," traces the author's life from birth through World War II. In Part Two, "Political Engagement," the author recounts how he experienced the major events and personalities of Djibouti's movement for national independence, finally achieved in 1977. Part Three consists of historical documents relevant to the narrative, including photographs of Mahmoud Harbi, Cheikh Osman, and others.

One of the major themes around which the author has structured his narrative is that of solidarity. He believes that it is "the weapon of the weak and the oppressed, the only wealth one cannot take away from them" (p. 11). The first bonds of solidarity Houssein describes are those of family, sub-clan and clan. He was born into a nomadic family near the Ethiopian-Djibouti border. He lost his mother early and was a herding boy for his uncle when he ran away to the bright lights of the city. He was barely eight or nine years old when he followed the railway line and walked across the endless dry plain to Djibouti, but he

remembers how secure he was in his identity. He was a young man of a particular clan of the 'Isa Somalis and was thus confident that he would find community wherever he went. Because of the way his aunt had raised and praised him, he also knew that he was (and would have to be) a hard worker. With this consciousness, the young Houssein arrived in the city.

In Djibouti, the boy was welcomed by members of his mother's family, who even wanted to put him in school. But he loved the freedom of the streets and generated some income first by carrying bags and packages for people, and, later, when he was about 16 years of age, as a junior employee at a public works company. It was at this age that Houssein helped build another community, this time based on social and political solidarity, that of the Association of Djibouti Youth, with its motto of "kalaamu waaxid" or "we speak in one voice." This was a sort of school for the author, as he feels that he learned to develop his critique of colonialism, defend his opinions, and learn to accept differences and work towards consensus. In this period, he also participated in the inauguration of the Ogaas of the 'Isa. This made an enormous impression on him and reinforced his sense of identity and admiration for Somali custom. Given that he experienced only discrimination and disdain from the French colonizers – officials and civilians alike – this pride in, and concern for his community and its cultural ways shaped him for life.

In 1941, when he was about 24 years old, Houssein became a member of yet another organization based on solidarity, that of the Sailors' Union (*Syndicat des gens de mer*). This organization helped him land his first job on board of a ship on the Madagascar-Djibouti-Marseilles line. The author describes the discriminatory practices of those who signed sailors onto the ships, and

* Ali Moussa Iye is the author of *Le Verdict de l'Arbre (Go'aankii Geedka): Le Xeer Issa, étude d'une "Democratie Pastorale"* (Djibouti, 1990).

how Yemeni sailors were given priority over Somalis. When the Governor of the Colony consistently refused to remedy this problem, violence broke out in Djibouti in 1937. It was not until much later that leaders from the Somali and Yemeni communities, in Marseilles, solved this problem between them. How violent the colonial regime was in this era is evident from the punishment of one of the sailors whose case had sparked the violence: he was sentenced to imprisonment with hard labor in New Caledonia, where he died.

The author's memories of his first visit to Marseilles (like that to Djibouti in Part One), are both funny and moving. His first sailor's wage was 150 francs (or 4.37 euros). The outbreak of World War II had an enormous impact on Houssein and other Somali sailors. Germany defeated France, and when Vichy France began to collaborate with Germany, it became the enemy of the British. Moreover, the Suez Canal was closed and, suddenly, Djibouti had truly become the other side of the world. Houssein signed onto a ship for East Africa by way of the Cape of Good Hope and ended up in Madagascar (Diego Suarez, now Antseranana). There he spent the war years, partly hauling coal from South Africa to Madagascar and partly as the owner of a diner/coffeehouse.

On Madagascar, Houssein again showed his commitment to the concept of communal solidarity. When sixty Djiboutians recruited by a French company to work in the local salt works turned out to have been cheated and were forced to work in sub-human conditions hazardous to their health, Houssein became their spokesperson. He managed to have them released from their contract but, as they did not have money for the fare home, ended up providing them with food and accommodation for weeks on end. His business never quite recovered. In 1947, partly because he was very sick with malaria, he again took to the seas and returned to Marseilles. His stopover in Djibouti, after eight years of absence, was a mere four hours! This ends Part One.

Part Two traces the author's political involvement in the national movement for independence. He first met Mahmoud Harbi (as well as Hassan Guleed, who was to become Djibouti's first president) on board of a ship. He became a staunch supporter of the nationalist cause and was so inspired by Harbi that he moved his wife and children from Marseilles to Djibouti in order to participate in the 1958 referendum. Harbi led the opposition against a continued French presence in Djibouti, pushing for a "no" vote, but the referendum – due to French interference – yielded a "yes." Houssein was disappointed in the outcome as well as in the Ogaas, who, in spite of Houssein's personal appeal, had refused to come to Djibouti and participate in the campaign. Houssein returned to Marseilles in 1959 and continued to lobby for Djibouti independence as part of the "Committee for Justice in Djibouti," which also had the support of famous French intellectuals such as Jean-Paul Sartre.

The author also briefly recounts the violent repression of those Djiboutians who, during the 1967 visit of General De Gaulle, publicly expressed their desire for independence. Those who dared to speak out were massacred – their dead bodies displayed on the barbed wire encircling the city or dragged behind French jeeps. When independence came in 1977, the author co-organized a big party for all Djiboutians in Marseilles and, out of principle, sacrificed his French passport for a Djiboutian one. In the final pages of Part Two, the author expresses his disappointment with post-independence developments and his sadness about the civil war in Somalia and the conflicts between the Afar and Somali communities in Djibouti.

In his brief introduction, Ali Moussa Iye, who transcribed and translated this oral account from Somali into French, perfectly captures the core values Houssein Meraneh wants us to emulate. These are "his faithfulness to his roots, his ethics of solidarity, his concern for justice, and his sense of honor" (p. 5). These are the qualities that, for the author, also lay at the heart

of communal (clan, nation, state) solidarity. They are part of a set of principles, of reciprocal rights and duties, that are anchored, he believes, in Somali (and `Isa) custom. It is clear from this autobiographical account – this exemplary narrative – that Houssein Meraneh tried to live by these rules. However, Houssein's life story also makes clear that this system of ethnic solidarity to which he loyally and consistently paid his dues had already begun to break down. At the personal level, this break-down is evident from the fact that Houssein rarely even hears again (let alone gets reciprocity) from those he helped at great cost to himself. At the national level, Houssein expresses his dismay at its break-down in reference to the lack of a national holiday in memory of the fallen heroes of the struggle for independence

and the absence of proper pensions for those who sacrificed but survived.

Thus, to this reviewer, this life story appears to testify to a "broken bargain" and the failure of the clan paradigm. It suggests that the solidarity of clan and nation that gave meaning to Houssein Meraneh's life had broken down in small ways long before the bloodshed of the Somali civil war. Whether the reciprocal rights and duties of clan solidarity ever really existed in the way the author conceptualizes and tried to live them, or whether hijacking such solidarity for purposes of personal power was always part of the clan paradigm is a question that continues to be relevant today.

The author, the translator, and the Menaibuc press deserve to be congratulated with such an interesting and carefully produced book.



**Mako Shirdoon Sugaal,
*Halgan Gobannimo:
Buraanbur iyo Geeraar.***

[Jabuuti: Machadka Afafka 2003.]

Aadan Xasan Aadan (*Beleloo*)

Dhalashadu waa hawl aan fududayn oo ay weheliyaan daal iyo diihaal ka sii xog-warrama kuna sii bishaareeya. Noolaha dhammaantii waa mid uu ka simanyahay, xataa dhirta oo aad aragtid in ay iniinta yar ee caleemuhu ka soo jeedaan sida la-yaabka leh ee ay dhagxanta iyo dhoobada adag u soo dhex qaadayso ee ay dhalashadeeda ugu halgamayso. Sawirka ayaa isku eg, kolka aan is barbar dhigno dhalashada noolaha kuu doono ba ha ahaadee iyo ta ummadeed. Waxa aan uga soconnaa, in aanay ummaduhu jiritaankooda hanan iyaga oo aan u sii marin fool kulul oo wax walba laga filan karo. Si bay labada foolood haddana u kala duwan yihiin oo tan jiritaanka ummadeed kuma soo af-meeranto bilo iyo sannado. Waa marka ay ummadi u dhalanayso si quman, kolkay se qalliin ku dhalanayso ayaa

ka sii qadhaadh. Waa marka uu gumaysi iska hor taago jiritaankeeda ee uu dhadhaabo adag ku hor tiso si aanay dhinaca kale ee noloshu ugu gudbin.

Diiwaanka (HALGAN GOBANNIMO) oo ah buugga aan soo daalacannay ayaa ka mid ah kaamaradihii kartida lahaa ee sida dhabta ah u soo duubay waayihii dhalashadaa xanuunka lahayd ee Dalka Jabuuti. Waa diiwaan maanso oo lagu ururshay buraanburkii iyo geeraarkii ay tirisay Mako Shirdoon Sugaal (Alle ha u naxariistee). Diiwaanka oo uu soo saaray Machadka Afafka ee Jabuuti sannadkii 2003-dii ayaa ka kooban 68 bog oo lagu naqshadeeyay sawirro laga soo xulay kaydka qaranka ee Jabuuti.

Magaca diiwaanka iyo sawirka jeldiga lagu asteeyay aad ayay isku le'egyihiin. Magaca diiwaanku waa HALGAN GOBANNIMO oo ka gudo ballaadhan haddii loo bixin lahaa HALGAN GOBANNIMODOON. Taasi waa kolka aan u garanno in uu halganku gobannimo yahay xataa haddii aan guusha lagu indho kuulan. Halganka, dhiidhiga iyo dhiirranaanta ayaa gobannimo ah sida uu sawirka diiwaanku ba ka marag kacayo. Dadka siligga lagu meershay ee uu nacabku rasaasta la hor tugaan yahay, waxa ka muuqata gobnimo nafahooda daallan ka soo butaacaysa

oo fadhigii u diidday. Waxa uu diiwaanku ka kooban yahay saddex qaybood oo ay ta hore tahay hibayn, hordhac iyo gogoldhig ay qoreen ruugcaddaa halganka iyo Mako Shirdoon ba aqoon u lahaa. Qaybta labaad waa maansooyin la soo xulay oo labataan ah, qaybta ugu danbaysaa na waa erey-qeexid iyo ujeeddo-caddayn.

Maansada Mako ee diiwaankan lagu dhigay, haddii aan si guud tilmaan uga bixinno, waa baaq dhiirran oo bulshada ugu yeedhaya baraarug, farta ugu fiiqaya aanooyinka gumaytaha oo u hagaya dhabbada lagu gaadho xornimo xaq ah. Dhanka kale, haddii aan si gaar ah u tilmaanno farriimaha maansada Mako Shirdoon ee diiwaankan lagu kaydshay, halganka iyo gobannimodoonka ayaa xagga hore soo maraya. Waxa soo daba galaya kuwo kale oo aan ka miisaan hoosaynnin oo ay qaarkood waarinayaan dalka iyo calanka amaantooda sida: (HADH-QABOUBE) iyo (XISBIGA). Waxa kale oo jirta maanso ka hadlaysa bulshada iyo boogheeda sida: (SIFIHII FIRCOON) iyo (NABADDA). Hilinka kale ee soo raacaya kuwaasi, waa maansada ay aadka ugu ammaanayso madaxda dalka iyo marwooyinkooga sida: (XASAN GUULEED), (GUULEED), (ISMAACIIL) iyo (KHADRA). Intaa an soo sheegnay oo dhan waxa la odhan karaa, waa intii maansooleyda looga bartay oo ay badankoodu ka sinnaayeen, laakiin waxa aan abwaannada lagu aqoon, gaar ahaanna haweenka in ay dhaqaalaha u dhuun daloolaan ama ay il gaar ah ku fiiriyaan, waa na tan danbe ta ay Mako Shirdoon qayrkeed ku dhaaftay. In kasta oo ay maansadeeda ku halgamaysay, haddana taasi kama mashquulin in ay mararkii danbe ee la miyirsaday ay dhawr maanso dhaqaalaha dalka iyo ilihiiisa kaga warranto. Buraanburradaa iyo geeraarradaa Mako waxa ay ku hubisay sida aanu Ilaahay innoo dhigin meel saabbir ah ee uu innoogu hibeeyay so'dii sareedada. Qodobkan waxa loo raaci karaa maansooyinka; (MACDANTA DHULKEENNA), (BADDA CAS) iyo (KALLUUNKA).

Sida ku cad diiwaanka HALGAN GOBAN-NIMO, Mako Shirdoon waxaa ay maansada halganka bilawday iyada oo aad u dhallin yar.

Dhan walba kolka laga eego, waxa jirta tilmaan iyo bar cad oo lagu soo dir-sooci karayo. Hala-buurku waa dad aad u dareen fudud oo durbadii ba kolka ay arkaan hadimooyin dadkooda loo daboolayo ku qaylya cod dheer: “*Ka kacaay ka kacaay*”. Halganka ay ku jiraan ayaa ku shuqliya hagar-daamooyinka cadaawaha iyo hadimoo-yinkiisa, sidaa daraadeed na waxa ay xoogga saaraan tilmaanta ceebaha iyo iimaha gumaystaha, ujeedooyinkiisa dadka ka qarsoomi kara iyo sida ay waajib u tahay in la iska dhiciyo. Guubaabo ayuu gargaar uga dhigaa gocom-maalayaasha hubka garabka saarta ee nacabka kula gurguurta. Waxa uu xasuusiyaa sharaftii aabbayaashood iyo dadnimada laga duudsiyay. Mako intaa qayrkeed bay kala siman tahay, laakiin waa hibo aan laga wada helin halabuurka in ay rajo iyo yididiilo buqdhadaan. Iyada oo dhaayaheeda ku aragta oo ku dhex nool dhibaatada gumaystaha, iyada oo uu dalkii isku rogay xabsi weyn oo mugdi dhex yuurura, ayay rajo weyn ku qabtay in ay maalin maalmaha ka mid ah neecawda qabaw ee xornimada ku neefsan doonto. Waa rajo dhab ugu muuqatay oo aad mooddo in indhaha loo saaray, waa na waxa iyada qudheeda ku dhiirri gelinayay in ay halganka u ban baxdo. Ma jirto ama way yartahay maanso ay tirisay oo aanu ilayska rajadu ka ifaynnin.

An tusaale u soo qaadanno maansada diiwaanka ugu horraysa oo uu ciwaankeedu xaqiiqdaa innooga marag kacayo; waa maansada (Wax yar gaadhka iga hay). Waxa ay tidhi:

Mar uun buu gudgude di'i
Mayaygu soo gadaal noqon
Xiddiggaagu gamashi'i
Oon dib u soo gadaal noqon
Fidhinkaygu giigsami
Calan guudka saariye
Guusha waan haleeliye
Wax yar gaadhka iga hay



Gabankani an dhalayoow
Naftani way gadooddayoow
Godol kama helayside
Adna naaska gawlee
Oo geydha iga daa

*La arkee adoo gob ah
Inuu Guulle kula sugo
Calan guudka saartidoo
Geeraar ku taliside
Adna naaska gawlee
Oo geydha iga daa*

Gebogebada daalacashada, waxa aan ku soo xidhayaa qiimaynta maansada Mako Shirdoon Sugaal oo uu ka hadlay Xaashi Cabdilaahi Orrax. Gogoldhigga diiwaanka ayuu badheedhihiisa ku sheegay oo uu yidhi:

Maansadani oo u kala baxda , gabay, geeraar iyo buraanbur tusas fara badan ayay saameyneysaa oy ka mid yihiin, guubaabo, baraarujin, baaq,

waayo-tus, ammaan, dhaleecayn, dhiirri-kicin, hagrid, hanuunin oo u kala qeexaya bulshada xumaanta iyo samaanta, gobannimada iyo gunnimada, jabhadka iyo jihaadka, dullinimada iyo doqonniimo ku noolaashaha. Waayo tuska iyo tilmaanta bulshada ay u kala qeexayso dariiqa toosan oo ah kan halganka iyo ka qalloocan oo daba-dhillifnimada iyo gumaysi gargaarka ah. Maansada Mako Shirdoon waa mid heer sare ah, dhinaca habdhiska (qaafiyadda, godadka iyo qiyaasta codka) iyo dhinaca suuraynta (sawirka maanka, cod iyo weedh u-geddigiisa, sifo iyo sanqadha ereyada), luuliga iyo is-raac-raaca weedhaha, tuducyada iyo taxooga, farrinta maansada iyo yool abbaarkeeda.




Saab-xidh

Diiwaanka maanso.

Aadan Xasan Aadan (Beleloo)

Djibouti, by the author, 2005.



Hilin Hayaan:

Diiwaanka Suugaanta

Abwaan Cabdi Muxammad Amiin,

Panga, Sweden:

Iftiinka Aqoonta, 2006.

CURIS FICTION / SHEEKOOYIN

Father, Come Back From Death

By Abdourahman A. Waberi¹

*Death will look at all of us
Death will come and it will have your eyes.*
(Cesare Pavese)

All that the old timers of the neighborhood have to do is keep quiet under the yoke of the sun: they are already sparring with the great reaper, the only love at the horizon. My father will return to give them a good kick in the butt. These bedizened bullocks want to take my widowed mother in marriage again, as tradition would have it. In that case, what will the future be for me? All that will be left for me to do is to don the tunic of Nessus. Dear father, come back from death quickly. Here, the night is more impenetrable than a virgin from among the nomads. My great tightrope walker of a father used to exorcise, through his voice and his music, what is unbearable, ignoble, wintry, and tedious in life. He used to say that silence makes up a large part of a conversation but no one understood. Before being slain by the insolence of the beloved tyrant, my father, that healer of souls, was, once the tender years of childhood had passed, a singer of *gumx*, our blues. He had interpreted all the famous poets of the country from the Sayyid to Abdi Qays, with Omar Dhuule or the Hamarkoodh brothers in between. A drinker on days of high sun, a god among the local cronies, he sang of the impure past from time beyond time. He has been gone for barely ten days and the sky has taken on an aged look. My mother has been swallowed up by the trenches of silence - at a remove from life. And I am just ten years old and already a real up-and-coming piece of crap. Come back, dear

father, come back. Shake the stones of the cemetery, break through the earth, shake off the dust, arise, and walk. Come back, come back. If not, I will become like them. Here, life is a river of dirt that no one knows how to contain. The mountains burn like fetuses of straw, the rivers threaten to fade away and the dogs no longer bark. So, come back. If not, I will become like them. I want to remain whole like you. I want to continue to be your voice, your shadow, your excrescence, your blood, your splendid substance, your saliva, your hairy arms. I want to sing Burti `Aareey like you. I will wake up Fursheed, Aden Farah, Abdi Bow Bow and Qarshileh. I will call to the rescue Ahmed Naji, Hadraawi, Hamed La`de and Tima`adde, Nim`a Jama and Fadumo Ahmed. They have to play for you with me. I will spend my time proclaiming your name. I will fully embody your suffering. Here patriarchy has written everywhere (in letters of blood): "I am the future," with, as a warning, "If I go to hell, we will all go together". Siyaad is dead; he left us hell, as usual, before being buried in his village of Geedo. What a gentle leader! B.W.Andrzejewski, that eminent taster of our delicate languages, died yesterday in London. Amen! Everywhere there are bloodshot eyes spying on me. Everywhere blazing bodies that tell me, "Hush, child, sleep and leave the dead in peace". Come back father! Come back! If not, it will be my death. My life hangs by just a slender thread: I am terrorized. For ten days, I have been holding the great account book in my head: the seconds are piling up on the froth of the days; the minutes are coming down like flakes, one by one; the hours... Yes, the hours are congealing like mercury drops. The hours, wisely deaf, edge themselves eternally into the marble of my memory. Come back father, come back; if not, I am going to nestle myself in your lap - for always.

For a long time, we used to sup on hope, a lot of hope and euphoria, under a cloud of anxiety but without any critical or backward glance. That is, the hardest part is still ahead of us. Destruction up ahead, the cloak of night. Come back, father come back! The sun no longer ceases to be angry. Your star, the highest floor from which no one ever comes down, is distant. Tomorrow is black as ink, the horizon is just a line.

Life is a fabric made of dreams, the whip of laughter... a thought is something imaginary that one proposes to bring a little order to a big mess. All that remains is to create ... the sewing machine of dreams. Tomorrow is black as ink, but I do not want to leave. I do not want to scamper away, at least not today. One evening when the moon was made up like a geisha, you said to me, in a moment of premonition, these unforgettable words:

"You said: 'I will go to other countries, cross other seas; another town will be better than this one...' You will not find new countries or new seas. The town will follow you. You will wander along the same streets, in the same neighborhoods; you will grow old and turn white in these same houses. You will always arrive again in this town. Do not hope for the elsewhere - no ship for you, no path."² Wherever you go, whatever you do, you will carry your country on your back and, with all due deference to those who want to try and convince themselves otherwise, you cannot go into exile from yourself. This was your credo, I heard you. No matter how many years one spends abroad and whatever the charms of exile, nostalgia will smolder inside of you and the draw of the country is stronger than everyday temptations. Seduced and steeped in your words, I would drink them in. No, you did not know how to be enthused by big magic formulas like "tribal essence", "clan honor", "genealogical tree", or even "fatherland". "Your people" - who were they?


Where were they? You would always add doubt on doubt. Your abrasive life was well worth the high price you paid, mine has already

crumbled. I was told that, in your youth, you devoured virgins. You were ravenous for these bunches of young girls - rimmed mouths, cheeks of purplish petals, breasts swelling with desire, long eyelashes and eyelids open on almond eyes. Girls like poems, yes, with fruits growing in their armpits. In the beginning, there was this drop of milk that gave me life. Now I want to witness, hide nothing, make ring out, in memory and on the page, your sweet words and your oblong face. You remain my memory beyond the womb, the heady scent of your body-dry and unique. Come back, father, come back to glue back together the pieces of my nomadic notebook. I am in the process of writing your epitaph. Come back, your logic no longer terrifies me. I will no longer go and hide in the curtains of childhood, in the scorn of your patience. You who can wrinkle out thoughts, come back. I now speak the simple words of adults: to eat, run, die. My mother is more a shadow of a woman than a woman. I would prefer painting to writing in order to describe you, mother. But I have no paintbrushes and my grip on eloquence is uncertain. Does the result make any difference? I doubt it. His spirit slips away along the lines, it becomes absence, history. Should one approach it, surreptitiously grab it to diagnose its immense sorrow? A lost effort. Its trace breaks up, its gestures furtive as if fractured. A somber portrait, a landscape in monochrome. It has signed an armistice with the present and no longer speaks a word to it. Family with a military demeanor? Disappeared. No trace of it left in my brain. Time has passed. My memories are just turning to grey. All that remains is you. As long as there is questioning, there is hope, no doubt? If suffering could be exchanged for francs, I would surely be a millionaire. I clear my throat - my voice lacks timbre - and beg you once more: come back, come back. I stay close to your grave, I live next to it. I can describe it to you, for the clouds of crickets gather on top of it, while flowers tinged with blood grow from under it, dazing the ants that venture there. In a corner, an acacia,

falling apart with age, stretches up to chat with the forbidden moon. Its obstinacy gives me vertigo: does it hope, at its age, for a miraculous return to life? It must be mutual, for it turns away when it meets my eyes.

Notes

¹ This translation, by Lidwien Kapteijns, is based on an earlier one by Miriam Lee.
² "La Ville," by Constantin Cavafy, *Poems* (translated into French by Ange S. Vlashos). Athens: Editions Icaros, 1983.



Tala-Seeg (Sheeko gaaban)

Maxamed Daahir Afrax¹

Salal iyo argagax ayaan kala soo booday sariirtii an goor dhaweyd daalka kula gataa-dhacay. Waa maxay qayla-dhaantu! Ma run baa waxani mise waa riyo xun! Riyo xun oo ka dhalatay cabsida aan habeen kasta ku seexdo. Cabsi ay sii xoojiyeen ciyaala-suuq aan isaga taag la'nahay. Waa burcad da'yar ah oo madow u badan. Waxay nugu arkoodeen go'doonka iyo guriga ragla'aanta ah. Fursad ayay u arkeen aqal ay ku noolyihiin keliya qof dumar ah oo aan dalka u dhalan iyo gabadheeda yar. *Shakila'aan waa iyagii waxa caawana na soo weeraray. Alla bisinka, bisinka! ! Bal eega waallida ay albaabka u tumayaan! Mindbaa idinkama furo!*

Qurbuhu wuxuu i baray waligaa qof aanad garanayn albaabka ha ka furin. Xaafad ciyaala-suuq iyo xilli habeen ahna iskaba daa. *Kaalay ... ma cod dumar baa waxa albaabka ka qaylinayaa mise anaa moodey! Bal sug hadda an hagaag u dhageystee!*

"Alla balaanbalayeey! Alla gabbalkay dunyeey! Alla Maryaneey! Alla walaaley albaabka iga fur! Alla walaaley ii soo gurmo! Alla waan ba'aye iga soo gaadh!..."
Waa la ba'ay! Waaba Soomaaliyad! Tolow waa tuma tan i garanaysee magacayga ku barooranaysaa? Malaha badday oobinta joojin lahayd codkeeda waan garan labaa!

Baqdintii way iga duushay, beerkaase i ololay. Bustayaashii cuslaaye aan dhaxanta ka hoos galay ayaan ka soo dhex booday. Maqsinnadii dabaqa sare mid daaqaddiisa albaabka hore

laga arko ayaan is iri ka khaawis. Illeyn maan ogeyne baraf baaba malaasay. Balo ku degtey dhaxan badanaa! Shan iyo toban sano way dhaaftay muddadii ay i garaacaysey dhaxanta Yurub, welina waan la qabsan kari la'ahay. Malaha waxaan la gariirayaa waa weydnimada iyo cimriga is guraya. Mise waa diraca khafiifka ahe aaney waxba iiga hoosayn! Bustayaashii aan isku diirinayeyna waa tan iga soo salalisay.

Dhaxantase caawa waa la iiga daran yahay. Sow tan qofta dumar ihi dhegaha i dillaacisay. Sow tan baroorteedii cirka isku sii shareertay. Sow tan jiiraankii igu soo wada jeedisay.

"Qab qab qab!! Alla gabbalkay dunyeey! Qab qab qabab, Alla yaa ii islaan aheey! Qab qab qab qab, Maryaneey ku aaway!..."

Bisinkiyo yaasiinka! Malaha qofta waa la fara xumaynayaal! Dugaaggii kufsigu balwadda u abaa ayaa malaha aqalkayga bortiisa ku belay. Waa wixii habeen dhaweyd ku dhacay gabadba an dariska nahay. Baqdintii baa igu soo rogaal-celisay.

Maxaan u qaban karaa naftaydaan u baqayaaye. Reer aan rag lahayni xumaa ! Kuvii aan dhalaye ku soo rafaaday iyo kii dhalay midba dhankiisuu u dhaqaaqay. Bal eeg waxa ay na badeen !

"Qab qab qab.. Maryan. Tanna hurda-wey-nidaan ku nacay. Maryaan... Maryaaan!

Malaha tan yar baa dhaami lahayd..Ubox, Ubox, Ubaxey habaryar, iga fur albaabka! Habaryareey Bilan ma haysaa? Ubaxey habo, Bilan ma kula joogtaa? Alla ma Bilan dambaan arkayaayeey! Ma Bilan dambaan arkayaa ...!"

Alla bisinka! Waa Hufan Habbane! Waa saaxii-baddaydii reer Jabuuti! Musiibaa dhacday! Bilan-yar baa caawa la xaday !

Mar kalaa wadnuhu i gariiray. Qabandhacaa jirkayga wada saaqday. Mar quraan qoob iyo qaylo isku daray.

“I sug i sug i sug Hufaney, i sug walaaley hal ilbiriqsi, waa anigan soo ordayee”

Alla bisinka! Waa Hufan Habbane! Waa saaxiibaddaydii reer Jabuuti! Musiibaa dhacday! Bilan-yar baa caawa la xaday! Mar kalaa wadnubu i gariiray. Qabandhacaa jirkayga wada saaqday. Mar quraan qoob iyo qaylo isku daray.

“I sug i sug i sug Hufaney, i sug walaaley hal ilbiriqsi, waa anigan soo ordayee”

Sallaankii baan orod waalan uga dhaadhacay.

Mowjad hawaawi ah ayay maskaxdaydu igu furtay muddadii ilbiriqsiiga ahayd ee aan albaabka ku sii ordayey. Waxaa la i hor keenay meydki bilan oo meeshaad eegtaaba dhiig tahay!

Warku waa cadyahay ayaan ku hawaanijey. Waxaa helay ciyaala-suuqii habeen kasta telefshinka laga soo daayn jirey hablaha yaryare intay kufsadaan ka dibna sida foosha xun u dilaan, si aaney u ashtakayn. Tolow ma cidlay ka heleen markaasay silic u dileen! Silic Alla idiin dil! Ubaxdayda yar baa Muraara-diillac u dhiman doont!

Bilan waxay ahayd saxiibadda qura ee ay Ubax la ciyaarto. Iyaday ugu jeclayd carruurta da'deeda ah. Walaalo iyo ehel kale midna uma joogaan dalkan Ingiriiska. Shalay oo idil waxay ku mashquulsanayd xulidda iyo iibinta hadiyadda ay Bilan siin doonto xafladda toddoba-jirsigeeda oo ku beegan Sabtida berrito. Waxay ku dadaalaysey inaaney ka yaraan hadiyaddii Bilan keentay laba bilood ka hor xafladdii siddeed-jirsiga Ubax.

Hawaawigaas oo maskaxdayda gilgilaya ayaan albaabkii hal-haleel u furay.

“Maxaa dhacay Hufan? Sidee wax u dhaceen?” Sidi wax aan codkayga maqlayn bay xawli waalan igu jiidhay. Qoobkiyo qaylada, qalalaasaha iyo oohinta, dheg la qabto ma leh. Dariskii noo dhawaa daaqadahay naga soo wada eegayaan, qof soo dhaqaaqayaase ma jiro. Bal eeg dadkan aan dhawr iyo tobanka sano dariska ahayn welina eray qudha aanaan is weydaarsan!

Hufan sallaankii bay orod miyir la'aaneed kor iigu dhaaftay. Aqalkii bay fatashaad ugu dhaqaaqday sidii aan anigu Bilan xaday! Qolkii Ubax ayay ka bilowday.

“Ubaxey habo, Bilan meeday? Habaryarey

Bilan ma kuu timid? ayay toban jeer ku celcelisay sidii wax aan maqlayn “maya”-da ay ku celcelinayso Ubax oo durba argagaxday.

Hufan waa garteed inay is madax marto. Laab-gaddoonka ay la muraara dillaacdo hooyo kastoo ubadkeedii weydey waa wax la iska filikaro. Hufanse dhibaato kalaa u sii dheer. Booghore ugu tiil bay naxdintani dillaacisay. Bilan waxay ahayd rajada keliya ee ay Hufan u nooshahay. Waa korinteeda oo qudha waxa ay ugu adkaysato kadeedka qurbaha, kallahaaddiyo dhaxanta, keli ahaantiyo busaaradda. Waa wehelka qudha oo uga soo haray xubnihii qoyskeeda.

Afartii ay dhashay inankii ugu weynaa dalkii buu uga haray berigii iyada laga kari waayey “Yurub baan u dhoofayaa macaa ubadkayga.” Wuxuu ku adkaystay in aanu ka tagin shaqo uu xiisaynayey oo uu maalmahaas ka helay Ciidanka Jeenda Armaariiga caasimadda Jabuuti. Waxay ahayd shaqadii ugu horreysey ee u soo baxda ka dib markuu ka qalin-jabiyey Dugsiga Xumbuli. Saaxiibbadiisa shaqala'aanta ah way ku cawryeen dhakhsaha uu shaqada u helay. Waxay kula kaftameen “waar sideed shaqadan ku heshay, aanu annagu weyney? Ma adeerkaa baa sarkaal sare ah?”

Wiilkii ku xigay, uguna weynaa ubadkii Hufan la qaxday, asagoo galab galbaha ka mid ah aqalkooda hortiiisa kubbad ku ciyaaraya ayaa waxaa soo weeraray burcad da'yar ah oo middiyo ku hubaysan. Waxay bilaabeen inay ka xoogaan telefoonkiisii gacanta iyo lacag yar oo uu haystay. Geesi buu ahaaye wuxuu isku dayey inuu hantidiisa difaacdo. Tobankoodiiba sida shinnida ayay ugu soo xoomeen. Middiyo waaweyn bay la soo wada baxeen. Intay dhulka dhigteen bay cad-cad u googooyeen!

Gabadhii kusii xigteyna markay dhawr iyo toban jir gaadhey ayay faraha ka baxday. Waxaa tartiib tartiib u duufsaday ciyaal-suuq u badan Kariibiyaan iyo garacyo iska-dhal ah. Wiil Jamaykaan ah oo ay isku dugsi ahaan jireen, markii dambase tacliintii ka saaqiday, ayaa intuu saaxiibad ka dhigtay fusuq oo dhan baray. Wuxuu ku sii xiray asxaabtiisii kale ee dugsiyada ka wada saaqiday. Gabadhii yarayd in yar in yar ayaa looga gooyey hooyadeed iyo aqalkoodii.

Waxaa la baray maan-dooriyeyaal iyo dhafar joogta ah oo ay aqalkooda ka dhaxdo. Waxaa laga saaqidiyey tacliintii. Af-Soomaaligii in yar inyar ayay u illowday. Hooyadeed way u taag weydey. Waxaa ka tan badiyey dagaalkeedii, afla-gaaddadii ay ugu jawaabeeysey “iga aamu islaanyahay badawiyadda ahi” iyo boliiskii ay mararka qaar ku ashtakayneysey. Haseyeeshee waa hooyoo kamay quusan. Quraan-saar iyo qardhaas-u-goyn bay weli la daba joogtaa. Markay aqalka timaaddo way ku faraxdaa soona dhaweysaa. Ceebaheeda badi dadka way ka qarisa.

Maadaama tii weyneyd sidaa uga fara baxday tan yar bay ku mintiddaa, is jeclaysiisaa, aad u koolkoolisaa, af-soomaliga ku khasabtaa, carruurta ajnabiga ka ilaalisaa. Amaanteeda ayay ku wareerisay aniga iyo dumarka kale ee ay la sheekaysato. Labadii eray ee ku tiraabtaba mid baa ‘Bilan’ ah. Waxaas oo dhaawac ah iyadoo qabta ayaa Hufan loo sheegay odaygeedii ay Jabuuti kaga timid inuu naag kale aqalkeedii ku guursaday! Waalli bay ku dhawaatay. Warqaddeedii bay ka dalbatay. Anigaa isku dayi jirey inaan yare qaboojiyo. Muraara-dillaacaas iyadoon weli ka bogsan waa tan caawana musiibadani ka dul dhacday.

Hufan waa qof aad u fudud, aad u qalbi nugul, aadna u ubad jecel. Carruur-jeclideedu waa xad-dhaaf. Tacliin dugsi hoose may dhaafin, waase qof aad u maskax furan aadna u firfircoon. Way madax adagtahay wayse qalbi wanaagsan tahay. Beenta iyo laba-wajiilenimada way neceb tahay. Marka ay caadiga tahay waa qof bashaashad ah, aad u qosol badan, aad u sheeka macaan. Maantoo dhan ka ag dhaqaaqi maysid. Waxaan aad uga helaa heesaha cajiibka ah ee ay ii qaaddo marka aan qayilayno. Waxay leedahay cod aad u macaan. Waxaan iraaahdaa ‘naa maad fannaanad iska noqotid.’ Xilliyadaa ay faraxsan tahay waxaa soo dhalaasha quruxdii ay u dhalatay, haseyeeshee la duugowday darayada qurbaha, duxla’aanta cidlada iyo da’da cimrigu is gurayo.

Iyadaa sabab u ahayd inay noqoto saaxiibad-dayda koowaad. Waxay ii tahay wehel aan iska dugsanno xaafaddan aan wada dagganayn san-nadaha faraha badan. Waxaan iska weheshannaa

wareerka qurbaha iyo walbahaarka ragla’aanta. Waa tan noo geeysey qaadka iyo sigaarka. Labadayadaba waxaa na baray dumar halka nooga soo horreeyey noogana waaya-aragsan nolosha caynkan ah iyo *singal maada*-nimada.² Waxay samaysteen majlisyo ay ugu barjeeyaan kooxkoox dumar ah. Waxay nugu waaniyeen “naa iska qayila oo isku dhaafiya dhaxanta iyo habeenka dheer, haddii kale waad ku waalan doontaan qurbe iyo ninla’aan, sidii ku dhacday hebla iyo hebla.”

“Naa walaalay ii soo jeeso oo ii sheeg sida wax u dheceen!” ayaan kaga daba qayliyey Hufan oo weli baroortii iyo balash-balashtii aqalkayga kula rafanaysa. Marba qol bay ku fara baxsanaysaa. Sidii wax waalan bay u fatashaysaa. Xataa armaa-jooyinka iyo kabadhada dharka Bilan bay ka dhex daydayaysaa.

“Naa Hufan, naa walaaley in yar is dajiyoo ii warran” ayaan ku celceliyey. “Goormaa kuugu dambeysey gabadhii? Ma dukaan-Hindigaad wax uga dirsatay? Boliiska ma telefoonaysay? Nayn-naynka ma wacday? Walaaley ila hadal!” Miyir ay igula hadashaa ma jiro. Musiibada gabadha la xaday waxaa iiga sii daran maskax-wareegga islaanta waalatay.

Sidee war buuxa uga helaa!

Ugu dambayn waa tan isku dayday inay ii jawaabto. Waxay ii sheegtay inay gabadha yar keligeed aqalka kaga tagtay, ka dib markay cashaysiisay. Hufan waxaa dhibaato ku haya waraaqo ciiddaa ka badan oo maalin walba looga soo rido daloolka albaabka. Waxay u badan yihiin xayaysiis iyo lacag-doon. Afka Ingiriiska ee ay ku qoran yihiin ma ay fahmayso. Marmar wixii muhiim ula muuqda waxay la doonataa dad afka ku dhaama. Sida badanse intay isku xaabiso ayay ku tuurtaa kudaaafadda ama qashin-qubka. Waxay ku war-heshaa adeeggii ay ku noolayd oo laga jaray. Biyihii, gaaskii ama korontadii oo la goostay. Mararka qaarna waxaabay ku argagaxdaa askar loo soo diray oo maxkamad uga yeeraysa ama xabsi ku handadaysa. Markaa uun bay ogaataa in muddo dheer loo soo dirayey waraaqo is daba-joog ah. Waraaqo ku bilowda

'intaas oo lacag ah iska soo bixi'. Waxaa ku xiga digniin hore, digniin dhexe, digniin kama dambays ah, dacwad maxkamad looga yeero, iyo markay iman weydo oo dambiiley lagu xukumo. Waxaas oo dhan war uma hayso ilaa loo soo diro boliis taxaaba ama baabuur waaweyn oo loo keenay in looga rarto wax alla wixii aqalka u yaal, macaa dharkeeda iyo sariiraha.

Saddexdii cishee u dambeysey maalin oo dhan waxay ku maqnayd maxkamad iyo u baryootan in loo soo celiyo biyihii iyo korontadii laga goostay. Caawa fiidkii markay soo noqotay waxay timid aqalkii oo ay ka wada dhammaadeen wixii la cuni lahaa. Waxay haab-haabatay kolaygii ay ku dooni jirtey raashinka toddobaadka. Gabadha yar hadday sii kaxaysan lahayd dhaxanta xad-dhaafka ah ayay uga baqday inuu ku sii xumaado hargab ay si xun ula qofacaysey. Intay sasabtay, saddex jeer dhunkatay, filin carruureed u shidday ayay ku carartay dukaan-weynihii cuntada oo ku yaal meel aqalkeeda ka fog. Hadday soo noqotay aqalkii waa hungo madow!

"Bilan, Bilan, Bilaaaaan!" ayay qaylo cirka ku shareertay. Bilan markay weydey waa tan marada tuurtay. Waa tan qoob iyo qaylo cagaha wax ka dayday. May xasuusan xataa inay gashato kabihii iyo koodhkii ka difaaci lahaa dabaylaha barafka wata iyo dhaxanta Disember.

"Walaal boliiska ma u sheegtay?" ayaan weydiiyey, mar ay oohin soo dhaaftay hadalkii ka xidhay.

"Boliis aa? Boliisna ma jiree warkooda iga daa baraka-laawayaasha midab-takoorku indha tiray. Dhibaato ay kaa caawiyaan daaye toodaan laga ammaan helayn. Ciyaala-suuqii Buux dilay mid-mid bay u garanayaan. Iyagoo sidaa u arkaya ayay afar luuq ka duseen. Shan daqiiqo kuma qaadateen inay qabqabtaan ama imminkaba soo xidhaan, ee se ma doonayaan. Waxay isku darsadeen xasad iyo fuleynimo ay lafahooda u baqayaan! Maryaney cadow baan u jabnay!" Oohin soo dhaaftay ayaa mar kale hadalkii ka hakisay. Xasuusta wiilkeedii la dilay ayaa umal hor leh ku kicisay.

Sidii ilmo yar iyo waalidkood ayaan mada-xeeda laabta ku soo qabtay. Waxaan isu raaciyey

tacsiyayn iyo sasabid wixii afkaygu haleeli karey: "Walaaley Ilaahay wuxuu keenaba waa loogu samraaye, Buux Ilaahay samir iyo iimaan ha naga siiyo. Boliisnaan waa runtaayoo barako ma leh, laakiinse kolley haddana lagama maarmayee, wax yar i sug anaa wacayee!"

Boliiskii markaan wacay arrintiina u sheegay anigii bay su'aalo igu wareeriyeen. Ugu dambayntii waxay amar ku bixiyeen inay Hufan si degdeg ah isaga xaadiriso saldhig boliis oo ay magiciisa iyo cinwaankiisa i siiyeen.

Saldhigga oo naga fog intii aan ku sii soconney waxaan sii wadney hadalkii iyo baroor-wadaaggii. "Maryaneey, waxaan oo dhan anigaa cagahayga ku doontay. Wax aanan isu geysan cid kale iima gaysan..." Hufan baa ku calaacashay.

"Walaaley waa maxay waxa aad adigu isu geysatey?" ayaan weydiiyey anigoo jawaabta iska garanaya.

"Huunno, sow anigu cagahayga kuma soo doonan meel-baastan! Tala-xumadaydaa qurbe iyo qaxootinimo i badday. Anigaa iska kala daadiyey nimcadii iyo sharaftii aan dalkayga ku haystey. Waa taan in badan kaaga sheekeeyey. Waxaan ahayn qoys dhisan oo nolol wanaagsan ku nool. Aniga iyo odaygayguba shaqo wanaagsan ayaan haysaney bay ahayd. Ubadkayaguna iyagoo faraxsan ayay noo wada joogeen oo tacliin ku jireen. Magaaladooday halkay doonaan mushaaxayeen, iyagoon baqdin looga qabin in la dilo ama la xado ama la kufsado. Waxaan ahaa qof sharaf leh oo Hufaneey-da la hayo. Afar qof ayaa ii shaqayneysey. Maantana waad aragtaa bacaha aan saqda dhexe dhaxanta marba dhan ula cararayo..."

"Walaaley haddaas maxaa ku waalay, adigoo waxaas oo dhan ku haystey dalkaaga hooyo?"

"Huunno naagaa i waalay."

"Naago caynkee ah?"

"Qaar an ducaysnayn oo dalkan iiga soo horreeyey ayaa ii harga-lulay. Gaar ahaan tu laga caqli badan yahay oo aan Jabuuti saaxiib ku ahaan jirney ayaa i waashay. Way i hiyi kicisay siday marba intay koodhadh waaweyn ii gashato iigu soo diraysey taswiir ay isu ekay-

siisay naag caddaatay oo kulaylkii Jabuuti ka raysatay. Waxay igu waashay 'naa maxaad ka qabanaysaa meeshii kulaylka badnayd, Yurub nimcaa taale ka soo gaadh intaan qaxootinimada la joojin!"

"Qaxootinimo aa!" ayaa iga soo boodday intaan hadalkii ka kala gooyey anigoo ku tala galin. Erayga 'qaxooti markay ku tiraabtay ayaa waxaa i damqaday daqarradii iga soo gaarey nololasha qaxootinimada.

"Walaaley maxaad kaga soo ordeysey qaxootinimo aan Ilaahay ku badin, adigoo nolol sharaf leh ku haystey waddankaaga oo maanta ah dalka ugu xasilloon oo ugu nabadgelyada badan Afrika? Aniga oo kale waaba la ii garaabi karaa oo naf-lacaari ayaan kala soo cararay nabadgelyo la'aanta iyo nolol la'aanta dalkaygii lagu burburiyey dagaalka sokeeye. Jabuuti qudheeda waa loo garaabi karaa ruux dhalinyaro ah oo dalkiisa shaqo ka waayey ama tacliin-kororsi u baxaya. Laakiinse qof dumar ah oo hooyo ah, oo dalkeediyo ciiddeeda cisi iyo nolol iyo nabad intaba ku haysata, inay intay nolosheedii iska kala tuurto ee qaxootinimo u qarda-jeeexo, waa runtaaye waa tala-xumo la yaab leh."

"Huuunno, ubadka ayaa la igu yidhi waxay Yurub ka helayaan tacliin Jabuuti ka wanaagsan, oo waliba bilaa lacag ah, iyo daryeel caafimaad oo heer sare ah oo isna bilaa lacag ah."

"Dad horaa yiri 'laaca aragtaye luunta ma ogtahay!'"
"Luunta maan ogeyn ilaa aan ku dhacay! Waa adiga arkaya ubadkii aan la soo cararayey aayohoodu halka uu maanta yaal. Aabbohoodna asagoo khiyaanada aad maqashay igu sameeyey oo aqalkaygii naag kale ku aroosay ayuu waliba habeen iyo dharaar aniga eedayn ila daba taagan yahay. Qofkuu arkaba wuxuu ka yidhaa 'naag waalan baa ubadkii iga galaafatay, anigana talo iga maqli weydey oo cidlay igaga dhaqaaqday! Umal hor leh ayaa hadalkii ka xiray. Aniguna murugadii oo ay i saaqdsiisay ayaan hoos ula jeestay.

"Wallaahi waa dhibaato!" ayaan cod hooseeya ku iri markaan garan waayey wax kaloo an iraaqdo. "Huuunno waa inkaar. Waa cuqubo. Waddankaygii aan ku caasiyoobay cuqubadiisii ayaa iga daba timid. Calooshaa i xanuunta markaan xasuusto caqli-xumadii aan ku hadli jirey..."

"Maxaad oran jirtey?" ayaan weydiiyey si aan u dhiirri-galiyo.

"Marka odaygaygu iga yidhaahdo 'naa naga fadhiso oo naga daa dhoofkan iyo xasaradda aad nugu wareerisay. Bal waa kane maxaa kaa maqan?' waxaan ugu jawaabi jirey 'guddaafad Yurub ku taal anigoo ku noolaada ayaa ii dhaanta nolosha Afrika iyo Jabuuti. Iska joog adigu haddaad diidday inaad na raacdo, anigu waan socon, ubadkaygana waan kaxaysan."

"Istaaq-furullah! Alla waalley waa nabsigii!"

"Waa nabsigii waxa i haystaa" ayay iga daba tiri. "Tan kaloo la igu ciqaabayaa waa beentii aan shubayey qoftaydii an afkeeda hore looga maqal eray been ah."

"Walaal ayaad u sheegtay beenta?"

"Alla iga aamus Ilaah baan been u sheegaye. Waxaan ka been-sheegay nimcadii uu Ilaahay dalkayga igu siiyey, halkii ay ahayd inaan ku xadiyo."

"Goormaad beenta sheegtay Hufaney?"

"Naa dee cishadii an is dhiibayey dadkii baase ila talinayey sow igumay odhan si qaxootinimo laguugu aqoonsado, Jabuuti ha sheegane Soomaaliyaan ka soo cararay dheh!"

"Alla haa, beentii loo dhoodhoobi jirey Wa-saaradda Arrimaha Gudaha"

"Waxay iga yidhaahdeen naa waxaad tidhaahdaa waxaan ahay reer Muqdisho, waxaan ka dhashay qolo la cadaadiyo oo la yidhaah...Alla muxuu ahaa magacoodii ... haa, Midgaan. Midgaan baan ahay dheh. Odaygaygii iyo inan aan dhalay waa la dilay, aniga iyo inantayda weyn waa nala kufsaday, balo iyo baas oo idil."

"Waxaas oo dhan miyaad ku andocootay?"

"Iga aamus baan ku idhi. Markaan xasuusto beerkaa i belbela. Waxaasoo been ah iyo waxaas oo balaayo-saadsii ah ayaan cishadii wax la i weydiiyaba daldalayey, anigoo murugo aan i ahayn iyo oohin riwaayad ah iska doondoona."

"Waa rune, waa waxa dadkoo idil sameeyaane"

"Wax kasta waxaa igaga daran ubadkaygii yaryaraa ee aan weligayba ku barbaarin jiray in aaney kalmed been ah sheegin ayaan walaalay waxaan xafidsiiyey waxaas oo been ah. Waxaa

iigu darrayd cishaduu inankaygii isagoo yaabban i weydiyey 'hooyo sow taad waligaaba iga odhan jirtey beenta Ilaah baa kugu cadaabayee been ha sheegin, sideed imminka ii leedahay waxaas oo been ah sheeg? Miyaan la igu cadaabayn?' Walaaley markuu inankii yaraa sidaa ii xujeeyey, wax alla wax aan ugu jawaabo intaan garan waayey ayaan kaniifka ku cararay; suuliga ayaan ku dhuuntay si aan uga qariyo ilmo indhahayga soo dhaaftay!"

"Walaal waxaas iyo wax ka sii daranba waa wax aanu soo wada mamay giddigeen." Ayaan hadalkii uga dhex galay, anigoo isku dayaya inaan u calool qaboojiyo, markaan arkay sida ay nafteeda u hiifaysa, "Ma aha wax adiga kugu gaar ah. Waa wax ay dantu ina badday. Marka aad naftaada badbaadinayso wax kastaa way kuu bannaan yihiin."

"Dee haaye walaal, adiga waa runoo dan baa ku badday, ee se aniga dan i badday ayaan jirin. Waa aniga ku leh Ilaahay nimcuu i siiyey, kolkaasaan intaan iska kala daadshey hadana waliba ka abaal-dhacay oo ku andocooday dhibaato been ah oo aan Ilaahay ii keenin. Waa taas tan aan maanta la gubanayo. Waa taas tan nabsigeedu i hayo. Balaayadii aan anigu saadsaday ayaa imminka run ahaan iigu dhacday. Dilkii iyo kufsiggii iyo rafaadkii beenta ahaa ee aan saadsaday waa kan maanta na haysta, anigiyo ubadkaygii. Beentii aan ku andocooday inankaygii baa Muqdishu lagu dilay waxay noqotay in Buux London lagu dilo, dharaar cad aqalka hortiiisa, anigoo sidaa u eegaya Alla walaaley anigaa dilay...! Sa..saa.... saadaashaydii xumayd baa dishay Buux.. aaaa!" oohin bay af labadi yeedhay. Intaan madaxa u salaaxay, anigoo qudhaydu tiiraanyasan, ayaan ugu tacsiiyeyey:

"Walaaley qaddartaa sidaa ahayde naftaada canaanta badan ha ku caddibin. Wax kastaa way iska qoran yihiin, wixii Ilaahay keenana waa loo samraa. Ilaahay baa cawil khayr qaba ku siin doona, dhibaataadana waa laga bixi doona."

Waxaan hor fadhinnaa saldhiggii boliiska. Safka baas dheeraa! Dadka naga horreeyaa

badanaa. Intooda badan arag xumaa! Wax meel kasta ka daqran oo wajiga dhiig da'ayo, wax sakhrad iyo mukhaadaraad la dhacdhacaya oo buuq iyo qaylo nugu wareeriyey, wax baroorta iyo balaayada ay sheeganayaan taayadii i qarso noqotay, wax waliba way joogaan. Waxaan sugnaba waa tan loo yeeray Hufan Habbane.

Laba sarkaal oo waji xun iyo turjumaan la socda ayaa qol hoosta uga soo xirtay. Aniga way ii diideen inaan la galo xafiiska. Saacad dhan markay la maqnaayeen waa tan soo baxday Hufan oo cagaha jiidaysa. Wixii dhacay bay iiga warrantay. Waqtiga intiisii badnayd iyada uun bay intixamayeen.

Hufan Habbane ma ahayn qof ku cusub saraakiisha boliiska London. Hore ayay isugu naceen ashtakooyinkii iyo mashaakilkii inanteeda weyn. Waxay ku dhaliileen inay tahay hooyo qeyru-masuul ah, hooyo aan lagu aammini karin masuuliyadda ubadkeeda. Waxay ku eedeeyeen inay inantii weyneydna ka carartay markay u adkaysan weydey dhibaataadeeda, tii yaraydna ay khatar ku gashay tacaddi iyo daryeel la'aan ay ku dacadarraysay.

Weerarkaas iyo eedayntaa dabadeed, ugu dambayntii waxay u sheegeen war wanaagsan. War ay qacdii hore farxad la soo boodday, utuntiina ka fuqday! Waxaa loogu bishaareeyey Bilan inay nooshahay! Waxaa loo sheegay inaan la dilin lana kufsan, inay iyadoo nabdoon joogto meel ay boliisku ogyihiin. Intaasi markay dhegteeda ku dhacday ayay Hufan kursigii kor uga boodday. Iyadoon is-ogeyn ayay afka furatay: "Walaalow meeday Bilan, dambigaaga iyo kii waalidkaaba Allaha dhaafee!" ayay cod aad u dheer kor ugu tiri sarkaalkii u warramayey. Ninkii caawoo dhan ula ekaa waraabe dad-cun ah ayaa mar qura wuxuu la yeeshay muuqaal malaa'igeed.

Hayeeshee muuqaalkaasi ma noqon mid sii waara. Markuu sarkaalku sii hadlaba waxaa sii guraysey farxaddii Hufan la soo boodday. Wuxuu u sheegay inay boliisku ka war heleen gabadha yar ee ay keligeed aqalka uga tagtay, iyadoo hore loogu sheegay arrintaasi inay tahay ku tumasho bareer ah sharciga dalka u yaal.

Wuxuu u sheegay inay dabeedna boliisku aqalkii tageen gabadhiina soo qaadeen. Waxay geeyeen Xarunta Adeegga Bulshada. Waa haya'dda xannaanaysa carruurta aan waalidka lahayn iyo kuwa waalidkood laga qaado ka dib marka ay ilmaha dhibaato u geystaan.

Hufan mar labaad bay muraara dillaacday. Waxay isku dartay qaylo iyo baryootan. Dagaal afka ah iyo muran badan ka dib Hufan markii dambe waxay ku baryootantay bal in horta inanteedii la tuso, si ay u hubsato inay nooshahay oo nabad qabto. Sarkaalkii la doodayey jawaabtiisii kama-dambaysta ahayd waxay noqotay: "Marwoy, ha is daalin. Bilan dib dambe ma arki doontide adigu u diyaar garow maxkamad lagugu weydiin doono sababta aad sharciga u jabisay ee gabadha yar cidlada uga dhaqaaqday. Waliba waan la soconnaa inay arrintaasi tahay mid aad caadaysatay, inaad habeen kasta intaad inanta yar aqalka ku xidho xaafado kale u tumasho tagto!"

Dib waxaan ka ogaannay dhibaatan inay keentay naag Ingiriis ah oo ay Hufan daris yihiin. Waa qof dabeecad xun. Waxay ka mid tahay dadka lagu beeray nacaybka muslinka ka dib wixii maraykanka ka dhacay kow iyo tobankii Sebtember. Marka ay aragto Hufan oo xijaab gashan ayay si xun u huruuftaa, mararka qaarna hadallo xun ku tuurtaa. Markii dambe waxaa ka dhex qarxay dagaal afka ah. Tan Ingiriiska ahi waxay Hufan u miistay cay fool xun. Waxay ku cayday inay tahay dagaag waddankooda dawarsi u timi, markii cunto iyo hoy la siiyeyna aan laga ammaan helayn ee argagixisanimo iyo xumaan u maleegaya. "Bal eeg arag-xumada iyo jilbaabyada foosha xun ee aad ku disheen bilicdii iyo labbis-wanaaggii dalkayaga!" ayay u raacisay. Hufan way leedahay aftahannimo ay naagta isaga celiso. Hayeeshee waxaa ciilay afkii ay isaga celin lahayd. Waxay ku cayday af Soomaali aan cidii la fahmayn waxa ay sheegayso.

Naagtaas ayaa markay aragtay Hufan oo xilli habeen ah kolaygii adeegga sii jiidanaysa markiiba ka gaarsiisay talefoon ay boliiska u dirtay. Waxay

u sheegtay inay maqlayso oohinta gabar yar oo dariskooda ah oo hooyadeed cidla uga tagtay. Waxay u raacisay gabadhaas hooyadeed inay tahay naag qeyru-masuul ah oo habeen kasta intay gabadha yar aqalka ku xidho iska tumasho tagta ilaa waaberiga.

"Gaashaas xun ee xaasidadda ah ayaa Ilaahay i daba dhigay!" Hufan baa ku calaacashay. "Dhul aan lagaa doonayn xasad badanaa! Ciidda ku diidaysal!" "Hufanay nin kastaa waddankiisa uun buu cisi iyo sharaf ku leeyahay."

"Walaaley taas berigii hore waan ka indha la'aa, maantase qurbaha ayaa indhaha ii furay. Qaxootinimo ayaa i tustay qiimihii waddankayga. Cishadii an baasaboodhkayga googoynayey waxaan is lahaa Jabuuti dambe uma baahan doontid. Maantana salaaddii an tukadaba Ilaahay waxaan ka baryaa Ilaahayow mar uun cagaha ii saar ciiddii dhulkayga! Dhagxaanta iyo cammuuddaan dhunkan lahaa, dib dambena ugama fuqeen!" Haddana waxay raacisay, iyadoo codkeedu oohin kadis ah la googo'ayo "laakiinse maxaan kula noqdaa Jabuuti, aaway ubadkaygii an kala imid! Waa taas tii u dambeysey caawa cadowgu iga fara-maroojiyey!"

"Walaaley niyadda ha iska xumayn. Ilaah idanki waynu kaga guulaysan doonnaa maxkamadda," ayaan Hufan niyadda ugu dhisay "Looyar wanaagsan oo garyaqaan ah ayaynu qabsan doonnaa, Ilaahayna waa nala garab gali doonaaye niyaddaada khayr u sheeg. Ilaah baa nooga hiillin doona xaasidka. Insha Allah Bilan waynu soo ceshan doonnaa, shakila'aan, Ilaah idanki!"

"Insha Allah yaa Rabbi!" ayay ku alla-bariday, iyadoo gacmaha iyo indhahaba kor u taagaysa, wajigeedana yididiilo soo gashay. "Ilaahayow waad i aragtaa! Miciin aan adiga ahyn maanta maan haysto! Rabbigayow Bilan ii badbaadi, la'aanteed nolol dambe iima hadhsanee!"

Dhammaad.

1. Waxaan u mahad celinayaa saaxiibbaday, Cabdalla Xaaji, Maxamed Cabdillaahi Riiraash, Nimcaan Cabdullaahi iyo Muumin Xuseen, kuwaas oo intii aan sheekadan qorayey igu kordhiyey fikrado iyo xog muhiim ah.

2. Singal maada (single mother) waa omah can ku ah qurbaha. Waa hooyada keli ahaanteed korsi carruur ay kala tageen aabbohood. Dumarka gaarobka ahna Soomaalidu way raaciyaan.

Hayb-Doon

(*Riwaayad gaaban*)

Muumin Xuseen Cabdi*

Riwaayaddan gaaban ee uu curiyey Muumin Xuseen waxaa afka Faransiiska ku soo bandhigay ardayda dugsiga Charles de Fancald; ee ku yaal magaalada Jabuuti. Waxay qayb ka ahayd barnaamij-dhaqameedkii weynaa ee lagu beegay xuska Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo, kaas oo Naadiga PEN iyo Gobolka Cali-Sabiix oo iskaashanaya ay ku qabteen magaalada Cali-Sabiix, 21 - 22^{kii} 2007. Waxaa af Soomaali u tarjumay tifaftirayaasha HALABUUR.

Shakhsiyadaha Riwaayadda:

- Mahad:** Nin macallin ah.
Sahra: Afada Mahad.
Saada: Mahad iyo Sahra inantooda.
Diiriye: Mahad aabbihi.

Muuqaal

- Diiriye** [*oo xilli habeen ah boogasho ku imanaya aqalka inankiisa Mahad. Waxaa fadhiya Mahad, Sahra iyo Saada*]: Assalaamu calaykum! Bal warkiina i siiya. Ma la wanaagsan yahay?
- Sahra:** Soo dhawow, aabbo. Waa la fiicanyahay dhammaan.
- Mahad:** Wa calaykum assalaam, aabbo. Ilaahay uun baa naga wanaagsan. Bal adigu nooga warran caafimaadkaaga?
- Saada:** Allah, waa awoowo Diiriye. Soo dhawow, awoowo.
- Diiriye:** Hubaal waa saacad aad u dambaysa; wakhtigan laysma siyaarto ee arrin aad iyo aad iigu wayn oo ii diidday hurdo ayaan idiinla socdaa.
- Mahad:** Soo fadhiiso, aabbo, bal arrintaa culus aan ka wada hadalnee.
- Diiriye:** Ma run baa dugsiga inaad ku ciqaabtaan arday hadduu dugsiga dhexdiisa ku hadlo afkiisa hooyo?
- Mahad:** Haa, aabbo! Xeer baa diidaya in ay ardaydu ku sheekaystaan af guri dugsiga markay joogaan.
- Diiriye:** Af guri yaa! Ma afka hooyaad ujeeddaa?
- Mahad:** Xeer hoosaadka dugsiga ayuu ku cadyahay in la ciqaabo ardayga lagu maqlo isagoo ku hadlaya af guri, amma afkiisa hooyo. Waa xeer! Ma anigaa dhigay? Waan fulinayaa uune.
- Diiriye:** Tilmaamaha aan ku jecelahay ninka rag ah waa: fahmada, daacadnimada, geesinimada iyo qalbiga hufan ee, aabbo, Ilaahay baan kugu dhaarshee, bal ii sheeg waxaad ka qabto adigu xeer-ku-sheeggan.
- Saada** [*oo calaacalaysa*]: Awoowo, xeerkan aad ka hadlaysaan aqalkan ayuu ka dhaqan galaa oo lagu tixgaliyaa.

- Diiriye:** Yaa! Subxaan Allah! Ayaan darrooy kaalay! Waar bal masiibadan eegal! Ma anaan garan. Waa dhagar loola jeedo sawraceenna, dhaqankeenna, dhaxalkeenna, iyo sooyaalkeenna, dhagar laga galayo wadajirka iyo wada noolaanshaha dadka iyo afafka.
- Mahad:** Aabbo, is deji. Haddaad doonaysid ra'yigayga iyo fikradda runta ah ee aan ka qabo, xeerkan baa in sidaa la yeelo qoraya. Hadday ardaydu af gurigooda ku hadlaan waxay ila tahay afka Farasiiska si fiican uma baran doonaan, oo dee afka faransiiska af ka qurux badan oo aynu ku doorsanno miyaan leenahay?
- Sahra:** Af kasta wuu la qurux badan yahay ciddii ku hadasha.
- Saada:** Afkaaga caano lagu qabay, hooyo! Waa runtaa.
- Diiriye:** Hadalkaagani wuxuu i xasuusiyay macallinkaygii oo Faransiis ahaa oo kolka aan ku yar qaylinno nagu odhan jiray 'inaan idinkoo kale waqti iskaga lumiyo may ahayn. Wuxuu ku celcelin jiray sidee la idiin barbaariyaa oo aan idiin ilbixiyaa. Waxaan idiin keennay dhaqankii wanaagsanaa ee Faransiiska aqoontiisii dhaxalgalka ahayd iyo afkiisii caalamiga ahaa! Weliba waxaan idin ku sharfinnay inaan awoowayaashayadii Goolwaaga la odhan jiray aan awoowyo idiinka dhignay. Halkii aad nooga mahadniqi lahaydeen waxaad noqoteen abaal-gadayaal, mararka qaarkoodna amarkayaga diidaya nana aflagaadaynaya, idinkoo af jaan oon la garanayn ku hadlaya.
- Saada:** Oo ma sidaas ayuu gumaystuhu u fikiri jiray?
- Mahad:** Afkan Faransiisku waxa uu ka mid yahay afafka ugu quruxda badan, ugu suugaan hodansan, uguna xeesha dheer. Waa afkii ay ku hadli jireen raggii ahaa maskaxda adduunka, sida Voltaire, Rousseau, Corneille iyo Molière. Afkani wuxuu mudanyahay in si weyn loo tixgaliyo lana koryeelo. Waayo, marka hore waa dariiqa guusha loo sii maro, tixgelin bulsheed iyo tu adduunyaba lagu hantiyo.
- Diiriye:** Waxan aad leedahay oo dhan midna kuguma diiddani, haseyeeshe, jacaylka aad afkaa u qabtid, ma waxa uu kugu khasbayaa inaad diiddid jiritaanka afkaaga hooyo iyo dhaqankaaga? Sidey ku dhacday inaad af dad kale sidaa u weynesid, kaagiina wax aan qiima lahayn ka soo qaaddo. Anigu ma garanayo sida laguugu beeray necbaanshaha intaa le'eg ee lagugu nacsiiyey wixii adigu aad lahayd.
- Mahad:** Necbaansho maaha ee aqoontayda barenimo ayaa i faraysa inaan carruurta aan waxbaraynno ka ilaalinno jahawareerka afafka isku malaagmaya, si ay afkan sugan keli ahaantii aayahooga ugu dhisaan.
- Sahra:** Waa runtiye. Miyaanad arag carruurta afkan jahawareersan ku hadlaysa ee weedha ku bilaabmaysa Faransiis, kuna dhammaanaysa Cafar ama Soomaali?
- Diiriye:** Taasi waa fikrad qaldan, waa aragti ka fog dhabta aqooneed iyo afeedba; taana waxaa marag u ah, aqoonyahannada afafku wacay caddeeyeen inuu qofku, siiba carruurta, si fudud u baran karaan afaf badan mar qudh ah iyo waliba marka ay afkooda hooyo ku wanaagsanadaan uun inay ku wanaagsanaan karaan afafka kale. Maxaa dembi ka dhigay in dugsiga dhexdiisa lagu hadlo afkaaga hooyo? Sida kale haddaan u dhigno, waxaa dembi iyo dhagarba ah in lagu qasbo ummadda feker qudh ah, af qudh ah, dhaqan qudh ah oo aan ahayn keedii. Waa wax aad uga soo horjeeda dhiiri-galinta caalamka ka socota ee wadajirka dhaqameed iyo kala duwanaanshaha afeed. Waar miyaad dhoohantihii arrintani ujeeddo kale ayaa laga leeyahay oo ah in lagu tirtiro jiritaankeenna,, dhaqankeenna iyo sooyaalkeenna.
- Mahad:** Aabbo, malaha dembi iyo dhagar waxaan ka hadli karnaa markii afkeenna la qoro, naxwe fiican yeesho oo uu af cilmiyeysanna noqdo. Maxaa laga burburin af guri, isaga ayaaba burbursane.


- Diiriye:** Af guriyaa? Waar af guri inuu yahay adigaa maskaxda lagaa galiyaye afkeennu waa af ummadeed oo la siman kani qalaade ad ammaaneysey. Waa af hodon ah oo looga hadlo dalal kala duwan. Qoraalna waa qoran yahay oo beri hore ayaa la qoray, naxwena loo dajiyey ee adigaan u war hayn oo lagaa indha xidhay.
- Mahad:** Dagaalka ereyada innaga jooji Aabbo!
- Diiriye:** Ereyadu waxay leeyihiin ujeedooyin go'an. Afka iyo af guriga waxaa u dhexaaya wax sal ah. Haddaad ku sheegto afafkayaga af guriyo dil baad ku xukuntay. Waa yasid aad adigu is yasayso.
- Sahra:** Laakin, Sheekh Diiriye, ma lihin jaamacad, ma lihin maktabado. Sideen af waddaniya oo qoran u lahaan karnaa?
- Diiriye:** Jaamacad horta waan leenahay imminka, Sahraay. Haddii aan taada raacno, taasi waxay noqoneysaa in dadkayaga taariikhdoodu la bilaabantay imaatinkii gumeysiga oo ay hortood wax walba abaar ahaayeen; taasina waa been gumeysigu faafiyey.
- Mahad:** Waa inaan aqoonsanno in afka Faransiisku yahay qalabka midnimada qoomiyada-heenna kala duwan. Intaa waxa dheer inuu qoys ballaadhan oo qurux badan oo Faransiiska ku wada hadla innaga mid dhigay. Waa fursad wanaagsan inaan ku dhawaanno oon kula midowno dalalka adduunka oo dhan.
- Saada:** Waan kugu raacsanahay in afka Faransiisku yahay fursad nugu xidhaysa dadka afka Faransiiska ku hadla. Waxaase markaa innaga maqan inaan ku darro afkeenna oo aan qiimayno iyo walaalaheena Muslinka iyo Carabta oo aan ku xidhano, si ay u dhisanto bulshoweynta aan doonayno.
- Mahad:** Haddaan ku noqdo af guriyadeenna -- raalli iga ahaada, afafkeenna – waxaa innaga hor imanayaa iyaga oo aan mug u lahayn tebinta cilmiga casriga ah, daawada, aqoonta konbiyuutarka, cilmiga kimiyaaga iyo xisaabta; taa awgeed waa inaan ku tiirsanaanno afka Faransiiska oo ah afka aayaha iyo horumarka. Waa inuu noqdo afkayaga labaad, waa inaan u barannaa in aan si sax ah ugu hadallo oo dhammeys tiran sidii oo uu noo yahay afkeenna hooyo. Markaan dhigayo, waxaan isu haystaa inaan fulinayo laba waajib oo kala ah, kii macallinimo iyo inaan qaabaynayo waddaniga berrito imaanaya.
- Saada:** In afkeenna uu ka maqanyahay muggii uu cilmiga ku tebin lahaa shaki weyn ayaa ku jira. waxaan qabaa oo dugsiga sare aan ku dhigtay inuu afku wax nool yahay. Sida wax kasta oo nool, wuu dhashaa, waa la nafaqeeyaa, wuu koraa, wuu tarmaa, wuu weynaadaa, wuuna dhiman karaa. Sida waxa nool oo dhan wuu is dhalan-rogi karaa, xaaladaha cusubna, sida cilmiga, la jaanqaadi karaa. Ugu horrayn, afkeenna hooyo wuxuu u qurxoonyahay sida afafka kale. Waxaa taa caddaynteeda kuugu filan inuu soo saaray suugaantan aad u quruxda badan, maanso afeedkan iyo falsafaddan qutada dheer leh ee ay leeyihiin dadka reer Kuush. Afna hodonnimada kuma soo dhasho, waxaase hodan ka dhiga hadba sida loo adeegsado iyo dadka adeegsada. Afka Faransiiska ee aad aadka u jeceshihiin isagaba beryaha qaar waa la yasi jirey. Waxaa yasi jiray Roomaankii.
- Sahra:** Oo waayo, hooyo?
- Saada:** Maxaa yeelay ilbaxnimadii Roomaanka waxay u arkaysay dadkaas Goolwaaga (dadkay faransiisku ka soo tafiirmeen) iyo afafkoodaba inay ahaayeen sabool. Afka Faransiiskuna xaggooda waxa uu ahaa af guri yar, sida maanta afafkayaga halkan looga arko.
- Diiriye:** Alle ha ku barakeeyo! Si wanaagsan baad hadalka u dhigtay, awoowo. Waad ku mahadsantahay tusaalayaasha taariikhiga ah ee aad na siisay. Waxay ila tahay in ay taariikhdaas afka Faransiisku inoo noqon karayso tusaale aan wax ka baranno.

Waa inaan halgankooda mid la mid ah galno si aan u daafacno oo hore aan ugu marinno afkeenna. Waa inaan dadaalnaa. Haddaan afafkeenna daryeeli weyno oon carruurta bari weyno, waxaan ku rideynaa qabrigii lagu aasi lahaa. Haddii taasi dhacdo, waxaan si kama dambays ah u aasaynaa qiimihii dhaqankeenna iyo jiritaanka dadnimadeenna. Afkeennu waa halka keliya ee ay ku kaydsanyihiin taariikhdeenna iyo sooyaalkeennu, wixii aynu ahaan jirney. Waxay ila tahay haddii waxaas oo dhammi ay faraha ka baxaan oo ay lumaan - amma ha la dayaco amma garasho waaba ha ku dhaceene – haddii ay dhacdo taasi, cidi ma qiimayn karto waxaa innaga lumay marka laga tilmaan qaato taariikhda adduunka. Marka carruurteenna iyo kuwa ay dhali doonaan wax iska weyddiyaan tafiirtooda, dhaqankeenna iyo qiimaha uu sooyaalkeennu lahaa, oo markaas ay waayaan kayd qoran iyo cid uga jawaabi karta, ma yeelan doonaan dadnimo. Taasi waxay noqon doontaa dhagar aan galnay innagu.

Mahad: Awel wayba iga daahnayde hadda ayaan arkayaa halista. Maxaan samaynaa, aabbo, arrintu sow fara ka bax maaha?

Diiriye: Waxa keli ah oo nala gudboon inaan badbaadinno wixii la badbaadin karo. Weli waqti baan haysannaa aan khasaaraha yaraynno. Haddaynu xaqqiida fahanno oo dadaal wadajir ah samayno afkeenna hooyo waan badbaadin karnaa.

* Muumin Xuseen xilligii uu riwaayaddan qoray wuxuu ahaa Maamule-ku-xigeenka Dugsiga Charles de Fancald; imminkana waa Maamulaha dugsiga Dhexe/Sare ee Gabod 4



OBITUARY / TAARIIKH-NOLOLEED

Ibraahim-Gadhle: Abwaan Dhaxal Reebay

Burhaan Axmed Daahir

Bilowgii sannadkii tegay ee 2006-da waxa magaalada Jabuuti ku geeriyooday shaqsi qiimo ballaadhan ugu fadhlay halabuurka fanka iyo suugaanta Soomaalida. Waxaa god aakhiro u galbaday (Allaha u naxariistee) Ibraahim Sheekh Suleymaan oo ku magac dheeraa “Gadhle”. Wuxuu ahaa halabuure safka hore kaga jirey suugaanleyda Soomaaliyeed. Wuxuu ahaa hal-gamaa adeegsan jiray haybad halabuurnimo. Dhinaca fanka masraxa wuxuu ahaa nin qoray riwaayado badan. Wuxuu ahaa abwaan weyn oo taariikh run ah ka tegay. Noloshiisa qayb weyn oo ka mid ah wuxuu u hibeeyay u halgankii gobannimada Jamhuuriyadda Jabuuti, adkaynta mirihii ka dhashay madaxbannaanidii loo halgamay, ku wacyigelinta bulshada dawga nolosha habboon iyo u hiillinta xaq iyo la dagaallanka dulmiga guud ahaan dunidan ka dhaca, intaas oo uu siyaabo kala duwan ugu muujin jirey jaadadkii kala duwanaa ee suugaantiisa.

Ibraahim-Gadhle ayaa muddo dheer ahaa abwaan noloshiisu tahay qayb ka mid ah masraxa Jabuuti. Gadhle oo ah magaca abwaankaasi caanka ku ahaa ayaa dadkii yaqaannay xasuusiya suugaan tayo, qeexnaan iyo quruxba huwan. Intaa oo dhan waxa ka muhiimsanaa ee sida weyn loogu xusuusan doonaa waxa weeye qaybtii libaax ee uu ku lahaa masraxii gobannimadoonka ee dalka Jabuuti. Dadka laga yaabo in aanay wax badan ka aqoon Ibraahim-Gadhle waxa suurto gal ah in ay dhegeysteen heeso uu sameeyay mu'allifkaasi ama ay daawadeen riwaayado uu curiyey. Haddii aanu jirin dedaalkii ballaadhnaa ee aan kala go'a lahayn iyo waxtarkii uu Ibraahim Gadhle geliyay Masraxa Soomaalida guud ahaan,

gaar ahaanna kan Jabuuti fanku ma gaadheen halkii uu gaadhay waqtiyadii uu ugu wacnaa masraxa Jabuuti.

Ibraahim Sheekh Suleymaan (Gadhle) isagoo da'yar yuu bilaabay fanka oo uu ka dhex muuqday halabuurkii fanka Jabuuti. Sannadihii lixdannadii iyo toddobaatannadii waxa uu curiyay maansooyin taxane ah oo gumaysi diid ah, waxa uuna allifay riwaayado baaraarujin iyo guubaabo u badnaa. Ibraahim-Gadhle waxa la qiyaasay in sannadkii 1944^{kii} uu ku dhashay dhulka hawdka ah ee ka sarreeya miyiga magaalada Burco. Jabuuti ayuu yimid isaga oo da'diisu sida la qiyaasayo ahayd inta u dhexaysa siddeed ilaa toban jir. Markaaba hibada maanso tirinta sansaanyaheeda ayaa ka muuqday. Berigii uu yaraa waxa lagu naanaysi jirey “Dhoolaatan” oo ka dhigan nin sheeko iyo kaftan badan.

Sida uu ku sheegay waraysi lagula yeeshay barnaamijka Tixmaal ee taleefishanka Jabuuti ka baxa, gabaygii ugu horreeyay oo uu tiriyay ee uu xasuusto waxa uu ahaa gabayga tuducyadiisa ay ka mid yihiin:

*Rag baa higit leh, Eebbaa hodan ah, hibo Rasuul baa leh
Cirkooy hooray geed la hadhsadiyo, hirasho doog baa leh
God baa ku hela geedaa hardi leh, madow habeen baa leh
Col baa hugun leh, caydh baa hingilan, gocasho ciil baa leh
Hagar li'i horaad laga dhargiyo, hooyo gacalaa leh.*

Ibraahim Gadhle kolkii uu magaalo soo galay wuxuu la saanqaaday noloshii iyo dareenkii magaalada ka jiray. Waqtigaa dhulka Soomalidu degto waxaa ka oognaa dhaqdhaqaaqyo gobannimadoon ah oo lagaga soo horjeeday quwadihii dhulalkaas gumaysiga ku haystay. Suugaantii waayahaa jirtayna waxay u badnayd mid ku jihaysan ama ku taxan dareenkaa guud ee shacabku qabay ee gobannimo-raadinta iyo gumaysi la dirirka ah. Kolkaa ayuu Ibraahim-Gadhle tiriyay maansadiisii ama hees uu sameeyo tii ugu horreeysay oo macno weyn leh, waxayna ahayd maanso

waddani ah oo cabbiraysa foolxumadii ay ku noolaayeen dadkii lagu addoonsanayay dhulkooda. Heestaa waxa wadajir ugu luuqeeya fannaaniinta Siciid Cabdi iyo Aamina Axmed, tuducyadeedana waxaa ka mid ah:

*Annagoo dad noolaa , dabaq layna saaree
Sida duunyadiibaa, la innoo dilaayoo
Allahayna daayee, samahaa dambaynne.*

Waayahaa ayuu ku biiray kooxihii fanka ee riwaayadaha samayn jiray isagoo hibo weyn u lahaa fanka masraxa xag curin iyo xag jilliinba. Kooxo yaryar oo ay lahaayeen ururradii iyo naadiyadii berigaa jiray ayuu la jilay riwaayado ama maadeysyo. Kooxahaa naadiyada ka sokow abwaanku wuxuu la soo shaqeeyay kooxo waaweyn oo caan ka noqday Jabuuti sida kooxdii Caarrey. Waxase hawsha ugu badan uu ka soo qabtay kooxda Gacan-macaan oo ka mid ah kooxaha ugu caansan masraxa Jabuuti isagoo ka mid ahaa abwaannadii asaasay kooxdaasi.

Dabayaaqadii lixdannaadkii ayay ahayd markii u horreysay ee uu riwaayad jilo, wuxuna wax ka matalay riwaayad la yidhaahdo “Alla Aammin Ma Iisho” oo uu sameeyay (Allaha u naxariistee) abwaan la odhan jirey Cali Cigaal. Isla waayahaa waqti ku beegan 1969^{kii} waxa masraxa Jabuuti ku soo biiray riwaayaddii la magac baxday “Ma Dhab Baa Jacayl Waa Loo Dhintaa?” oo dadka qaarkii ugu yeedhaan “Cilmi Boodhari.” Riwaayaddan ayaa ahayd tii ugu horreysay oo uu Ibraahim Gadhle curiyo. Waxay ka mid noqotay riwaayadaha badaha Jacaylka ka cabbay waxana abwaanku kaga hadlayay noloshii iyo qisadii jacayl ee gabayaagii Soomaaliyeed ee Cilmi Ismaaciil Liibaan (Cilmi Boodhari) oo la rumaysan yahay in uu jacaylka aawadii u god galay.

Horraantii toddobaatannada abwaanku waxa uu sii xoojiyay curinta riwaayadaha wuxuuna daaha ka rogay riwaayado waddani ah oo waagaa la jaanqaadayey dareenka dadka ee xorriyaddoonka ahaa. Kuwii uu waagaa curiyeyna waxaa ka mid ahaa “Nolol Geeridu Dhaanto” oo ahayd riwaayad waddani ah. Miuuqaallo abuuraya dareen muruggo iyo qiiri waddaninimo ayaa riwaayaddu soo bandhigtay, waxayna si cad u tilmaamaysay

cadaadiskii iyo xanuunkii gumeysigu ku hayay shacabkii uu dhulkooda ku addoonsanayay. Riwaayadaha Ibraahim-Gadhle kuwooda caanka noqday ee soo baxay badhtamihii toddobaatannada, waxa ka mid ahaa riwaayaddii “Geeddigii Kowaad” oo ahayd riwaayad gobannimadood ah oo abwaanku sameeyay milay ku beegnaa 1975^{kii}-1976^{kii}. Maansooyinkii caan baxay ee riwaayaddaa “Geeddiga Koowaad” ku jiray waxa ka mid ahaa gabay aqoonyahannada suugaanta falanqeyyaa qaarkood ku tilmaamaan ‘Dhawaaq Gobannimo’ oo beydadka soo socdaa ka mid yihiin:

*Ifka ruuxa joogaa kol un buu, ku istareexaaye
Kol un bay anfaaciga macaan, iligga saaraane
Ikhtiyaar kol un bay helaan, uumiyaha kale eh
Aasiyaba waxay leeyihiin, aarmi iyo xooge
Annagana Oroobaa sidii, awrta noo rarata
Waagii iftiimaba kun baa, nalaga aasaaye
Bal qabsoo ugaadhiyo sidii, adhiga weeyaane*

Isla riwaayadda Geeddigii Koowaad waxa ku jiray heesta caanka ah ee midhaheeda ay ka mid yihiin, “*Gabban mayno, indha gibidhsan mayno*” oo ay wada jirka ugu luuqeeyaan labada fannaan Nimco Jaamac Migil iyo Nadiifo Xaaji Axmed.

Sidaan hore u soo xusnayba curinta ka sokow, Ibraahim-Gadhle fanka jilliinka ayuu kaalin weyn kaga jiray wuxu ka qaybqaatay riwaayado badan oo isugu jiray kuwo isagu curiyey iyo kuwo curiyaal kale lahaayeen. Riwaayadaha halabuurrada kale allifeen ee uu qayb weyn jilliinkooda ku lahaa waxa ka mid ah: “*Han Waynaa Ma Huryaa?*” “*Run ay Beeni Rifayso*” iyo “*Saddex Baa Isu Faantay*”, oo uu saddexdaba sameeyay abwaan Xasan Cilmi.

Masraxii siddeedtannada ee dalka Jabuuti Ibraahim-Gadhle kaalin wanaagsan ayuu kaga jiray. Wuxuuna ka mid ahaa horseedka curiyayaasha riwaayadaha iyo jilayaashaba. Waxa si weyn loo xasuustaa kaalintii uu kaga jiray riwaayaddii Jabuuti caanka ka noqotay ee “*Qaahira*” oo uu curiyay Allaha u naxariistee abwaankii la odhan jiray Aadan Diiriye (Dacar). Riwaayaddaa magaceeda rasmiga ahi wuxuu ahaa “*Geeri Guur u Horseed ah*”, balse dadweynaha ayaa u caleemo saaray magaca ay ku shaac baxday

ee Qaahira. Waxay soo baxday 1982^{kii}, dulucdeeduna waxay ku qotontay mashaakilka qoyska ee bulshada dhexdeeda ku sii badanaya. Ibraahim-Gadhle riwaayaddaa door jilliin oo weyn ayuu ku lahaa wuxuna jilaayay kaalinta islaanta “*Calanla*.”

Ibraahim-Gadhle riwaayadihiisa kuwii ugu dambeeyay waxa ka mid ahaa “Ragow Aarsi Haween U Adkaysta Markiinna”, oo soo baxday sannadkii 1995^{kii}. Riwaayaddani waxay sawir ka bixinaysay isbeddelkii ku yimid xidhiidhkii u dhaxeeyay ragga iyo haweenka ka dib markii Soomaali badani u hayaantay waddammada Galbeedka. Wuxuu kaloo goor dambe sameeyay riwaayaddii “Jacaylkii Imuu Deyn”, oo ay Jabuuti ka dhigtay kooxda Caarrey.

Heeso badan oo uu curiyay ayaa waxa ku luuqeeya fannaaniin caan baxay oo ka mid ah horseedka heesaaga Soomaalida sida Maxamed Mooge Liibaan, Axmed Mooge Liibaan, Axmed Cali Cigaal, Khadra Daahir, Nimco Jaamac Migil, Xasan Aadan Samatar, Cabdi Nuur Allaale iyo kuwo kale oo badan. Haddaan in yar ka xusno heesaha caanka noqday ee uu Ibraahim-Gadhle curiyey, aan soo qaadanno heesta loo yaqaan “Dadka hayska weynayn”, oo xagga Soomaaliya uu ku luuqayn jiray Allaha u naxariistee Fannaankii Maxamed Mooge Liibaan, heestaasi dhanka Jabuuti waxa wadajir u qaada Hodan Xaaji Maxamuud iyo Cabdinuur Allaale, marna Hodan Xaaji Maxamuud iyo Ismaaciil Caynaan. Heesta “Maxaa Dayrcad Geel Hallaaboo Dibjiray uu Cunay Dugaaggu”, oo iyana fannaaniin kala duwani ku luuqeeyaan (labadan heesoodba waxay ku jireen riwaayaddii la baxday “Adduunyada Mashaakilladeeda”). Heesaha kale ee abwaankani allifay waxa kaloo ka mid ah “Wax La Waayay Geellow Ninkii Waalan Baw Duda” oo ay wadajir ugu luuqeeyaan Axmed Cali Cigaal iyo Khadra Daahir.

Maansooyinka faraha badan ee Ibraahim-Gadhle haddaan wax ka xusno waxa ka mid ah ta tidhaahda “Maansooy nin kugu duul” oo uu kaga hadlay siyaabaha ujeeddo-badanta ah ee maansada loo adeegsan karo. Isagoo taa tilmaamayana wuxuu yidhi:

*Maansooy nin kugu duul
Ninna maalin kugu dood
Ninna dhuuni kaa doon
Ninna derejo kaa dhigay
Ninna nabarka kugu damaq
Ninna dakharka kugu dhayey
Ninna doogta kugu kici
Ninna oolka kugu demi
Ninna nabadda kugu didi
Ninna beleda kugu dadab
Ninna dookha caashaqa
Kaa dhigay daf loo tumo*

Jaadadka kale ee uu ka maansoodo abwaankani waxa ka mid ah Gabay-Jacburka oo ah hab si maad iyo kaftan-dhable ah loogu muujiyo ama lagaga faalloodo arrimo waaweyn oo muhim ah loona baahan yahay in lagu baraarugo, balse habka farrintaasi dhegaha bulshada loo gaadhsiinayo ayaa ah mid sahlan, xiiso leh, isla markaana qosol iyo maadi ku ladhan tahay. Gabay-jacburka aan tuducyada soo socda ka soo qaadannay ayuu abwaanku ku diwaan geliyay dhacdo taariikhi ah oo ummadda nolosheeda iyo soyaalka taariikheed ee Jamhuuriyadda Jabuuti qayb weyn ka galay. Waa arrimihii iyo sidii xaal noqday maalintii Madaxweynihii hore ee Faransiiska Charle De Gaule uu booqashadii dhibaataada keentay ku yimid Jabuuti 25^{kii} Agoosto 1966^{kii}.

*Maalintii¹ Diggool yimid kolkii dawga lagu yaacay
Cadho nagu dhabowdiyo kolkii taahii lala luuday
Faarax-xaad² hortiisa ninkii joogsadaan ahaye...
Cirka waxannu eegnaba dabeed yimi madaarkiiye
Illeen waa sugaynee haddii gaadhi lagu keenay
Markuu ila gudboon yahay ninkii No! yidhaan ahaye
Maradii³ qarsoonayd ninkii soo baxshaan ahaye
Xornimada ninkii doortay ee dhiidhiyaan ahaye*

Marka laga yimaaddo kaalintii uu ku lahaa masraxa Jabuuti iyo noloshiisii u badnayd Jabuuti, Ibraahim-Gadhle wuxuu qayb ka qaatay masraxa iyo dhaqdhaqaaqyadii siyaasadeed ee ka jiray Jamhuuriyaddii Soomaaliya. Xilligii uu dillaacay dagaalkii sokeeye ee u dhexeeyay xukumaddii militariga ahayd ee uu madaxa ka ahaa Jeneraal


Maxamed Siyaad Barre iyo Jabhaddii SNM ee dagaalka hubaysan kula jirtay xukuumaddaas kana dagaallamaysay gobolladii Waqooyi ee Soomaaliya, dagaalladaas iyo loollankaasi waxay soo jiteen dad badan oo ay ku jiraan siyaasiyiin, halabuurro suugaaneed, abwaanno iyo fannaaniin. Ibraahim-Gadhle waqtigaasi ayuu isaga tegay shaqadii iyo noloshiisii Jabuuti wuxuuna ku biiray dhaqdhaqaaqii SNM oo xilligaa saldhig ka samaystay gudaha dalka Itoobiya. Halkaas wuxuu Ibraahim-Gadhle ka sii waday fankii masraxa isagoo ka mid ahaa raggii asaasay kooxdii la baxday SNM Band oo ka dhex samaysantay xeryihii qaxootiga ee Itoobiya ku yiil oo ay ku jireen dadkii ka soo baxsaday dagaalladii ka dhacay gobolladii waqooyi ee Soomaaliya dabayaaqadii siddeetannada. Riwaayadihii uu halkaasi ku sameeyay waxa ka mid ahaa "Ragga Dhaxan Qabow!" oo ay dhigtay kooxdii SNM Band.

Dad badan oo aqoon u lahaa Ibraahim Gadhle iyo saaxiibbadii markaad kala sheekaysato noloshii Ibraahim-Gadhle waxay kuu sheegayaan in uu ahaa; shaqsi dareen badan, hadalladiisa iyo fikradihiiisu cadcadyihiin, oo aan abbaartiisa la gabban, abwaan waddaniyadda iyo ummadnimadu ku weyn tahay, dhinaca kalena ahaa bulshay sheeko iyo kaftan badan oo aad u maadeeya. Geeridu waa xaq nin kastaana wuu dhadhaminayaa balse ta muhiimka ahi waxa weeye midhaha iyo dhaxalka qofku u reebo ummaddiisa. Qofba wax baa lagu xasuustaa. Haddaba Ibraahim-Gadhle maxaanuu si gaara ugu xasuusan karnaa? Anigu waxaan odhan lahaa wuxuu ahaa qof dad badan u noqday tusaale oo reebay dhaxal ma guuraan ah oo jilka maanta iyo ka soo korayaba anfacaya; waa murtidii iyo suugaantii tayada sare lahayd ee wax-tusaalaynta, abbaar-tilmaamidda, hawaale-warranka, guubaabada iyo waanadu intuba ku dhammaayeen. Waxaan xasuustaa maansadiisii yaabka lahayd ee uu marxuumku kaga hadlaayey xukun-ka-tuuristii Maxamed Siyaad Barre, kolkii qori caaraddi talada lagu waydaarshey, isla markaana uu kula dardaarmayey cid Alla ciddii dalka maamulkiisa qabataa in ay

ka feejignaato dabinkii Siyaad ku dhacay. Ma hubo, waxaanse ku wadaa inay maansadaasi soo baxday 1991^{ki}. Waa maanso waano iyo murtiyi ku dhan tahay. Dhextaalkeeduna ahaa "Ducataye maxay dhali?!" Maansadaa oo dheerayd waxaan ka soo qaaday dhawrkan meertis:

*Waar! hoy! dadkaygoow
Laba daan dhexdoodiyo
Dalqo bahal qof galayoo
Dirqi iyo tu fool adag
Debedda ugu soo baxay
Halkii shalayto lagu dilay
Ma dareemi waayee
Durba miyaa illoowdeen
Duunyadiinnii dhacantiyo
In dadkiinnii maqan yahay
Sheekadu dorraatiyo
Dibu gocasho weeyaan
Duul aan baraarugin
Durbaankoodii weeyaan
Intuu ololku dami laa
Dunqulaali weeyaan
Daantaa wixii jiray
Dabayl qaadda weeyaan
Waxa daafta kale yaal
Daad ha qaado weeyaan
Dawgii rasuulkaynnu
Ku dareerro weeyaan*

Ilaah naxariistii janno ha siiyee Ibraahim Sheekh Suleymaan (Gadhle) waxaa uu ifka kaga tegey 3 xaas iyo 20 qof oo isugu jira in uu dhalay iyo in ay sii dhaleen. Bilowgii sannadkii 2006^{da} ayaa lagu aasay magaalo madaxda Jabuuti. Aaskiisa waxaa ka qayb galay dad aad u tiro badan oo isugu jirey eheladiisa, asxaabtiisii, madax dowladda hay'adaheeda kala duwan ka tirsan iyo dadweyne kaleba.



A Farewell to Abdallah Lee*

Lidwien Kapteijns

Djiboutian singer and composer Abdallah Abdulkadir Abbas, known to his audiences as Abdallah Lee (pronounce “Lay”), died in a hospital in France on 18 September 2007. He was only 44 years old. He will be remembered as a gifted musician and singer, who has influenced the musical scene of Djibouti for over twenty years.

Abdallah was born in 1963, in Djibouti, and spent his earliest years in Quartier 1. In the early 1970s, his family moved to Arhiba, where, at thirteen years, he organized his first concerts and became known as Abdallah Lee. In 1979, Abdallah became to sing with the musical group Eijla Maho. Later he created his own group called Dinkara, which included famous Djiboutian artists such as Nasser Abdallah, Mohamed Habib (nicknamed “Pere Robert”), Abayazid M. Badri, Amenda, and Abdo Saoudi. It is with Dinkara that he reached international fame.

In 1984, the famous poet Alwan Bourhan Alwan, then an employee of the water bottling factory of Tadjourah, gave his friend Abdallah the text of what was to become one of his most popular and unforgettable songs: *kol xabem baye yok kal*. This partnership between poet and singer was to last until the latter’s death. Other famous songs include *Woyisa Manikee*, *Dabali Sareh*, *Lako Gileh*, *Hawal*, *Yadow Ayga*,


Sayo Diifu, and *Yi Meela Tab Le*. Love, patriotism, tolerance, and peaceful and constructive co-existence constitute the most important themes of Abdallah Lee’s songs.

Throughout this period, until his medical evacuation to France in 2002, Abdallah was highly productive and gained international fame and popularity. He performed in Addis Ababa (Ethiopia), Asmara (Eritrea), Sana`a (Yemen), as well as at the international theatre festival in Ouagadougou (Burkina Faso), where he composed a song for Thomas Sankara and performed it on his grave. He would have recorded his songs in the U.S. in November 2007.

During his last visit to Djibouti in March 2007, Abdallah had been greatly moved by the enormous love shown him by his fans and the great respect bestowed on him by the Minister of Culture, the Prime-Minister, and the President of the Republic. Such love and respect were again abundantly clear during his funeral at Djibouti’s PK12 cemetery, which was attended by the Prime-Minister, a representative of the Minister of Culture, relatives including Sultan Abdoukader of Tadjourah, numerous fellow artists such as Naasir Cabdallah, Maxamed Moyaale, Cabdi Nuur Allaale, Cabdi Roobleh Qarshiile, and Xumed Axmed Yuusuf, and many admirers.

Abdallah leaves behind a wife and seven children. Halabuur salutes this great artist for his many accomplishments.

* This obituary is based, among other things, on an article published in *La Nation Djibouti* of 19 September, 2007 and on a communiqué from the Ministry of Information of 18 September 2007.



BRIEF REPORTS / DHACDOOYIN XUSID MUDAN

In this section, Halabuur reports – selectively – on events and aspects of the Somali cultural scene as well as culture-related events that have taken place around the world. Since this is a special issue with specific focus, the emphasis this time lies on Djibouti.

Dhacdooyinkii Xagga Dhaqanka ee Xuskii Soddon-guurada Xorriyadda Jabuuti

Bishii Juun ee 2007^{ka} dalka Jamhuuriyadda Jabuuti waxaa si ballaaran oon hore loo arag looga xusay soddon-guuradii ka soo wareegtay markii Jabuuti madaxbannaanideeda ka qaadatay isticmaarkii Faransiiska, 27^{ka} Juun 1977^{ka}. Dabbaaldegyo qaran oo kala duwan ayaa dalka ka socdey muddo bil ah, kuwaas la bilowday bisha Juun. Waxay isugu jireen bandhigyo kala duwan, damaashaadyo iyo dibadbaxyo farxadeed oo intuba ka soconayeen magaalamadaxda Jabuuti iyo dhammaan gobollada dalku ka kooban yahay. Kuwa ugu waaweyn waxaa ka mid ahaa bandhigyo dhaqan iyo faneed oo ay kooxaha fanka ee dalku, iyagoon u kala harin soo bandhigeen meelo kala duwana ku soo bandhigayeen qaybaha kala duwan ee fanka, suugaanta iyo ciyaaraha hiddaha; waxaa kaloo ka mid ahaa ciidammada qalabka sida oo iyaguna sameeyey dabbaaldegyo ay wadajir ahaan ugu damaashaadayeen sannad guuradii soddonaad ee ka soo wareegtay asaaskoodii iyo soddonguurada madax-bannaanida qaran ee dalka guud ahaan.

Dhacdooyinkii loogu damaashaadayey xuska soddonguurada ee taxanaha ahaa, una badnaa kuwii xagga dhaqanka ee ay soo agaasimeen Guddi Qaran oo uu goddoomiye ka ahaa Wasiirka Dhaqanka iyo Warfaafinta, Mudane Cali Cabdi Faarax, waxa ugu waaweynaa kuwa hoos ku taxan:

1. *Damaashaadkii Habeenka Calan-saarka:*

Habeennimadii ay soo galaysay 27^{ka} Juun oo ku beegnayd habeenkii la saaray calanka xorta ah ee Jamhuuriyadda Jabuuti lana dajiyay kii isticmaarka Faransiiska soddon sano ka hor, gegida Guuleed ee Kubbadda Cagta, caasimadda Jabuuti waxaa lagyu qabtay damaashaadkii ugu weynaa, kaas oo socdey habeenkii dhan kana koobnaa qaybo badan oo midkood waliba iski u ahaa wacdarro la-yaab leh.

Fagaarahaas weyn waxaa u soo dibadbaxay tobonnaan kun oo si wacan u soo wada labbistay, wajigooda farxad badani ka muuqatey, waxaana hormuud ahaa Madaxweynaha dalka, Mudane Ismaaciil C. Geelle oo ay la socotey marwadiisa, Marwo Khadra M. Xayd, Raii'sulwasaaraha, Dileite Maxamed Dileite, madaxda kalee xukuumadda iyo baarlammaanka. Waxaa kaloo goobjoog ahaa marti-sharaf badan oo ay ka mid yihiin.

2. *Bandhig-dhaqameed xiisa gaar ahaaneed leh:*

Wacdarihii habeenkaa aan caadiga ahayn halkaa ka dhacay kuwa ugu waaweyni waxay ahaayeen dhanka dhaqanka, fanka iyo suugaanta. Gagida damaashaadku habeenkaas waxay noqotay fagaare wada kulmiyey dhammaanba fannaaniinta dalka oo isga wada yimid dalka gudihiiisa iyo dibaddiisaba. Abwaanno, ciyaartoy, heesaa, jilaa, muusikley looma kala harin. Fannaaniinta caanka ah ee habeenkaas fagaaraha ka dhexmuuqdey, ka dib markay sannado badan dibadda ku maqnaayeen, waxaa ka mid ahaa hooballadda caanka ah Faadumo Axmed Dhimbil, Fannaanka weyn, Cabdi-nuur Allaale, fannaanka kaloo weyn Abbaziid

Cali Dahabi iyo xiddigga da'da yar, Cawaale Jaamac oo si weyn loogu sacab tumay.

Waxaa la soo bandhigay ciyaaraha hiddaha iyo dhaqanka ee dalku u leeyahay, heeso waddani ah oo dhammaatoodba ku saabsanaa xornimada dalka iyo munaasabadda la xusayo iyo maansooyin ay curiyeen halabuurro lagu tartansiiyey suugaan iyaduna ku saabsan munaasabadda.

3. *Mahrajaan indha-daraandar ah*

Bandhig kale oo kaa dhaqanka iyo fanka garab socdey ahaana wacdar kale, waxaa uu ahaa mahrajaan si layaab leh loo soo agaasimay oo ay soo bandhigeen ardayda dugsiyada hoose ee caasimadda Jabuuti, kuwaas u soo baxayey raxan-raxan ku aslan midabbo indha-daraandar ah. Waxay soo bandhigayeen ciyaaro qurux badan iyo muuqaallo iyo jaantusyo kala jaad ah oo ay wadar ahaan ugu muujinayeen astaamaha dalka, sida calanka, khayraadka dabiiciga ah ee dalka iyo horumarka dhaqaale ee uu dalku gaadhey.

4. *Farxad-wadaag:*

Isagoo cabbiraya farxadaas heerka qaran, ayuu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Jabuuti, Mud. Ismaaciil Cumar Geelle wuxuu halkaa ka soo jeediyey khudbad xiisa leh oo uu dadka reer jabuuti meel ay joogaanba ugu hambalyeeyey munaasabaddan ummadda ugu fadhida qiimaha aad u weyn. Madaxweynuhu wuxuu aad ugu dheeraaday halgankii iyo dhibaataadii loo soo maray xoraynta dalka iyo calanka maanta la hadhsanayo ee aawadii u shahiideen geesiyaal badan oo rag iyo dumarba leh, kuwaas oo madaxweyuhu codsaday in loo sare kaco xasuustooda. Madaxweyne Ismaaciil Cumar wuxuu tilmaamay dadaalka xukuumaddiisu ugu jirto hore-u-marinta dalka dhinac kastaba iyo guusha ay ka gaadhey inay soo jiiddo maalgelin shisheeye oo wax ka taraysa horumarka dhaqaale, iyo taasi inay ku timid nabadda, deggenaanshaha iyo kalsoonida lagu qabo shacabka Jabuuti. Madaxweynuhu khudbaddiisa wuxuu ku gunaanaday dhambaal cad oo uu sigaar ah ugu jeediyey dhallinyarada

waddanka. *“Dhallinyaroo, dalkani idinkaa leh. Mustaqbalkiisa idinkaa leh, dadka laga sugayo inay gartaan qiimaha gobannimada, qiimaha calanka, qiimaha midnimada, qiimaha deggenaanshaha waddanka, a idinka weeye. Idinka ayaa dalkan daafici kara, kobcini kara, bore u marin kara.”* Sidaa ayuu carrabka ku adkeeyey, isagoo ay si diirran ugu sacab-tumayeen tobanaankii kun ee ka buuxey gagida weyn ee Guuleed.

Kolkii ay saacaddu isku taagtay 12^{ka} habeen-nimo oo ku beegnayd xilligii calan-saarka iyo kala guurka labada taariikhood, ayaa loo wada sara joogsaday calankii oo la saarayo, kooxda muusigga ee baambayda qarankuna ka diyaamiyeen muusigga astaanta u ah calanka iyo qaranimada Jamhuuriyadda Jabuuti. Waxaa lagu daba qabtay qarax weyn oo la qarxiyey baaruudda midabbada badan ee astaanta looga dhigo damaashaadyada waaweyn. Iftiin qurux badan iyo dhawaaqyo sida onkodka isaga daba dhacaya ayaa cirka isku shareeray, kuwaas oo socdey muddo saacado ah. Astaamahaas dabbaaldeggga iyo ciyaaro kala jaad ah ayay habeenkaas oo dhan dadku ku damaashaadayeen.

5. *Damaashaadkii subaxnimada 27^{ka} Juun:*

Subaxnimadii 27^{ka} Juun waxaa loo dareeray fagaaraha lagu qabto dabbaaldeggga xuska maalinta xorriyadda ee ku yaal qaybta Sh. Cusmaan ee Xaafadweynta Balbala oo ka tirsan Caasimadda Jabuuti. Halkaas waxaa isugu tagey kumannaan dad ah oo madaxweynaha dalku uu horsocdey. Fagaarahaas isaga ah ciidammada dalka iyo shacbiweynuhuba waxay ku soo bandhigeen dhoolla-tus xiisa leh oo lagu muujinayey waddanka quwaddiisa, hantidiisa iyo wadajirka dadkiisa. Dadka reer jabuuti iyo madaxdooda ka sokow, dadkii fagaarahaas ka ahaa goob-joogga waxaa ka mid ahaa martisharaf badan oo wakiil ka ahaa dalalka dariska iyo saaxiibka la ah Jamhuuriyadda Jabuuti. Gabagabadii dabbaaldeggga waxa la riday madaafiic lagu muujinayey maamuuska munaasabaddan taariikhiga ah.

6. Aroos-wadareed la isugu dhisay soddon lammaane:

Ummuurihii kala duwanaa ee lala beegsaday xuska soddon-guuradii dhalashada Jamhuuriyadda Jabuuti waxaa ka mid ahayd arrin aan hore u dhicin, taas oo in muddo ah noqotay wax looga sheekaysto aqal kasta oo reer Jabuuti. Habeenkii 28^{ka} ayaa hotelka weyn ee Kempinski ee dhawaan laga dhisay magaalada Jabuuti waxaa lagu qabtay xaflad weyn oo la isugu dhisay soddon wiil iyo soddon bablood oo reer Jabuuti ah. Soddonkaas lammaane oo da'doodu u dhaxayso 25 ilaa 35 jir ayaa waxaa arooskooda maal-geliyay maalqabeen u dhashay imaaradda Dubai ee Imaaraadka Carabta ee midoobay.

Kulan Lagu Asaasay Ururka Suxufiyiinta Bariga Afrika oo Jabuuti ka Dhacay

29-30 kii bishii Sebtember waxaa magaalada Jabuuti ka dhacay Shirweyne ay ku kulmeen madaxda ururada Saxaafadda ee Bariga Afrika. Shirkaan ayaa ujeeddadiisu ahayd in dib-loogu habeeyo laguna nolol geliyo Ururka Suxufiyiinta Bariga Afrika (EAJA) oo la asaasay muddo haatan laga joogo taban sano iyo in la xoojiyo Ururada Saxaafadda ee waddamada bariga Afrika si kor loogu qaado dedaalka ku wajahan difaacidda danaha suxufiyiinta iyo badbaadinta nololaha suxufiyiinta, xoojinta iskaashiga ururada saxaafadda ee gobolka iyo kor-u-qaadidda wacyiga bulshada ee la xidhiidha xuquuqda suxufiga.

Shirkaan oo uu qabanqaabinayay islaamarkaana martigeliyay Ururka Suxufiyiinta Soomaaliyeed (NUSOJ) waxaa ka qaybgalay ururada saxaafadeed ee siddeed waddan oo ka mid ah tobanka waddan ee Bariga Afrikam kuwaas oo kala ahaa; Kenya, Uganda, Tansaniya, Soomaaliya, Jabuuti, Soodaan, Ruwaanda iyo Burundi.

Shirka Furitaankiisii waxaa ka qaybgalay isla markaana xadhigga ka jaray Wasiirka Warfaafinta, Dhaqanka, una xilsaaran Boostada iyo Isgaarsiinta ee Jamhuuriyadda Jabuuti, Mud. Cali Cabdi Faarax.

Go'aamadii shirka gaadhay waxaa ka mid ahaa:

- ◆ in Xarunta Urururka Suxufiyiinta Bariga Afrika ay noqotay Jabuuti,
- ◆ in dib-u-habayn lagu sameeyo qaabdhismeedka Ururka lana dhisay Golaha fulinta ee Ururka oo ka kooban shan xubnood, waxaana Xoghayaha guud ee Ururka loo doortay Cumar Faaruuq Cismaan oo ah suxufi Soomaaliyeed ismarkaa na ah Xoghayaha Guud ee Ururka Suxufiyiinta Soomaaliyeed.


Waxtarka shirkani u yeeshay suxufiyiinta gobolka gaar ahaan kuwa dalka Jabuuti waxaa ka mid ahaa iyadoo intii shirku socday lagu guulaystay dhismaha Ururka Suxufiyiinta Jabuuti.

Kulankii Aqoonyahannada UNESCO ee Daryeelka Dhaqanka Soomaaliyeed

12-14 kii Juun, 2007 waxaa magaalada Nairobi ka dhacay shir-cilmiyeed muhiim ah oo ku saabsan daryeelka dhaqanka Soomaaliyeed. Kulankaas oo ay qabanqaabisay Hay'adda UNESCO ee Qaramada Midoobay u qaabilsan waxbarashada, cilmiga iyo dhaqanka waxaa ka qayb qaatay aqoonyahanno ku xeeldheer arrimaha dhaqanka oo ka kala yimid Somaaliya iyo dunida daafeheedaba. Kulankani wuxuu ka shidaal qaadanayey natiijooyinkii iyo talooyinkii ka soo baxay darsid uu sannadkii hore sameeyey khabiir ay UNESCO u dirtay inuu soo darso dhibaatooyinka burburka dhaqankii Soomaaliyeed iyo sida wax looga qaban karo. Saddex qodob oo muhiim ah ayaa saldhig u ahaa dood-wadaagga kulanka; waxay kala ahaayeen:

1. Dayactirka iyo dib-u-dhiska hay'adihii dhaqanka ee burburay ;
2. Wax-ka-qabashada dabargo'a dhaxalka ummadda – mid la taaban karo iyo ku aan la taaban karinba.
3. Doorarka bulshada rayidka ah iyo ganacsatada iyo baahida loo qabo gacan-ka-geysigooda badbaadinta iyo hurimarinta dhaqanka.

Kulankanku wuxuu isku keenay khubaro iyo dhaqan-yaqaanno faro badan oo intooda badani ka kala yimaaddeen gobollada Soomaalida iyo qurbaha Soomalidu ku nooshahay sida Ingiriiska, Maraykanka, Koonfur Afrika iyo Iswiidhan. Wakiillo badan oo ka socday Beesha caalamka ee fadhigoodu yahay Nayroobi oo ay Qaramada Midoobay horseed ka tahay ayaa iyaguna kulanka uga qaybgalay korjoogto ahaan. Maalintii ugu dambeysey kulanku wuxuu isku raacay qorshe hawleed waxqabad oo loo bandhigayo UNESCO iyo beesha caalamka, kaas oo imminka laga dhursugayo sidii loo fulin lahaa. Gunaanadkii Kulanka, khubaradii ka qaybgashay waxay soo saareen war-saxaafadeed ay dhambaal bogaadin iyo mahadcelin ah ugu dirayeen Madaxweynaha Jabuuti Ismaaciil Cumar geelle iyo shicibka Jabuuti dadaalka weyn ee uu ku taakulaynayo dhaqanka Soomaalida iyo badbaadintiisa. Dhambaalkiina wuxuu u dhignaa sida hoos ku qoran.




War-saxaafadeed: Mahad-celin iyo Bogaadin Loo Diray Madaxweynaha Jabuuti

Annagoo ah aqoonyhannada Soomaaliyeed ee ka soo qaybgalay shir-cilmiyeedka caalamiga ah ee ay qabanqaabisay (UNESCO) laguna qabtay magaalada Nayroobi, Kiinya, Juun 12-14^{keedii}, kuna saabsanaa Badbaadinta iyo Dib-u-soo-noolaynta Dhaqanka Soomaaliyeed, waxaa sharaf iyo farxad noo ah in annu gunaanadka shirkaan go'aan midaysan ku gaarney inaan magaca shirka dhambaal xambaarsan bogaadin weyn iyo ammaan ballaadhan ugu gudbinno dadweynaha Jabuuti iyo dawladdooda oo uu hormuud ka yahay Madaxweynaha, Mudane Ismaaciil Cumar Geelle, annagoo qiraal cad iyo qiimayn aad u weyn ugu haynna kaalinta wacan ee ay Jamhuuriyadda Jabuuti ka qaadatay daryeelka iyo horumarinta dhaqanka Soomaalida ee shirkaan lagu gorfeyey. Magaca bahda dhaqanka waxaan mahadnaq gaar ahaaneed ugu gudbinaynnaa madaxweyne Ismaaciil Cumar Geelle, dhiirrigelinta, garabgalka

iyo taakulaynta hagarla'aaneed ee uu had iyo jeer la garab taagan yahay daryeelka dhaqanka, afka, hal-abuurka iyo suugaanta, xilligan qallafsan ee dhibaataadu ku habsatay ummadda Soomaaliyeed.

Waxaan u rajaynaynnaa walaaleheenna reer Jabuuti inay ku waaraan nabadgelyo, badhaadhe iyo horumar joogto ah.

Ka-qaybgalayaasha Shirka UNESCO ee
Khubarada Dhaqanka Nairobi,
14 June 2007



Cali-Sabiix iyo Tojorrah oo Marti Galiyey Xuskii Maalinta Afka Hooyo

Gobollada Cali-Sabiix iyo Tojorrah ee Dalka, Jamhuuriyadda Jabuuti, ayaa si ballaadhan looga xusay Maalinta Caalamiga ah ee afka hooyo 21-22 febraayo 2007. Xuskan waxaa qaban qaabiyay Naadiyada PEN ee ku kala hadla afafka Soomaaliga iyo Cafariga oo midba gobol ka hawl galayay.

Magaalada Cali Sabiix ee Xarun-Goboleedka Cali Sabiix oo xuskan intiisa badan lagu qabtay ayaa lagu soo gabagabeeyay 22^{kii} bishii Febraayo 2007 dhacdooyin taxane ah oo lagu maamuusayay xuska Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo oo sannad kasta la xuso 21ka bisha Febraayo. Hawlaha qabanqaabada Maalinta Afka Hooyo ee Cali-sabiix ka dhacay waxaa iska kaashaday Maamulka Gobolka Cali-Sabiix iyo Naadiga PEN ee Qalinleyda iyo Halabuurka Soomaalida. Munaasabadda waxaa ka qaybgalay, wasiirro ka socdey xukuumadda iyo xildhibaanno baarlamaanka dalka ka tirsan, guddoomiyaha Gobolka Cali Sabiix iyo masuuliyiin hay'adaha dowliga ah ka tirsan.

Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo waxay ku bilaabmatay bandhigyo xiiso badan oo isugu jirey ciyaaro dhaqan iyo suugaan-hiddeed, madeysyo ama riwaayado, warbixino, khudbado. Bandhig buugaag iyo qalab dhaqameed isugu jira ayaa isagana lagu soo gabagabeeyay dhacdooyinkii

taxanaha ahaa ee lagu maamuusay Xuska Maalinta Afka Hooyo. Dhacdooyinkii kala duwanaa ee uu soo qorsheeyey Naadiga PEN, laguna beegay xuska Maalinta Caalamiga ah ee Afka Hooyo, waxaa ka mid ahaa kuwa hoos ku taxan:

1. Aqoonwadaag ku saabsan

Badbaadinta Afka Hooyo:

Aqoon-wadaag looga dooday badbaadinta iyo horumarinta afka hooyo ayaa 21^{ku} Febraayo lagu qabtay Magaalada Cali Sabiix. Dood wadaaggaasi afka hooyo ku saabsan waxaa ka qaybgalay dad badan oo ka kala socdey qaybaha bulshada ee gobolka Cali Sabiix sida odaydhaqameedyo, aqoonyahanno, suugaanyahanno, macallimiin, haveen, dhallinyaro iyo warfidiyeenno. Ka qaybgalayaashu waxay aad uga doodeen dhibaataada haysata afka hooyo iyo sida loogu baahan yahay in la qaado tallaabooyin degdeg ah oo lagu badbaadiyo jiritaankiisa, iyadoo looga cabsi qabo mustaqbalka in uu ku biiro afafka dabargo'aya. Doodwadaagga waxaa lagu furay xogwarran aad loo xiiseeyey oo uu soo jeediyay Guddoomiyaha Naadiga PEN, Maxamed D. Afrax. Xogwarrankaas oo ka tilmaan-qaadanayey Warbixin-cilmiyeedyo ay hore u soo bandhigtay hay'adda UNESCO ee Qaramada Midoobay, guddoomiyaha PEN wuxuu ku tiiqtiqsaday dhibaataada afafka halista ku jira oo badankoodu ah afaf looga hadlo qaaradda Afrika, kuwaa oo in badan oo ay ka mid ah ay sii dabar go'ayaan sida ay caddeeyeen khabarada UNESCO. Wuxuu tilmaamay afafka Soomaaliga iyo cafariga inay ku soo fool leedahay halista noocaan ah loona baahan yahay in laga hor tago inta goori goor tahay.

Kulan-aqoomeedkan waxaa ka qaybgalay hadallo xiisa lehna ka soo jeediyey madax ay ka mid ahaayeen Wasiiirka Guraynta iyo Baya'dda, Mudane Cimi ? Obsiye, Guddoomiyaha Gobolka Cali Sabiix, Mudane Ibraahim Suubbane iyo abwaan Xaashi cabdillaahi Orrax oo ka mid ah odayada PEN.


2. Abaalmarinno la Guddoonsiiyay Arday ku Guulaysatay Tartan Suugaaneed:

Dhacdooyinkaasi lagu xusayay Maalinta Afka Hooyo waxay ku billowdeen tartansuugaaneed

19^{ku} bisha Febraayo 2007 loo qabtay ardayda dugsiyada Cali Sabiix kuwaas oo ku tartamayey curinta halabuurka maansada. Ardaydii guuleystey iyo intii ka qaybgashay tartansuugaaneedkii la qabtay 19^{ku} bishan oo tiradoodu dhammayd 15 arday kana kala socday laba dugsi oo magaalada Cali Sabiix ku yaal ayaa gebaggabadii munaasabadda xuska Maalinta Afka Hooyo lagu guddoonsiiyay abaalmarinno isugu jirey lacag, shaahaadooyin iyo buugaagba.

3. Bandhig Buugaag ku qoran Afka Hooyo:

Gabagabadii xafladda ayaa ka qaybgalayashii kulanku, oo ay ku jiraan mas'uuliyiintii dawladda ka socday waxay ka qaybgaleen bandhig-buugeed laga furay madasha xuska lagu qabtay. Bandhiggaasi buugaagta la keenay waxay dhammaanba ahayeen buugaag ku qoran Afka Hooyo. Bandhigga oo ahaa mid xiiso leh awgii, waxaa halkaasi lagu iibsaday in badan oo ka mid ah buugaagtii madasha lagu soo bandhigay. Waxaa sidoo kale isla goobtaas lagu soo bandhigay alaabada hiddaha iyo dhaqanka oo jaadad badan ka kooban. Alaabadaasi waxa soo ururisay bulshada reer Cali Sabiix. Qaybo badan oo ka mid ah ayaana halkaasi lagu iibsaday.



Bandhig-dhaqameedkii PEN ee Maalinta Masraxa Dunida 27^{ku} Maarso 2007

Naadiga PEN ee Qalinleyda iyo Halabuurka Soomaaliyeed oo ay kaashanaya Ururka Qaran ee Haweenka Jabuuti ayaa Guriga Ummadda ee magaalada Jabuuti ku qabtay barnaamij dhaqan oo socdey maalin dhan. Barnaamijkaas oo halku-dheggiisu ahaa "*Masraxa Soomaalida iyo Muuqaalka Dumarka*" waxaa lagu beegay xuska maalinta Caalamiga ah ee Masraxa Dunida oo ku aaddan 27^{ka}.

Barnaamijku wuxuu isugu jirey khudbado munaasabadda lagu iftiiminayey, doodwadaag ku salaysan mowduuca munaasabadda iyo suugaanwadaag ay ka qayb qaadanayeen hormuudka halabuurka Jabuuti. Guud ahaan munaasabaddan

waxaa qayb libaax ka qaatay qalinmaal iyo hal-abuur ka tirsan Naadiga PEN, xubno muhiim ah oo ka socdey Ururka Qaran ee Haweenka Jabuuti oo ay horkacaysey Xoghayaha Guud ee Ururkaasi, Marwo Degmo Maxamed Isaaq, masraxyahanno iyo halabuurro ka mid ah ruug-caddaagii iyo horseedkii Masraxa Jabuuti oo ay ka mid ahaayeen Abwaan Aadan Faarax, Ibraahim Jaamac (Garabyare), Siciid Xamar Qoodh, Xasan Cilmi, Cabdi Rooble (Qarshiile), Aamina Jaamac (Gaaseel), Aamina Aw Cali, Cabdullaahi Aadan (Qarbooshe) iyo fannaaniin ka tirsan kooxaha fanka Jabuuti ee Gacan Macaan, Caarrey, Deegaan, 4^{ta} Maaris iyo Xarbi. Waxaa kale oo kulankan dibadda uga yimid, si weynna uga dhex muuqdey laba gabdhood oo ka mid ah hormuudka halabuurka dumarka Soomaaliyeed ee da'da yar, labadaas oo kala ah Muxibbo Xuseen Gacayte iyo Sahra Jaamac Saalax oo labadaba laga soo marti-qaaday Imaaraadka Carabta.

Aqoonwadaagga waxaa lagu furay warbixin-cilmiyeed ku saabsan Masraxa Soomaliyeed iyo kaalinta haweenku kaga jiraan masraxa oo uu kulanka ka jeediyay Guddoomiyaha Naadiga PEN ee Qalinleyda iyo Halabuurka Soomaaliyeed, Maxamed Daahir Afrax. Afrax wuxuu si qeexan toojka ugu ifiyey guud ahaan qiimaha uu masraxu ugu fadhiyo bulshada, gaar ahaanna kaalinta haweenku kaga jiraan masraxa iyo nolosha bulshadaba, iyo sidoo kale sawirka ay riwaayadaha Soomaalidu aalaaba ka bixiyaan dumarka. Waxaa iyana khudbad xiisa leh hakaa ka jeedisay Marwo Degmo Maxamed Isaaq oo ku nooxnuuxsatay kaalinta Ururka Qaran ee Haweenka Jabuuti ka ciyaaro horumarinta dumarka. Waxaa aad loo xiiseeyey soo jeedin hadal iyo muuqaal isugu jirey oo ay soo bandhigtay Muxibbo Xuseen Gacayte oo ah gabar da'yar oo riwaayadaha samaysa curisayna dhawr riwaayadood oo lagu dhigay Imaaraadka carabta. Waxay kale oo soo bandhigtay qaybo ka mid ah riwaayaddeeda ay u bixisay "*Dhaqan iyo Hiddo*". Riwaayaddaas oo ka hadlaysa dhibaatooyinka ku hareeraysan Soomaalida qurbo-joogga ah gaar ahaan dhibaatoyinka ka dhex jira xiriirka qoyska ee ka dhasha iska hor-imaadka dhaqammada isdiiddan ee u

dhexeeya da'da soo koraysa iyo waalidiinta. Soo jeedin kale oo aad u xiisa badan ayaa waxaa loogu sacab-tumay Sahra Jaamac Saalax oo ah gabar qalin-maal ah oo wax ku qorta afka Ingiriisiga, laba buugna ku daabacday dalka Imaaraadka Carabta.



Islaamka iyo Suugaanta Soomaalida: Bandhiggii Ramadaanta iyo Hargeysa Readers Club

Naadiga Akhristayaasha ee Hargeisa Readers' Club ayaa habeenimadii 28th September 2007 kuna beegnayd Ramadaan 16, 1428, waxay soo bandhigeen barnaamij xiisa leh oo halkudheggiisu ahaa "*Islaamka iyo Suugaanta Soomaalida*." Barnaamijkan, oo lagu qabtay huteelka Fish and Steak House ee magaalada Hargeysa, waxaa ka soo qayb galay dad tiradoodu kor u dhaaftay 200 oo qof.

Wuxuu ahaa barnaamij ka kooban muxaadaradii ah, afur, casho-sharaf, iyo daraasad suugaaneed aad u xiiso badan oo ay soo bandhigeen koox lagu magacaabo Tix-miir. Waxaa goobtaas muxaadaradii ah ka jeediyey Sh. Cabdiraxmaan Ibraahim. Waxa iyaguna hadallo ka jeediyey Boobe Yuusuf Ducaale oo Naadigu ku tilmaamay "*Saaxiibka Dhalinyarada*", gabayaaga da'da yar, Yuusuf Shaacir. Waxaa iyana hadlay Dr. Maxamed Ibraahim Sh. Cali iyo Yuusuf Cusmaan Garas oo iyagu ka mid ah dhallinyarada Naadiga. Barnaamijka kooxda Tix-miir, oo ahaa mid si weyn loo xiiseeyey, wuxuu ka koobnaa qodobbo ay ka mid ahaayeen saamaynta suugaantu nolosha ku leedahay iyo waxa ay ka qabto diinta islaamku, milicsiga gabayada ka siibtay sallaanka diinta iyo kuwa la jaan qaaday, iyo waliba fan, majaajillo iyo maansooyin ay iyagu leeyihiin.

Naadiga Akhristayaasha Hargeysa waa naadi loo yagleelay kor-u-qaadista qoraalka iyo akhriska. Waxa la asaasay bishii May ee 2006, waxana ku bahoobay 13 dhallinyaro ah oo isugu jira gabdho iyo wiilal tacliinley ah. Bil kasta Jimcaha u dambeeya ayuu Naadigu dadweynaha u soo bandhigaa buug

la soo xulay oo loo arkay in uu wax ku kordhinayo nolosha iyo aqoonta dadka. Ilaa iyo hadda waxaa Naadiga u suurtaggashay in uu soo bandhigo 14 buug.

Bahda HALABUUR waxay hambalyo iyo bogaadin u tebinayaan da'yartaas reer Hargeysa ee garaadkoodu gaarsiiyey inay ku midoobaan xiisaynta aqoonkororsiga, fahmayna akhriska qofku iskii isugu hawlaa inuu yahay furaha aqoonta dhabta ah. Waxaan rajaynaynaa naadigan jid-bixiyeenka ah inay ku daydaan dhallinyarada kale ee ku nool magaalooyinka Soomaalida ee ay sida xun u wada saamaysay saboolnimada aqoontu xilligan burburka iyo busaaradda maskaxda.

Shirweynaha 10^{aad} ee Caalamiga ah ee Cilmibaarista Soolmaalida

Qaybtii koowaad ee Shirweynaha 10^{aad} ee caalamiga ah ee Ururka Cilmibaarista Soolmaalida ayaa ka dhacay magaalada Columbus ee gobolka Ohio ee dalka Maraykanka 16^{kii} -18^{kii} bisha Agoosto 2007. Qaybta labaad ee shirweynaha ururkaasi waxaa lagu qaban doonaa magaalada Jabuuti bisha Disembar 13^{ka} -15^{ka}, 2007, waxaana marti gelin doonta Jaamacadda Jabuuti. Faahfaahin dheeraad ah oo arrimahan ku saabsan waxaad ka heli kartaa shabakadda ururka oo cinwaankeedu yahay:

www.somalistudies.com

Qaybta labaad ee lagu qaban doono Jabuuti iyadana waxaa faahintiisa lagala xirii karaa:
adamhoussein@yahoo.fr;
abdirachid_mohamed_ismail@yahoo.fr;
ka_diraneh@hotmail.com.

Kudu Arts Festival: A Collaborative Creative Arts Dialogue and Happening (London)


In the week of October 14-20, 2007, Numbi, the umbrella organization for the annual Kudu Arts Festival, presented an international cross-art creative arts and culture festival. A highly talented Somali-British artist, Kinsi Abdullah and her collaborators engaged an international group of artists, scholars, and creatively inclined individuals in the creation, presentation, performance, and critical evaluation of a wide range of cultural forms, including film, photography, music and song. The result was a marvellous festival which benefited art lovers in East London and beyond. Halabuur congratulates Numbi and Kudu Arts for such an innovative venture which brought together some of the most gifted Somali (and other) artists of our times. This certainly represents a new cultural avant-garde in the Somali art scene.

(See www.myspace.com/kuduarts or contact kinsi.kudu@talk21.com).

Somali Week Festival in London


An impressive, week-long cultural festival, organized by Oxford House, took place in London from October 20-27, 2007. This Somali week celebration brought together Somali artists and intellectuals from all over the world and showcased a broad range of Somali cultural achievements. The festival included poetry recitals by some of the most famous Somali poets from all over the world such as Maxamed Ibraahim Warsame "Hadraawi," Maxamed Xaashi Dhamac "Gaarriye", Xasan Sheekh Muumin and Xasan X. xabdillaahi "Xasan Ganey". It also showcased some of the most famous musicians such as Axmed Ismaaciil Xuseen "Hudaydi," Axmed Cali Haaruun "Dararamle," Aweys Khamiis Mabuuse, Jookhle, Aar, and Maxamuud Cumar, as well as well known singers such as,

Maryan Mursal, Faduumo Qaasim and Seynab Cige. The celebration also included a play (and panel) about “Family Matters,” a panel on Human Rights in the Horn, a roundtable on the Somali language in the 21st century organised in conjunction with the Somali-speaking PEN. The festival also included the launch of two books, *Aanaddii Nageeye* by Ibraahim Yusuf “Hawd” and *Silent Voices*, with contributions by upcoming Somali writers such as Sahra Cawale, Shaafi Saciid, Adam Dirir, Cabdi Bahdoon, and Leyla Cali Cige. Folklore dances and a special showcasing of Djiboutian songs and theatre were also part of this ambitious celebration. Halabuur congratulates organizers, participants, audience, and funders with such a splendid and multi-faceted cultural celebration.



Conference on
Somali Women’s *Buraanbur*
(San Diego, U.S.)

On Saturday, March 3rd, 2007, a conference on the *buraanbur*, the most significant poetic genre of Somali women, was held at a local community development center called Center for Bridging Communities in San Diego, California (U.S.). Speakers included male and female experts on Somali literature, especially women’s literature, as well as Somali women poets such as the famous singer and accomplished poet Saado Cali Warsame and Dahabo Cilmi, known both for her *buraanbur* compositions and performance. Yasmiin Muuse, who also writes for the website Wardheernews.com, was a major force behind the conference, which, it is hoped, will become a yearly event.



BOOK NEWS / XOGTA BUUGAAGTA

Boggan waxaan akhristayaashayada kula socodsiinaynaa xogta aan ka hayno buugaagtii soo baxday labadii sano ee ugu dambeeyey, ahna kuwa ku saabsan arrimo la xariira afka, suugaanta iyo dhaqanka Soomaalida. In kastoo aannaan isku koobin, haddana waxaan tixglin gaar ahaaneed siinnay buugaagta ku qoran af Soomaaliga.

- Aadan Xasan Aadan (Beleloo), *Saab-xidb – Diivaanka maanso*. Djibouti, by the author, 2005.
- Aadan Xasan Aadan (Beleloo), *Hadbkeii Madoobaa: Riwaayad Taariikheed*. Somali translation of the historical play (in Arabic) about Lij Iyasu of Ethiopia called *Al-Dull al-Aswad*, by Najjib al-Kiilaani. Djibouti: by the author, 2006.
- Aadan Xasan Aadan (Beleloo) and Maxamed Cabdillaahi Riiraash, *Futuux al-Xabasha: Mahadho -Reebka Sooyaalka (Qarnigii 16 aad)*. Djibouti: Halabuur Centre, forthcoming 2007. A Somali translation of the 16th-century Arabic chronicle on the jihad wars in the Horn of Africa.
- Adam S. Abdi, *Laba-Qarax Guur*. Minneapolis, 2006 (see www.somaliwriters.com).
- Ahmed Sabriye Gaabow, *Taariikhdu waa ma Guuraan*, Stockholm: Forfatteres Bokmaskin, 2005. (ISBN 91-7910-636-6), (agaabow64@hotmail.com).
- Anwar Maxamed Diiriye, *Literature of Somali Onomastics & Proverbs With Comparison of Foreign Sayings: Barashada Xikemadda Magacyada & Maabmaahaba Soomaalida*. Minneapolis: Gobaad Press, 2007 (ISBN: 0-9726615-1-4).
- Aw Jaamac Cumar Ciise, *Diivaanka Gabayadii Sayid Maxamed Cabdille Xasan*, Second Edition. Djibouti: Xarunta Cilmi Baadhista ee Jabuuti (CERD), 2005. (For all Aw Jaamac's books, see www.cerd.dj; email: cerd@intnet.dj).
- Aw Jaamac Cumar Ciise, *Taariikhdi iyo Daraawiishta iyo Sayid Maxamed Cabdille Xasan (1895-1920)*, Second Edition. Djibouti: Xarunta Cilmi Baadhista ee Jabuuti (CERD), 2005.
- Aw Jaamac Cumar Ciise, *Suugaanta Geela, Fardaha & Haveenka*. Second Edition. Djibouti: Xarunta Cilmi Baadhista ee Jabuuti (CERD), 2005.
- Aw Jaamac Cumar Ciise, *Hilimadii Suugaan yahannadii Hore*. Second Edition. Djibouti: Xarunta Cilmi Baadhista ee Jabuuti (CERD), 2005.
- Aw Jaamac Cumar Ciise, *Doorke Jabuuti & Dib u Heshiisiinta Soomaalida*. Second Edition. Djibouti: Xarunta Cilmi Baadhista ee Jabuuti (CERD), 2005.
- Boobe Yuusuf Ducaale, *Dhaxal-reeb – Horaad*. Addis Ababa, Flamingo Press, 2007.
- Cabdi Muxumed Amiin, *Hilin Hayaan: Diivaanka Suugaanta Abwaan Cabdi Muxammad Amiin*, Panga, Sweden: Iftiinka Aqoonta, 2006. (Contact: amiin42@hotmail.com or amiin42@yahoo.com).
- Cabdillaahi Cawed Cige, *Ladb*. Pisa: Ponte Invisibile, 2005. ISBN 88-88934-04-9. (See www.redsea-online.com).
- Cabdiqaadir Nuur Xuseen (Maax), *Diivaanka Xiddigaha Maansada*, Muqdisho: Madbacadda Xamar Cadde, 2006.
- Cumar Muhammad Warsame, *Adab al-tijl al-Sumali, Sana`a*, Yemen: Markaz `Ibadi li'l-Dirasat Wa'l-Nasr, 2007. (FAX: +967 485692).
- Ibraahin Yuusuf Axmed "Hawd," *Aanadii Negeeye*. Pisa: Ponte Invisibile, 2007. ISBN 888893405-7.

- Kapchits, Georgi L., *Faaliyibii la Bilkeyday: A Soothsayer Tested*. Moscow, 2006. ISBN: 5-86748-051-8. (See <http://kapchits.narod.ru>).
- Khaalid Cali-Guul Warsame, *Geel Waa Magool Xoolaad: Sungaanta Geela (Poetry about Somali Camels)*. Stockholm: Scansom, 2006. (ISBN 91-974409-5-7).
- Maryan A. Hassan. *Dhegdbeer: A Scary Somali Folktale*. Illustrated by Betsy Bowen. Minnesota Humanities Commission Somali Book Project. St. Paul, MN: Minnesota Humanities Commission, 2007. ISBN-10: 1-931016-18-6 (paper), 1-931016-19-4 (hard cover).
- Maxamed Baashe Xaaji Xasan, *Guri Waa Haveen: Kartida Haveenka Soomaalida (The Bedrock of the Family: Somali Woman and her Potential Role)*. London: Bashe Publications, 2006. ISBN: 0-9547674-1-1. (Mohamedbashe@hotmail.com).
- Said Salah Ahmed. *The Lion's Share (Qayb Libaax): A Somali Folktale*. Illustrated by Kelly Dupre. Minnesota Humanities Commission Somali Book Project. St. Paul, MN: Minnesota Humanities Commission, 2007. ISBN-10: 1-931016-13-5 (paper), 1-931016-12-7 (hard cover).
- Vianello, Alessandra and Mohamed M. Kassim, eds., *Servants of the Shari`a: The Civil Register of the Qadi's Court of Brava, 1895-1900*. African Sources for African History, Vol. 6. Leiden: Brill Publishers, 2006. (2 vols.).



Murti-dhaari baa yidhi¹

Saddex baa ila hadashay:

1. Gabow baa ila hadlay oo yidhi:
“maan kaa tebiyaa mise waan kaa taah-taahiyaa?”
 2. Waxan idhi:
“hayga tebinine iga taah-taahi dan baa iigu jirtee”.
 3. Kaadidaydii baa ila hadashay oo tidhi:
“maan kugu dhegaa mise waan kugu dhib-dhibcaa?”
Waxaan idhi:
“haygu dhegine igu dhib-dhibic dan baa iigu jirtee”.
- Islaantaydii baa ila hadashay oo tidhi:
“maan kaa tagaa mise waan kaa ta-tallaabsadaa?”
Waxaan idhi:
“hayga tegine iga tal-tallaabso dan baa iigu jirtee.”

-Gaboobe Sange-

Adduun i khatel! Markaan tabar hayeyna talo ma hayn. Hadda oon talo hayana tabar ma hayo.

-Aadan Gallyadh-

Fidno ha kicinina, foojignaanna ogaada, waxan soo noqonaynna ha isku waayina.
-Cabdalle Caaggane-

¹Waxaan ka soo ururiyay barnaamijka dhaqanka “War iyo Waayo Arag” ee ka baxa Raadiyow Jabuuti

Sahanka iyo Warbixin- murtiyeeddiisa

Ururiye:

Cabdalla Xaaji Cusmaan

Reer guuraaga Soomaaliyeed iskama guuraan sahan la'aan. Siiba marka la damco in loo guuro dhul fog oo aan war sugan laga hayn, hase yeeshee lagu fekeray in uu xoolaha uga wanaagsanaan karo halka markaas la deggan yahay. Waxaa la diraa nin ama dhawr nin oo lagu kalsoon yahay dhanka kartida, dhanka fiiro-dheerida, dhanka war-galnimada iyo dhanka dal-yaqaanimada intaba. Sahanku dhulka uu soo maray waxyaalaha uu ku soo arkay labo talo middood: Wax wanaagsan

ayaan soo arkay ee ha loo guuro, ama wax wanaagsan soo ma arkin e ha la negaado. Labadaa talo marba ta uu wado iyo warbixinta uu ku salaynayo kuma sheego hadal caadi ah. Marka uu soo hor fadhiisto ragga u soo shiray ee warka ka sugaaya ahna kuwii sahanka u dirsaday, sahmiyuhu wuxuu soo bandhigaa xog-warran la murtiyeeyay, la suugaaneeyay, aad loo kala hufay, hab-dhac suugaaneed ku socda, hadal aan jirinna laga ilaaliyey. Tusaalaha loo soo xulay tirsigan Halabuur waa laba dheeg oo laga dhaxlay suugaan hiddeedda Soomaalida, siiba deegaannada Galbeedka oo uu ku jiro geyiga Jamhuuriyadda Jabuuti. Waa laba warbixinood oo ay kala jeedinayaan laba sahan oo kan hore ka dayrinaayo wixii uu soo arkay kan labaadna ku bishaaraynayo inuu soo arkay barwaaqo iyo tu san oo reerka loo raro.

Sahankii soo hungoobay

Toddoba habeen baan maqnayn, oo toddoba habeen baan maqnayn.
Magan baan ahayn oo magan Ilaahay baan ahayn.
Waan warramaynaa oo waa nabad.
Sahan baan tagnay oo sahan wedkii galay baan tagnay.
Wixii aan ka tagnay wax dooriya indhahayagu ma arag, dhegahayaguna ma maqal.
Dhulka siigo maahee saxar kama soo sarreeyo.
Madheer haddii la jiido xaab kama soo qaaddo.
Dameer laba fool lihi waxba kama soo gooyo.
Carrab sagaaro waxba kama soo qaado.
Mici maraar geel afka dhulka uu ka daayey.
Geedaha saxarna ma dul yaal saxarna ma hoos yaal.
Abaartu waa tu weyn.
Waa oday ka wareeris.
Garraatigay dhigatay.
Biyuhu waa dhiidhi, waa gimish, waa bir is-kula-guur, waa weji-dil, waa u-ab-tiris.
Biyuhu wiyeer iyo ceel abaysin ah bay isugu tageen.
Ceelkii beeyo la odhan jirey waa ka dhaqaaq.
Ceelkii la odhan jirey ceeri waa ka dhaqaaq,
Ceelkii bataax ahaa waa ka dhaqaaq.
Gal iyo dhijaanna waa ka dhaqaaq.
Xooluhu hadday soofayaan rukun baa hadha.

To Our Readers

The editors would like to encourage and welcome contributions from anyone constructively interested in any aspect of Somali literature and culture. Manuscripts may be either in Somali or in English and may represent academic or other kinds of writings. Creative works (poetry, short story, drama, and so forth) are especially welcome. Articles should be between 2500-3000 words in length and typed on a computer (double-spaced, with correct page numbering). Please submit to us both a hard copy and an electronic copy on CD or by email attachment. A brief biographical note, including the field of intellectual activity and the major published or performed works by the author should also be submitted.

HALABUUR is an independent and not-for-profit publication that belongs to its readers and contributors. It relies on the support of its readers for its continuation and future development. You can support the journal by:

- * Reading it regularly
- * Advertising in it
- * Writing letters and articles
- * Taking up a subscription or making a donation by filling in the form below and sending it, with payment, to the address provided.

Ku: Akhristayaasha

HALABUUR waa wargeys-xilliyeed madax bannaan oo ku dhashay dedaal dad iskood isu xilqaamay, ujeeddadooduna tahay in gacan laga geysto badbaadinta iyo horumarinta dhaqanka iyo suugaanta Soomaaliyeed waqtigaan burburka. Xag dhaqaale iyo xag fikradeed midna ma jirto cid uu ku tiirsan yahay oo aan ahayn akhristayaashiisa iyo ku-qoreyaashiisa. Marba gacanta aad ka geysato, adiga akhristaha ah, ayay ku xiran tahay guusha, sii-socodka iyo sii-horumarka HALABUUR. Siyaabaha aad u garab gali karto HALABUUR waxaa ka mid ah:

- * In aad si joogta ah u akhrisato;
- * In aad qoraallo iyo waraqa u soo dirtid;
- * In aad ogeysiisyo/ xayeysiis (dhaqan iyo aqoon i.w.m. ku saabsan) ku daabacato;
- * In aad buuxisid soona dirtid shaxda hoos ku qoran ee rukumashada sannadka.

Name /Magac _____

Address /Cinwaanka _____

I/we wish to take up an annual subscription of HALABUUR.

Waxaan dalbanayaa rukumasho sannad ah HALABUUR.

ANNUAL SUBSCRIPTION RATES

Qiimaha rukun-sannadeedka

Djibouti

Institutions / Haya'daha FDJ 3800

Individuals / Qofka FDJ 2200

Donation / Deeq FDJ

Outside Djibouti:

To be announced.

Please make cheques or money orders payable to HALABUUR Journal and send them to:

Halabuur Journal, PO Box 725, Djibouti, Republic of Djibouti

Jeegagga waxaa lagu qorayaa Halabuur Journal waxaana lagu soo hagaajinayaa:

Halabuur, BP 725 Djibouti, Republic of Djibouti.

All submissions and correspondence should be addressed to: HALABUUR, P.O. Box 725, Djibouti, Republic of Djibouti.

Tel. +253 320430; Email: journal@halabuurcentre.org.

Qeexid Khusaysa Soo Qorayaasha:

HALABUUR wuxuu soo dhaweynayaa dhammaan qoraallada iyo fikradaha dhisme-kalkaalka ah ee guud ahaan qalinleyda gaar ahaanna halabuurka Soomaaliyeed iyo saaxibbada Soomaalida.

Qoraallada wargeyska loo soo dirayaa waxay noqon karaan lafagur dhaqan-bulsheed, faaqidaad suugaaneed, ka-faalootan iyo ka-war-bixin wax-qabad dhaqan ama suugaaneed, taariikh-nololeed kooban, halabuur suugaaneed, sida maanso, sheeko gaaban, riwaayad ama qiso (novel); falanqayn buug (buug-daalac), meerisyo (extracts) laga soo qaatey suugaan-hiddeeddii Soomaalida iwm; kuwaas oo ku kala arooraya lixda qaybood ee uu ka koobanyahy dhismaha joogtada ah ee wargeyska (eeg tusmada). Waxaa kaloo wargeysku soo dhaweynayaa wararka dhacdooyinka ama hawlaha laga qabto xagga dhaqanka iyo aqoonta (sida bandhigyo dhaqan, kulammo cilmi iyo kuwo suugaaneed, buugaag iyo riwaayado cusub iwm)

Af-Soomaali iyo af-Ingiriis qofba kii uu doono ayuu ku soo qori karaa. Qoraalku haddii uu yahay gorfayn (maqaal) ama halabuur tiraab ah (sheeko, riwaayad, iwm) waa in uu dherarkiisu noqdaa 2500-3500 eray, waana in kombiyuutar lagu garaacaa. Qofkii heli kara kombiyuuter waxaa laga codsanayaa in uu soo diro saddex nuqul oo daabacan iyo isagoo ku jira CD ama email. Waxaa loo baahan yahay in la soo raaciydo taariikh-nololeed aad u kooban oo uu qoruhu ku muujinayo aagga uu ku hawllan yahay iyo wax-qabadyada uu ilaa hadda ku soo saaray qoraal la daabacay, cajalado faafay, bandhig masrax, tebin idaacadeed/TV iwm.

Qoraallada iyo waraaqaha dhammaan waxaa lagu soo hagaajinayaa cinwaankan:

HALABUUR, P.O. Box 725, Djibouti, Republic of Djibouti, Tel: +253 320430.

Email: journal@halabuurcentre.org

Where You Can Buy Halabuur Meelaha aad ka Heli Karto Halabuur

Djibouti:

(a) Main office: Halabuur Centre,
P.O. Box 725, Djibouti, Republic of Djibouti.
Tel. +253-320430.

Email: journal@halabuurcentre.org

(b) Librairie Victor Hugo, Rue de Rome, Djibouti, B.P. 2560.
(Tel. +253-356757).

Muqdisho:

Barakaat Bookshop,
Bakara Market, Muqdisho
Tel: +2521-652200/ 002525-933397/002521-964941.

Hargeisa:

Red Sea Bookshop (hargeisa@redseonline.com)
Tel. +252-521509; Mob. +252-4415656

Boosaaso:

City Center Enterprises LLC,
Airport Road; Tel: +252-5-824636/796393

Gaalkacyo:

Carwo Kooshin; Tel: +252- 5436559.

United Kingdom:

Town Communications
127 Kentish Town Road
London NW1 8BP, UK

Sweden:

Scansom Publishers
Box 6118, 17506 Jarfalla
Stockholm, Sweden

Canada:

a) Scansom Publishers,
8 Arborview Crescent,
Toronto, Ontario, M9W 7B4 Canada
Tel: 416-749 2761; scansom@scansom.com,
b) Golden Hair Design, 2070 Lawrence Ave.
West Weston, Toronto, M9N 1J1 Canada
Tel 416-249 0171.

United States of America

a) Anwar Maxamed Diiriye,
Gobaad Communications and Press, P.O. Box 141091,
Minneapolis, Minnesota 55414, U.S.
Email: anwar@usfamily.net
b) Lidwien Kapteijns,
Department of History, Wellesley College,
Wellesley, MA 02481, U.S.A.
Email: lkapteij@halabuurcentre.org

United Arab Emirates

La xariir saddexdan midkood/
Contact one of the following three:
a) Muhibba Ga'aete
Tel. +971-650726556
Email: raw3a77@hotmail.com
b) Zahra Djama Saleh
Tel. +971-507981480
Email: SalehZahra@hotmail.com
c) Daallo Dubai
P.O. Box 21297, Dubai Airport Free one
Tel. +971-4-2994485. Fax: 971-4-294486.
Email: Daallo@Emirates.net.AE.

